DISTRICT196
One District. Infinite Possibilities.

Sannad Dugsiyeedka 2019-20

GUUD MARKA XAQUUQDA & WAAJIBAADKA ARDAYGA

www.District196.org

This handbook is available online at:
Este manual está disponible en línea en:
Buugan waxaa la heli karaa barta internetka
www.district196.org/parents

Augusto 2019

Waalidiinta Qaaliga ah ee Ardaydu u dhigato Gudoonka Wax barashada ee 196 (District 196):

Ku soo dhawaada sannad Dugsiyeedka 2019 -20! Si aan ugu fidino ardayda, shaqaalaha, waalidiinta deegaan wax lagu barto oo amaan ah ayaa gudoonka wax barashadu waxa uu daabacaa buugan gacanta ee sannad walba la cusboonaysiiyo si uu u sharxo xaquuqda iyo waajibka saaran ardayga iyo wixii ardaygu uu mutaysanayo hadii uu dhaqan xummo la yimaado. Akhbaar muhiim ah oo ku saabsan qadada lacagteedu jaban tahay ama lacag la'aanta ah ayaa waxaa laga heli karaa bartanka buugan gacanta.

Fadlan qaado qadar daqiiqado ah si aad u eegto akhbaarta Guud marka ah ee ku qoran buugan gacanta ee ka hadlaysa Xaquuqda iyo Waajibaadka Ardayga ka dibna la falanqee akhbaarta buuga ku qoran ilmahaaga dugsiyada dhigta, hana kuu noqdo tixraac aad ka eegtid wixii aad u baahato in aad ogaato xilliga lagu jiro sannad dugsiyeedka. Kolkii iskuulka la furo macalimiintu iyana si kooban ayey ardayda isula eegi buugan gacanta.

Qodobada waaweyn ee sannadkan buugan gacanta lagu soo kordhiyey ama wax laga bedelay waxaa ka mid ah:

- Cusboonaysiinta Gudoonka 196 ee Mas'uuliyiinta loo magacaabay Xaquuda Aadaha (p. 8);
- Cusboonaysiinta Gudoonka 196 ee habraaca ku taxa-luqa aftiyada ardayda (p. 18);
- Ku darida akhbaar ku saabsan muhimida ay leedayahy imaansha fiican ee iskuulka (p. 21);
- Xoog saarida gargaarada ardayda dhibku ka hayso inay hab fiican u dhaqmaan (p. 24);
- Ku darida tixraac ah kooxo kala du-duwan oo qiimeyn ku sameeya khataraha imaan kara (p. 27);
- Cawaaqidyada ganaaxyada oo wax laga bedelay ama/iyo qeexitaanada qaar ka mid ah dambiyada oo ay ku jiraan, gacan-qaadyada waaweyn, dhilaynimo, kufsi iyo tubaaco ama E-sigaar (pp. 29, 36, 38, 42).

Waad ku mahadsan tahay in aad waqti geliso sidii aad ku ogaan lahayd akhbaartan muhiimka ah ee ku qoran buugan gacanta Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan arimahan, la xiriir maamulaha iskuulka ilmahaaga.

Waa mahadsan tahay,



Mary Kreger
Aaryowga

Para tener acceso a la versión de este manual en español vayan a: www.district196.org/handbook. Si usted habla español y tiene preguntas, favor de llamar al teléfono (952)431-8993. Durante el verano, llama al 651-423-7916.

HADDI AAD SOMAAALI TAHAY OO AAD QABTID WAX SUAAL AH FADLAN LA SOO XIRIIR FAISAL MADAR (952)769-7625

If you speak (Spanish/Somali/Arabic) and have questions, call… .

إذا كُنت تتكلم اللغة العربية و
كانت لديك أسئلة حول المدرسة
الرجاء الإتصال بفيصل مدر (Faisal Madar)
و رقمه (952)769-7625

Tusmooyinka Buugan yar

Xaquuqda Ardayga

Mamnuuca khashkhashaada iyo dad kala soocida,
(oo ay ku jirto jinsi kala soocidu sida uu qabo XeerkaTitle IX),gacan qaadka ama jirabaad..... 6
Iskuulada Minnesota oo gargaar iyo amaanba leh 9
Ardayda hesha adeegyada waxbarashada gaarka ah..... 10
Habraaca ardayda ee Section 504 10
Ka shakin silcin ilmaha la silciyo 10
Mashaariicda Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota..... 11
Wareysiga ardayga ee Laanta Adeega Bulshada iyo Mas'uuliyiinta Hay'adaha Ilaalinta Sharciga 12
Xafidida iyo Ilaalinta Diiwaanka Ardayga..... 14
Xoojinta Ilaalinta Xaquuqda Gaarka u ah Ardayga Yar yar ee Uulada ah 18
Muuijnta Wadanimada 18
Amaan iyo Nabad gelyo 19
Ogaysiika Caafimaadka iyo Amaanka..... 19
Lacagaha Cuntada iskuulka ee aan la bixin.....20
Caymiska & dhumida hantida.....21

Waajibaadyada Ardayga

Imaanshaha Ardayga 21
Akhlaaqda iyo Edbinta Ardayga..... 23
Khidmada iyo Ganaaxa ardayga la saaro..... 23
Ku qaadida Ardayga gawaari aan ahayn kuwa Iskuulka 23
Xafidida Akhbaarta Imtixaanada ee Ardayga..... 23
Hab Dhaqanka laga rabo Ardayga Iyo Ciqaabta uu mutaysan karo hadii uu si xun u dhaqmo..... 24
La socod siinta Shaqaalaha wixii gacan qaadka ah ee Ardayga lagu arko 27
Isticmaalka Telefoonka gacanta iyo aaladaha kale ee shakhsiyanka ah.....27
Hab Dhaqan Xumada iyo Ciqaabta ay keeni karto 28
Gaadiidka ardayga: Hab Dhaqanka laga filayo Ardayga..... 42
Ardayda la siiyo wax barashada gaarka ah: Cawaaqibka la marin hadii edeb darro la yimaadaan44
Ardayda Waxbarashada Gaarka ah la siiyo: Dhaqan Xumadadooda iyo Ciqaabta ay keeni karto..44
Xalinta Wixii dhib ah ee jira 47
Baarida iyo Qabashada alaabta mamnuuca ah 47
Nidaamka Eryida ardayga: Fasalka ka saarida, fariisinta, Eryida Iskuulka laga eryayo..... 48

Oraah yar oo ku Saabsan buugan yar

Buugan gacanta waxyaabaha ku jira waxaa ka mid ah guud mar ku saabsan habraacyada iyo hanaanada u degsan District 196, iyo waajibaadka iyo xaquuqda ardayga. Qoraalada markii ayaan la joogaba waxaa la cusboonaysiiyaa si loo waafajiyo wixii sharciyada ama daruufaha iska bedela . Sidaa awgeed, waxaa laga yaabaa in qoraalkan wax laga bedelay intii buugan la daabacay ka dib oo ahayd kulaylihii sanadka 2019.

Hadii aad wax su'aal ah qabto ama aad jeclaan lahayd in aad ogaato akhbaar gaar ah oo arin khaas ah ku saabsan la soo xiriir maamulaha iskuulkaaga

Xaquuqda Ardayga

Gudoonka wax barashada waxa uu garawsan yahay in ardaygu uu xaq u leeyahay xaquuqda xornimada ah ee qof kasta oo muwaadin ahi uu leeyahay. Mid ka mid ah hadafyada aasaasiga ah ee dugsiyada dowladu waa in uu ardayga u diyaariyo mustaqbalka, sidii ay qayb uga noqdan lahaayeen umadda ay ku dhex nool yihiin inteeda kale ayna u aqbali lahaayeen mas'uuliyada saaran oo la rabo in ay ka soo baxaan iyo in ay dareemaan xaquuqda ay leeyihiin iyo waajibaadka xaquuqdaa weheliya.

Gudoonka wax barashada waa in uu siiyaa ardaygu goob uu ku gudan karo xaquuqda ummada uu ku dhexe nool yahay u ogoshahay, waa in ardaygu u ogolaadaa mas'uuliyada ka saaran waajibaadkiisa.

Ardaydu wax ay xaq u leeyihiin in ay si xor ah u muujin karaan aragtidooda, aragtidaasi qoraal ama afba ha noqotee. Caaliqida iyo kala duwanaanta aragtiyadu waa saldhiga hanaanka waxbarashada. Hase yeeshee, hadalka beenta ah, shoobaraha, hanjabaada, iyo isticmaalka af la gaadada, af xumada iyo foorjeynta, iyo dhiiri gelinta jabinta sharciga ama nidaamka iskuulka lama ogola lamana sameyn karo.

Ardaydu inta ay iskuulka joogaan ama ay gaadiidka iskuulka saaran yihiin waxay xaq u leeyihiin in ay helaan deegaan amaan iyo xasilooniba leh oo xor ka ah hanjabaad.

Mamnuuca Khashkhashaada, Dad kala soocada (oo ay ku jiraan jinsiyada kala sooca [Title IX]), Dagaalka iyo Jirabaada

Habraaca

Gudoonka waxbarashada ee District 196 waxaa ka go'an abuurida deegaan wax barasho iyo shaqo oo xor ka ah khashkhashaad, dad kala soocid, gacan qaad ama jirabaad. Gudoonka Wax barashada ee District 196 waxa uu mamnuucaa dhamaan wixii khashkhashaad ah, dad kala soocid ah, gacan qaad ah ama jirabaad ah ee ah sidan hoos ugu qeexan.

Waxay xaq gudub ah ku tahay habraaca u degsan gudoonka District 196 in arday, shaqaale ka tirsan gudoonku ama cid kale ay khashkhashaan shaqaale, arday, booqdeyaasha ama cid kale iyadoo khashkhashaadaasi ku saabsan tahay galmo, midab, diin, midab, caqiido, qoomiyad, guur, qoys, naafanimo, cayr qaadasho, cida lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose *da' ama akhbaar la xirriirta hidaha sida ku xusan habraacan iyo xeerar hoosaadka kale ee gargaara.

Waxay xaq gudub ah ku tahay habraaca u degsan gudoonka District 196 in arday ama shaqaale ka tirsan gudoonku ama cid kale oo sedexaadi in ay u gaysato ama ugu hanjabto in ay u gaysato ama isku daydo inay u gaysto waxyeelo cid kale iyadoo waxyeeladaasi ay ku salaysan tahay galmo midab, diin, midab, caqiido, qoomiyad, guur, qoys, naafanimo, cayr qaadaso, cida lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose * da' ama akhbaar la xirriirta hidaha* ee shaqaale ama arday, booqde ama cid kale.

Waxay xaq gudub ah ku tahay habraaca u degsan gudoonka District 196 in arday ama shaqaale ka tirsan gudoonka ama cid sedexaadi ay ay qorshayso, abaabusho, dhiiri galiso gargaarto ama geysato waxa la yiraa jirabaada. Sidoo kale waxay xaq gudub ah ku tahay habraaca u degsan gudoonka District 196 in arday ama shaqaale ka tirsan gudoonku ama cid kale ay ku sameeyaan dad kala soocid shaqaale, arday, booqdeyaasha ama cid kale iyadoo dad kala soocidaasina ay ku saabsan tahay galmo midab, diin, midab, caqiido, qoomiyad, guur, qoys, naafanimo, cayr qaadasho,

lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan **hoose** ...' ama akhbaar la xiriirta hidaha sid ku xusan habraacan.

Gudoonka District 196 waxa uu u hogaansamaa sharciyada dowlada dhexe iyo kuwa gobolka ee mamnuucya dad kala soocda (oo ay ku jiraan dad kala soocida ku salaysan jinsyada) oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn, Xeerarka (Title IX ee Educational Amendments of 1972, Title VI and VII of the Civil Rights Act of 1964, the Age Discrimination Act of 1967, Section 504 of the Rehabilitation Act of 1973, the Americans with Disabilities Act (ADA) of 1991Genetic Information Nondiscrimination Act ee2008 iyo the Minnesota Human Rights Act). Nuqulada sharciyadaa waxaa laga heli karaa iyadoo lacag la'aan ah mid kasta oo ka mid ah dhismayaasha gudoonka iyo shabakada gudoonka.

Ciddii sharciyadaa kor ku xusani ay xaquuqdooda dhowraan iyadoo sababtu tahay jinsiyad, midab, caqiido, qoomiyad, lab/dhagid, qoys, naafanimo cayr qaadasho cida lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose * da' ama akhbaarta hiddaha * waa in aan laga reebin in ay ka qayb galaan, ama aan loo diidin in ay ka faa'iidaystaan iyadoo dadka laga soocayo wixii mashaariic wax barasho ah oo ay ku jiraan farsamooyinka gacantu ama hawlo ah ee uu gudoonku maamulo.

Gudoonku talaabo baaritaan ah ayuu ka qaadi mar hore dhamaan wixii ashtakooyin ah ee soo gaara ee ku saabsan khashkhashaad, dad kala soocid, dagaal, ama jirabaad talaabadaasi waxay noqon kartaa mid afka ah ama mid adin ah si loo edbiyo ama talaabo munaasib ah looga qaado cidii shaqaalaha gudoonka ka tirsan ama arday ah oo lagu helo in ay jabisay habraacan.

Shaqaalaha iyo ardayda waxaa waajib ku ah in ay soo sheegaan wixii jira ee ku saabsan khashkhashaado, dad kala soocid, oo ku salaysan midab, diin, midab, caqiido, qoomiyad, guur, qoys, naafanimo, cayr qaadasho, cida lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose * da' ama akhbaar la xiirrira hidaha*. Gudoonka waxaa waxa ay dejisay nidaam magacaaba qofka shaqalaaha ka mid ahi inuu noqdo qofka qaabilsan qabashada wax bixinada oo dhan. Talaabo munaasib ah ayaa laga qaadi dhamaan cidii soo sheegi wayda wixii dad kala soocid ah, khashkhashaad ah, dagaal ah ama jirabaad ah ee ay og yihiin

Hab raacani ma diidayo xaquuqda shakhsiyaadku ay ku raadin karaan wixii markaa ay is leeyihiin waa idinka maqan yihiin oo xaqoodda ah oo ay ka mid noqon karaan dacwo ka xaraysi Waaxda Ilaalinta Xaquuqda Aadanaha ee Minnesota ((Minnesota Department of Human Rights), ama Xafiiska Si Sinaan ah Fursad u siinta dadka oo dhan ee loo soo gaabiyo (EEOC), ashtako ka xareysiga xafiiska la yiraa Office of Civil Rigts (OC), bilaabid dacwo qaan sheegad ah ama raadin cawil celin kale iyadoo la cuskanayo sharciyada gobolka iyo/ama kuwa dowlada dhexe.

Gudoonka 196 waxa uu leeyahay habraacyo qoran oo ku saabsan soo sheegida iyo baarida dhamaan wixii ashtakooyin ah ee la xiriira khashkhashaadaha, dad kala soocida, dagaalka ama jirabaada, wuxuu kaloo bixiyaa habraaca qorani falal edeb marin ah oo munaasib ah oo ku salaysan baaritaanka la sameeyey waana in lala socodsiiyaa habraacyadaa shaqaalaha gudoonka iyo ardaydaba.

(u sii socda bogga xiga)

Habraacyadaa waxaa laga heli karaa Xeerarka Maamulida ee 4057AR iyo 503.4AR Gudoonku waxa uu u magaacay Mas'uuliyiin Xaquuqda Aadanaha ilaaliya oo loo xil saaray qabashada, baarida iyo ku dadaalida wax ka qabashada ashtakooyinka ku saabsan khashkhashaadaha, dad kala soocida dagaalka iyo jirabaada. Waxaa ka mid ah waxyaabaha ay mas'uulka ka yihiin xiriirinta fulinta gudoonka ee sharciyada quseeya dad kala soocida oo ay ku jiraan kor kala socodka Ashtakooyinka Title IX ee la xiriira dad kala soocda ku salaysan jinsiyada iyo cadeynta iyo wax ka qabadka wixii dhibaatooyin ah ee soo baxa xilliga dib u eegida lagu sameenayo ashkatooyinka caynaa ah. Gudoonku waa in uu ganaaxaa ama waa in uu ka qaado talaabooyin munaasib ah ardaygii ama cidii gudoonka u shaqeeysa ee ka aarsata qofkii soo sheega khashkhashaad, dad kala soocid, dagaal ama jirabaad ama cidii makhraati furta ama ka qayb qaata ama caawisa baaritaan si ay u cadeeyso wixii ay aragtay oo la xiriirta khashkhashaado, dad kala soocid, ama jirabaadyo caynkaa ah. Aarsiga waxaa ku jiri kara laakiin aan ku wada koobnayn wixii caga jugleyn, aar-goosasho ah ama khashkhashaad ah.

Qeexitaano

- Khashkhashaadu galmadu waa qaab dadka jinsiyad ahaan lagu kala sooco waxaana ka mid ah xodxodosho aan labada qof midkood dooneyn, codsi galmo, taabasho galmada la xiriirta, iyo wixii kale ee af iyo adin ah ee galmada ku taxa luqa, oo ay ku jiraan la xiriirid cid iyadoo la adeegsanayo farsamooyinka ay ku jiraan 'sexting' iyo wixii qaabab kale oo la xiriira gees gelinta markii (a) Ogolaanshaha falalka ama wada xiriirida caynkaa ah oo sharuud looga dhigo, shaqo siin, adeeg dad weyne ama wax barasho; ama (b) ogolaanshaha ama diidmada falalka ama wada xiriirka caynaa ah oo loo adeegsado in ay saameyn ku yeeshaan go'aan ka gaarida arimaha ku saabsan shakhsiga shaqadiisa, adeeg dad weyne ama wax barashiisa, ama (c) Hadii falka caynaa ahi uu leeyahay ujeedo ama saameyn fara gashata shakhsiga shaqadiisa, adeeg dad weyne ama wax barashadiisasa ama abuurtaba deegaan wax barasho ama shaqo oo leh caga jugleyn, xiisad, ama af la gaado.

  Dagaalku - Ujeedadda habraacan awgii, dagaalku waa wixii fal ah ee gardarro ah ama xoog ah ama ku habjabaad gar-darro ama xoog ah ee ku salaysan qofkaa galmadiisa midabkiisa, diintiisa,, caqiidadiisa qoomiyadiisa, guurkiisa, qoyskiasa, naafanimadiisa, cayr qaadashadiisa, cida lala galmoodo xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose, * da'diisa ama akhbaarta la xirriirta hidaha. Dagaalka waxaa kaloo ku jiri kara wixii fara-xumeyn ah ee ay mumnuucday Sharciga Gudonka ee (district Regulation 503.3AR). Waxa laga Filayo Ardayga iyo Ciqaabaha Edeb-darrada, (Student Behavior Expectations and Consequences for Misbehavior). Hanjabaadaha waxaa kaloo ku jiri kara hanjabaadaha la sameeyo iyadoo la isticmaalayo aadalaha farsamada ee korontada ku shaqeeya oo ay ku jiraan qaar ka mid ah maagidaha kombuyuutarka cid lagu maago.

Khashkhashaada ku salaysan galmada midabka, diinta, caqiidada, qoomiyada, guurka, qoyska, naafanimada, cayr qaadashada, cida lala galmoodo, xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose, * da' ama akhbaar la xirriirta hidaha waxa ay ka kooban tahay wixii fal af iyo adin ah ee ama la xiriirid ah oo ay ku jiraan kuwa xiriirida aaladaha korontada ku shaqeeya ee ah Yasid, ama cadowtinimo cid lagu sameeyo iyadoo la eego heerka qofka ee mid ama in ka badan ee noocyada kor lagu xusay kolka (a) Ogolaanshaha falka ama wada xiriirida caynkaa ah sharuud looga dhigo, shaqo siin, adeeg dad weyne ama wax barasho ama (b) ogolaanshaha ama diidmada falalka ama wada xiriirka caynaa ah oo loo adeegsado in ay saameyn ku yeeshaan go'aan ka gaarida arimaha ku saabsan shakhsiga shaqadiisa, adeeg dad weyne ama wax barashiisa ama (c) Hadii falka caynaa ahi uu leeyahay ujeedo ama saameyn faragashata shakhsiga shaqadiisa, adeeg dad weyne ama wax barashadiisa ama abuurtaba deegaan wax barasho ama shaqo oo leh caga jugleyn, xiisad, ama af la gaado. Jirabaada waxaa laga wadaa geysasho fal loo geysto ardayda oo ah ku khasbid lagu khasbayo arday in uu fal geysto falkaas oo khatar weyni dhalin kara oo cid soo gaarta si kolkaa ardayga loo jirabo si uu ugu biiro urur koox gaar ah oo koox arday ahi leedahay. Jirabaadaa ardayga la jirabayo waxaa laga yaabaa in ay iskuulka gudahiisa ama dibadiisa ka dhacdo, waxaa kaloo laga yaabaa in ay dhacdo xiliga iskuulka la joogta ama marka iskuulka kaga rawaxo. Dad kala sooca waxaa laga wadaa in la kala sooco dadka iyadoo lagu salaynayo kala soocidaa galmadiisa midabkiisa, diintiisa,, caqiidadiisa qoomiyadiisa, guurkiisa, qoyskiisa, naafanimadiisa, cayr qaadashadiisa, cida lala galmoodo, **xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose**, * da'diisa ama akhbaarta la xirriirta hidaha marka laga reebo kolka uu sharcigu ogolaado. Dad kala soocida waxaa ku jira kuwaan soo socda: in laga reebo gelitaanka in loo diido ka qayb galida ama ka faa'iidaysiga barnaamijyada ama hawlaha ay ku jiraan fursadaha tababarada ah ama si kale loogu sameeyo dad kala soocid la xiriirta shaqooyinka ama si ahaanba fursadaha wax barasho ama hawlaha hawl-galada gudoonka.

***Noocyada xidigta leh waxa au ku kooban yihiin hayb kala soocyada la xiriira shaqada iyo khashkhashaadaha.**

Ogaysiiska Dad kala soocida la'aanta ee Gudoonka 196

Gudoonka Waxbarashada ee 196 dadka ma ka kala sooco marka uu bixinayo shaqooyinka ama barnaamijyada iyo hawlaha kale ee uu fidiyo oo ay ku jiraan fursadaha tababarada farsamada gacanta iyadoo lagu salaynayo kala soocidaa **jinsiyada** midabka, diinta, qoomiyada, guurka, **qoyska ahaan,** cayr qaadashada, cida lala galmoodo, **xubinimo gudi xuquuqda aadaha ah oo ka dhisan deegaan hoose**, * da' ama akhbaar la xirriitra hidaha. Gudoonka 196 si sinaan ah ayuu ugu ogolaadaa in ururada dhalinyarada ee loogu tala galay helida barnaamijyadu ay u helaan.

Agaasimaha Xafiiska Shaqaalaha (Director of Human Resources) Tom Pederstuen (651-423-7859) - (tom.pederstuan@district196.org) ayaa loo magacaabay in uu wax ka qabto wixii su'aal ah ee ka yimaada dhanka shaqooyinka ee la xiriira nidaamka dad kala soocid la'aanta. Agaasimaha Waxbarashada Dugsiyada Hoose (Director of Elementary Education) Sally Soliday (651- 423-7782) - (sally.soliday@district196.org) iyo Agaasimaha Wax barashada Dugsiyada Sare Michael Bolsoni (651-423-7712) - (michael.bolsoni@district196.org) ayaa loo magacaabay in ay wax ka qabtaan wixii su'aal ah ee ka yimaada ee la xiriira nidaamyada dad kala soocid la'aanta.

Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah Janet Fimmen (Director of Special Education) (651-423-7629) - (janet.fimmen@district196.org) ayaa loo magacaabay in ay wax ka qabato wixii su'aal ah ee quseeya xaquuqda ardayda naafada ah. Ciwaanka warqadaha loogu hagaajin karo dhamaan agaasimeyaashu waa 3455 153rd St. W., Rosemount, MN 55068.

*Noocyada xidigta leh waxa au ku kooban yihiin hayb kala soocyada la xiriira shaqada iyo khashkhashaadaha

Kala Soocid la'aanta dadka kolka la fidinnayo fursadaha tababarada gacanta

Dhamaan wixii fursado tababarada gacanta ah ee gudoonku fidiyo waxaa loo fidin doonaa qaab dad kala soocid la'aan ah. Guud mar ku saabsan mashruucyada farsamada gacanta ah ee la bixiyo iyo sharuudahooda ayaa waxaa laga heli karaa buuga is qorida dugsiyada sare. Gudoonka District 196 waxa uu qaadi doonaa talaabooyin uu ku hubin doono aqoon la'aanta afka Ingiriisku in aysan cidna ka hor istaagin is qorida iyo ka qayb galida mashruucyada tababarada farsamada gacanta.

Iskuulada Minnesota oo Amaan iyo Gargaar ba leh

Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin in ay amaan helaan kolka ay iskuulada joogaan, ama ay saaran yihiin gaadiid uu iskuulku leeyahay. Maagida iyo gees gelintu waxa ay carqalad ku noqotaa awooda uu ardaygu wax ku baran lahaa iyo awooda macalinku uu ardayda wax ku barri lahaa isagoo ku sugan deegaan amaan ah. Heerka ama xad ka maagidu ama gees gelintu ay ka saameyso wax barashada iskuulka waa in uusan noqon mid qoto dheer, waa ku tala galka maamulka iskuulka in mar walba laga hor tago gees galini in ay dhacdo hadii ay dhacdana in la baaro talaabo cadna laga qaado gees galintaa dhacday ee aan laga hor tagin.

Sharciga la yiraa Dugsiyada Minnesota ee Amaan ka Gargaarkaba leh wuxuu u qeexaa aabiga in ay ku jiri karaan wixii fal ah ee ah hanjabaad, caga jugleyn, af lagaado ama wax yeelo ee ay iska cad dahay in ay xumaan yihiin ee lala bar tilmaameeysado arday mar mar badana soo noq noqda ama wixii kale ee si weyn u saameeya ardayga wax barashadiisa iyo wax qabsigiisa kale ama hoos u dhiga awoodaa ardaygaa la bar tilmaameedsaday uu uga qayb gali hawlaha iskuulka ama ku heli lahaa manfacyada uu iskuulku bixiyo. Sharcigu wuxuu ku qeexaa kumbuyuutar ku maagida isticmaalida farsamada (technology) ama wixii kale ee aalad ah ee koronoto ku shaqeeya oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn, gudbinta calaamad, baaq, muuqaalo qoraal ah dhawaaq ama macluumaad ay ku jiraan wax soo gelinta baraha ijtimaaciga ah ee la isku waraysto, interneetka, shabakadaha (website) ama madalada kale iyadoo la isticmaalao kumbuutar, telefoonak gacanta ama aalado kale oo koronto ku shaqeeya.

Falalka maagida iyo gees gelinta ah waa in loo sheegaa oo lala socod siiyaa shaqaalaha iskuulka. Habraaca gudoonka ee ku saabsan soo sheegida iyo wax ka qabada falalka aabiga waxaa laga heli karaa shabakada gudoonka (website) Xeerarka maamula 503.8AR, iyo mamnuuca gees gelinta, ka eeg: http://www.district196.org/District/schoolboard/policies/500/503.8AR.pdf. Hanaandka 503.8P, Soo sheegida falalka gees galinta, ka eeg: http://www.district196.org/District/schoolboard/ policies/500/503.8P.pdf.

Ardayda hesha Adeegyada wax barida gaarka ah

Sida waafaqsan sharuucda dowlada dhexe iyo kuwa gobolka gudoonka District 196 waxa uu doonaa, wax barida, iyo u adeegida ardayda naafada ah. Shaqaalaha gudoonku waxa ay adeegsadaan hab buuxa oo lagu darso si ay si buuxda ugu baaraan, una qiimeeyaan ugu meeleeyaan ardayda waxbarashada gaar ka ah hesha ee da'doodiu u dhaxeysa waqtida dhalashda – 21 sanno.
Ardaydu waxa ay xaq u leeyihiin wax barasho lacag la'aan ah oo tayo leh in lagu siiyo "goob aan xanibaad badan laheyn" (inta badan iskuul ka ilmahu u dhiganayo hadii uusan ilmaha naafo ahayn).

Waxaad codsan kartaa in uu nuqul kaa siiyo maamulaha iiskuulkaagu qoraal la yiraa *Notice of Procedural Safeguards* ama waxaad kala soo bixi kartaa (download) shabakada Wasaarada Waxbarashada (Minnesota Department of Education): http://education.state.mn.us/mde/dse/sped/proc/.

Habraaca Ardayda ee Section 504

Section 504 waxaa la yiraa sharci dowlada dhexe ay dhigtay oo mamnuuca dad kala sooca ku salaysan naafanimada iyo aan cidna naafo nimo loogu diidi karin ka qayb galida mashaariicda ka hela kaalmo dhaqaale dowlada dhexe.

Sharcigu wxuu u qeexaa naafanimada cidii kasta ee :

- maxkaxiyan iyo jir ahaanba u dhiman, dhimanaanshahaas oo hoos u dhiga waxyaabaha waaweyn oo qof ku noloshiisa qabsado;
- haysta qoraal muujinaya dhimanaanshahaas, ama
- Ama loo tix geliyo in uu dhiman yahay.

Gudoonku waajibyo gaar ah ayuu saarayaa sharcigu, oo ay ka mid yihiin, cadeyn iyo dib u eegid hadii kolkaa ilmaha la soo xaqiijiyo in uu xaq u leeyahayna adeegyada ilmaha wax ka khaldan yihiin la siiyo qaabeynta iyo dhaqan gelinta qorshaha 504 qorshahaa oo bixinaya wax barashada caadiga ah ama mida gaarka ah iyo gargaarada iyo adeegyada la xiriira.

Ka Shakin in Ilmaha la Siliciyo

Xubnaha ka tirsan shaqaalaha iskuulka waxaa saaran waajib ah in ay soo sheegaan hadii ay ka shakiyeen in ilmo ama qof dagan la silciyey. Wax bixin waa in la sameeyo kolka ruux uu og yahay ama ay jiraan sababo macquul ah oo la rumeys karo oo tilmaamaya in sedexdii sanno ee la soo dhaafay ilmaha la dayacay ama lagu tacadiyey. Qeexid buuxda ee ku saabsan waxa dayacaada iyo tacadiga macnihiisa laga wado waxaa laga heli karaa xeerka qadobka ee Minnesota Statue 626.556 laakiin waxaa ku jiri kara jir dil ama fara xumeyn, dayacid, silcin dhanka niyada ah, niyad jabin, u dhaarasho, haweenka iyagoo uur leh mukhaadaraad isticmaalo oo u gudbiya ilmaha uur jiifka ah, dayacid ama tacadi laga shaki qabo inuu dhacay sedexdii sanno ee la soo dhaafay, af duubid ama u diid waalidka ilmaha maxkamadi u xukuntay ilmaha haysashadooda. Dadka waaweyn ee dagan, waa in war bixin laga qoraa kolka qofku og yahay ama uu jiraan sababo uu ku rumaysan karo in qof weyn oo dagan la silcinayo ama uu hayo akhbaar ku saabsan in qof weyn oo dagan oo ay ku yaaliin dhaawacyo jireed oo aan la aqoon waxa keenay sida uu qabo sharciga Minnesota ee 626.5572 (Minnesota Statue 626.7752).

Qeexida "qofka weyn ee dagan" inta guud waxaa ku jirta in uu qofku yahay qof 18 sanno ka weyn oo maskaxiyan ama jir ahaan wax ka khaldan yihiin khaladkaa oo so kooba awoodooda ay naftooda daryeeli karaan iyagoon kaalmo ka helin cid kale ama awoodaooda ah in ay naftooda ka ilaaliyaan in la silciyo. Sharcigu wuxuu kaloo u qeexaa silcinta qofka weyn ee dagan in ay ku jiraan waxyaabaha sida fara xumeynta jirka ama falmada, dayacid ama ku takri gashao xoolaha qofkaa dagan. Cid walba oo waajinb looga dhigay in ay soo sheegto wixii silcin ah ee ay ka shakiyaan in ilmaha loo gaystay ee aan soo sheegin taas waxaa lagu heli karaa dambi in ay geysteen. Isla markaana, cidii soo sheegta ilmo ay uga shakiyeen in la silcinayo iyagoo daacad ah wax dhibaato ah oo arintaa ka soo gaari karaa ma jirto lagana aarsan karo.

Maamulaha, macalinka, kalkaalisada iskuulka iyo cidii kale ee shaqaalaha iskuulka ka tirsan ee soo sheegta qof la yiri waa dhibane ay uga shakiyeen in la silcinayo waa ay kala hadli karaan ilmaha marka hore xaaladaa waana in ay xoojiyaan oo carabka ku dhuftaan in iskuulku uusan u dan lahayn in uu cid eedeeyo ama ciqaabo saaro laakiin uu doonayo in uu caawiyo sidii loo hubsan lahaa in silcintaasi aanay sii socon.

Kolka qofka la yiri waa dhibanahu uu saqiir yahay kolka ay soo gaarto warbixin ku saabsan siclin laga shaki qabo in loo geystay ilmo, shaqaalaha waxaa waajib ku ah in ay wacaan mas'uuliyiinta arintaa ku shaqada leh 24 saac gudahood ayna wax bixin qoran ka sameeyaan war bixintaa soo gaartay 72 saacadood gudahood. Lacala hadii silcintaa laga shaki qabaa uu ka dhacday iskuulka gudihiisa, mas'uuliyiinta arintaa qaabilsani waa in ay kala xiriiraan Waaxda Fulinta iyo Gargaar ee Wasaarada Waxbarashada ee Minnesota khadka (651-582-8546). (Division of Compliance and Assistance of the Minnesota Department of Education). Lacala hadii silcintaa laga shaki qabaa ay ka dhacday iskuulka dibadiisa hay'ada in la xiriiraa ay tahay waa hay'ada Ilaalinta Ilmaha ee Dakota County Xafiiskeeda is-qorida iyo adeegyada bulshada ee khadkiisu yahay (952-891-7459) (Child Protection Intake of Dakota County Social Services) iyo/ama hay'adaha sharci ilaalinta ee deegaankaa.

Kolka qofka la yiri waa dhibanahu uu yahay qof weyn oo dagan kolka ay ku soo gaarto warbixin ku saabsan siclin waa khasab in 24 saac gudahood war bixin loogu gudbiyo Xarunta ku Tacadiga Dadka waaweyn ee Minnesota1 (844-880-1574) ee (Minnesota Adult Abuse Reporting Center (1-844-880-1574). Shaqaalaha waxaa waajib ku ah in ay wacaan mas'uuliyiinta arintaa ku shaqada leh 24 saac gudahood ayna wax baxin Shaqaalaha ka shakiya in silcin ilmo lagu sameeyey waa in ay la tashadaan maamulaha ama kor meeraha arintaa ku shaqada leh, waxaa kaloo laga yaabaa in ay la tashan karaan qareeada gudoonka wax barashada. La tashiga caynkaa ahi kaa saamixi mayso mas'uuliyada ah in marka loo baahan yahay in aad soo sheegto wixii silcin ah ee aad ka shakido in ay jiraan.

.

Mashaariicda Daryeelka Caafimaadka ku saabsan ee Minnesota

Minnesota waxa ay u fidisaa mashaariic daryeel caafimaad oo dowladu bixiso cidii xaq u yeelata kana soo baxda habraacyada mashruucyadaa iyadoo lagu salaynayo xaq uu yeeladka mashruucydaa dakhliga iyo hantida qofka markaa dalbanaya kaar caaafimaad. Mashaariicda diyaarka ah ee la heli karo waxaa ka mid ah Medical Assistance (MA) iyo MinnesotaCare. Mashaariicda Minnesota ee daryeelka caafimaadka waxa ay bixiyaan adeegyada caafimaad ee ku baxa daryeelada caafimaad ee hoose ku qoran: balamada dhaqtarka, kuwa ilkaha, daryeelka caafimaad ee lagu bixiyo cisbitaalka gudihiisa, daawada la qoro iyo talaalada, baarida indhaha, iyo ookiyaaleyaasha, duud duugida, aalada wax lagu maqlo, daryeelada caafimaad ee dhinacada maskaxda iyo miyirka ah iyo qalabka iyo sahayda caafimaadka.

Codsiyada Mashaariicda Daryeelka Caafimaadka waxaa laga heli karaa shabakada www.mnsure.org. Wixii akhbaar ah ee lala wadaago iskuuladu waa sir xafidan, waxaana kaliyaoo la adeegsan doonaa akhbaartaa hadii sharcigu ogol yahay in la adeegsado.

Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee ku saabsan Mashaariicda Daryeelka Caafimaad ee Minnesota ama hadii aad u baahato caawiyaad ah sida loo xareeysto codsiga mashaariicda, fadlan kala soo xiriir:

- (Waaxda Adeegyada Bulshada ee Minnesota (Minnesota Department of Human Services) oo kadhkeedu yahay 651-431-2670, iyo/ama
- MNSure at 1-855-366-7873 (1-855-3MNSURE)



Wareysiga Ardayga ee Mas'uuliyiinta Hay'adaha ilaalinta sharciga iyo kuwa Adeega bulshada

Dacwooyinka ilmaha lagu tacdiyo ama la fara xumeeyo. . .

Hay'adaha sharci ilaalinta ama u adeega bulshadu waxa ay u leeyihiin awood sharci ah in ay ilmaha iskuulka ku wareysan karaan isagoon waalidka ogolaansho ka haysan, ilmahaas oo ay ka mid yihiin ilmaha dhibanaha ah iyo wixii kale ee ilmo yar yar ah ee kolkaa la nool qofka lagu eedeeyey in uu dhibka gaystay.

Kolka hay'adaha ilaalinta sharciyada ama kuwa adeega bulshada ee deegaanku ay go'aansadaan in wareysi uu ka dhaco iskuulka, ogoysiis qoraal ah waa in marka hore ay ka helaan maamulka iskuulka ka hor intii waxa wareysi ahi aanu dhicin.

Ogoysiiska caynkaa ah waa in uu ka mid yahay magaca ardayga la wareysanayo ujeedada wareysiga, iyo tix raac ku saabsan qabodka sharciga ah ee dhigaya in wareysiga caynkaa ah lagu qaadi karo iskuulka dhexdiisa. Hadii wareysiga ay qaadayso hay'ada adeega bulshada, ogoysiiska waa in uu soo saxiixaa agaasimaha hay'ada Adeega Bulshada ee Dakota County ama dhigee (Dakota County Social Services).

Waqtiga goobta iyo sida wareysigu uga dhacayo iskuulka dhexdiisa waxaa xor u ah in uu go'aansado maamulaha iskuulka, laakiin wixii sharuuda ah ee iskuulku la yimaadaa waa in ay noqdaan kuwa macquul ah, waraysigana waa in lagu qaadaa 24 saac gudahood marka iskuulku uu helo ogoysiiska wareysiga hadii aysan waqti kale ku heshiin maamulka iskuulka iyo hay'adaha adeega bulshada iyo kuwa ilaalinta sharciyada. Waa in lagu dadaalaa sidii lagu yareyn lahaa in ilmaha waxbarashadiisa, ardayga kale iyo shaqaalahaba in uusan wareysigaas iskuulka lagu qaadayo wax carqalad ah u keenin hawlahooda.

Wareysiyada ardayga ee ay iskuulka ku dhex qaadaan mas'uuliyiinta ka socota hay'ada adeegyada bulshadu waa waajib in loo qaado habraacan hoos ku qoran:

- Mas'uulka wax baarayaa waa in ku sugnaado xafiiska maamulka;
- Wax barashada ilmaha waa in aysan carqalad ku noqon u yaarida ilmaha loo yeerayo oo fasalka dibada looga soo saarayo waana in ilmahu uusan gafin wax cashar ah aan ka ahayn hadii carqald caynkaa ah aan la huri karayn;
- Wareysiga waa in lagu qaado qol ama meel kale oo cidla ah si kolkaa loo xafido xogta la iska wareysanayo;
- Hay'adaha adeegyada bulshada iyo kuwa ilaalinta sharciyadu waa in ayagu ay go'aansadaan dadka ka qayb galaya wareysiga, iyo
- In shaqaalaha iskuulku uusan qaadan wax talaabo ah inta baaridu socoto.

Mas'uuliyiinta iskuulku lama socod siin doonaan waalidka ilmaha wixii laga hadlay xiliga wareysiga ama wax kale oo akhbaar ah oo wareysiga ku saabsan ka hor inta ay hay'ada adeegyada buslada ama tan ilaalinta sharcigu ay ogoysiiska qoraal ah u soo dirayaan oo ay leeyihiin baaritaankayagii aan wadnay waa aanu dhameysanay.

Dacwooyinka aan ku saabsanayn ilmo la fara xumeeyey ama la dayacay. . .

Kolka ay hay'adaha adeegyada bulshada ama kuwa ilaainta sharcigu ay ku war geliyaan iskuulka in ay damacsan yihiin in ay wareysi ku qaadaan iskuulka dhexdiisa wareysigaa oo ku taa luqa baaritaan ay ku sameynayaan war bixino soo gaaray oo ku saabsan ilmo lagu tacadiyey, kolkaa sharciga gobolka ayaa khasab uga dhigaya iskuulka in uu la shaqeeyo hay'adahaa. Iskuulku ma laha awood uu ku diidi karo in wareysigaa la qaado, ama uu ku go'aansan karo cida ka qayb galaysa wareysigaa ama uu ku go'aansado cida lala socod siin doono qaadida wareysiga.

Marka laga reebo baaritaanka kor lagu xusay ee la xiriira ilmaha la yiri waa lagu tacadigay, maamulka iskuulku wuxuu kaloo u siin doonaa ogolaansho mas'uuliyiintda hay'ada adeegyada bulshada in ay ku wareystaan ardayga kaliya marka uu wareysigaa lagu qabanayo qol xiran oo ka dheer ardayda kale ama dad kale, iyo in marka hore ogolaansho ku saabsan in wareysiga la qaadi karo laga helo waalidka ama cida mas'uulka ah ardayga.

Marka laga reebo baaritaanka kor lagu xusay ee la xiriira ilmaha la yiri waa lagu tacadigay, maamulku wuxuu u ogolaan doonaa hay'adaha ilaalinta sharciyada in ay ka wareystaan ardayga arimo la xiriira wixii dhaqan xumo ah ee aradayga laftiisa lagu soo eedeeyo ama wixii dhaqan xumo ah oo lagu eedeeyo ardayi in ay geytseen iyagoo jooga iskuulka dhexdiisa. Wareysiga caynkaa ah waxaa lagu qaad karaan oo kaliya qol albaabkiisu xiran yahay oo ka dheer ardayda iyo dadka kale meesha ay joogaan. Kolkii ay jiraan daruufo caynkaa ahi, maamulka iskuulka, ama mas'uuliyiinta hay'adaha ilaalinta sharciyadu waa inay isku dayaan in ay la socod siiyaan waalidka ardayga dhalay wareysigaa la qaaday isla maalinta la qaaday.

Mas'uuliyiinta ilaalinta sharciyada waxaa loo ogolaan in ay ka wareystaan ardayga wixii dhaqan xumo ah ee ardayga laftiisa lagu soo eedeeyo ama wixii dhaqan xumo ah oo lagu eedeeyo arday kale in ay geysteen intii ay joogeen iskuulka. Wareysiga caynkaa ah waxaa lagu qaad karaa uun qol albaabkiisu xiran yahay oo ka dheer ardayda iyo dadka kale meesha ay joogaan. Kolka uu mas'uulka ilaalinta sharciyadu uu waalidka ilmaha ogolaasho ka helo ayuun buu wareysan karaa ilmaha

Macalinka fasalku ma ogolaan doono codsi kaga yimid mas'uul ka socda hay'adaha ilaalinta sharciyada ama kuwa adeegyada bulshada oo ku saabsan wareysi arday iyadoon marka hore codsigaasi uusan tix-gelin uunana ansixin maamulahu.

Shaqaalaha iskuulku waa in aysan marnana fara gashan go'aanka hay'adaha ilaalinta sharciyada ee ku saabsan kaxaysiga arday ay ka kaxeeeyaan iskuulka; laakiin, waa in lagu dadaalaa in in lala socod siiyo waalidka ilmahaa dhalay arintaa. Askarta ka socota hay'adaha ilaalinta sharciyada waa in aysan marnaba fara gashin wixii go'aan ah ee iskuulku qaabto oo ku saabsan ka eryada iskuulka iyo ciqaabaha kale,

Ilaalinta iyo Xafidida Xogta Ku Qoran Diiwaanka ardayga

Xaquuqda Xafidida Xoga

Diiwaanka wax barasha ardayga ee akhbaarta ardaygu ku qoran tahay cida ardaygu yahay ee aan ahayn akhbaarta guud ee ardayga (hoos ka eeg), cid loo ogol yahay in la tusaa am jirto. Cidii rabta in la tusaa waa in ay mar hore ogolaansho qoraal ah ka heshaaa waalidka ama cida mas'uulka ah ardayga ama ardayga naftiiisa waa hadii uu ardaygaasi 18 sannoo ka weyn yahay. Habraacaan guud ee sidaa ah waxaa jiri karta mar mar dhif ah oo daruufa gaari ay jiraan in laga weecdo, duruufahaa iyaga ah waxaa lagu qeexaa qodobka sharciga ah ee la yiraa Xeer Hoosaadka Maamulida iyo Ilaalinta Xogta ku saabsan. Diiwaanada Ardayga (Administrative Regulation 505.2AR, Protection and Privacy of Student Records).

Marka kaliya ee la ogol yahay in diiwaanka wax barashada ee ardayga la bixiyo iyadoon ardayga ogolaansho laga haysani waa marka diiwaanka wax barashada ee ardayga ay u baahdaan in arkaan mas'uuliyiinta iskuulku iyadoo ujeedada ay ugu baahan yihiin inay arkaani ay tahay mid ku saabsan danta, maslaxada iyo tacliinta ardayga. Mas'uulka iskuulka ka socda waxaa laga wadaa qof u shaqeeya iskuulka oo jago maamul haya, sida kormeere, macalin, iyo shaqaalaha gargaarka; qof ka socda Gudoonka Wax barashada; qof ama shirkad uu iskuulku qortay si ay u bixiyaan adeegyo intii ay isticmaali lahaayeen shaqaalahooda ama mas'uuliyiin ay ku jiraan caymiska iskuuladu ay ku jiraan ama tabarucayaal ogolaansho haysta. Waxyaabaha la ogol yahay ee maslaxada iyo dan wax barshadu ku jirto waxaa ka mid ah waxyaabaha sida toos ah ula xiriira mas'uuliyada iyo shaqada mas'uulka iskuulka ee ah dhanka wax barida fasalka dhexdiisa ah, qiimeynta sida wax barida u socoto iyo cilmi baarista, wax qabsiga iyo hior ukca ardayga, akhlaaqda ardayga, caafimaadka iyo hagaagsanaanta ardayga, iyo wixii kale ee quman ee shaqo ahaan mas'uuliyada mas'uulka ah.

Akhbaarta Guud

"Akhbaarta guud" waxaa ka mid ah magaca, taariikhda dhalashada iyo meesha uu ku dhashay ardaygu, maadooyinkii uu inta badan soo qaatay, iyo wixii hawl ah ee la ogol yahay ee uu ka qayb qaatay sida ciyaarida banooniga, dhererka iyo culeyska xubnaha kooxaha uu la ciyaaro, waqtiga uu banooniga ciyaaro, is qorkiisa cayaarta iyo ciwaanka emailka ah ee gudoonka siiyey ardayga, fasalka u dhigto hada, iyo wixii shahaado sharaf ah ee ardayga la siieyey, xaadir ku ahaanta iskuulka, meeshii ugu dambaysay ee iskuulka kadhigtay, sawiro iyo wixii kale ee maqal iyo muuqaal ah ee u iskuulku ansaxiyey in la baahiyo, buuga-sanad dugsiyeedka, jaraa'idka, soo bandhigidaha, kaarka aqoonsiga (ID), soo gelinta internetka iskuulku ogol yahay iyo lambarka aqoonsiga ardayga (ID), aqoonsiga isticmaalaha IDs ama wixii kale ee aqoonsi ah ee ardaygu u isticmaalo in uu ku galo aaladaha korontada ku shaqeeysa ee iskuulka ama lagu soo bandhigo kaarkiisa aqoonsiga (ID). (Aqoonsiga ardayga waxaa loo tix geliyaa in uu yahay akhbaar guud, laakiin diiwaanka akhbaarta tacliinta ee ardaygu ku jirto waxaa lagu geli karaa uun isticmaalida baaswood ama tirada aqoonsiga ah ee qofka marka la isticmaalo (PIN) ama marka qofka la ogol yahay in uu galaa uu haysto ama og yahay akhbaarta lagu galo diiwaanka.) Akhbaarta guud ku ma jirto wax macluumaad ah oo agaar u cadeeya ardayga ama wax ka hadla diin, jinsiyad midab, naafanimo, heerka bulshada qofku ka joogo, ama wadanka ardagu ka soo jeedo. "Akhbaarta guud" sidoo kale waxaa ku jira ciwaanka guriga ardaygu degan yahay, telefoonada guriga ee ardayga dhigta fasalada u dhexeeya fasalka 9 iyo kan 12 naad, ujeeadada telefoonada loogu daray akhbaarta guud waa in mas'uuliyiinta ciidanka u qortaa milatariga wadanka la siiyaa akhbaarta caynkaa ah maadaama militayriga iyo hay'ada tacliinta sare ay codsadaan. Marka la bixinayo akhbaarta ardayga waa in mar walba loo hogaansamaa sharciga gobolka iyo kan dowlada dhexe. "Akhbaarta guud" waxaa kaloo ku jira ciwaanada guryaha, ciwaanka emaylka, telefoonada, jadwalka maalin laha ah ee iskuulka, diiwaanada qoraalada iskuul imaanshaha iyo magacyada ciwaanada, telefoonada waalidiinta iyo mas'uuliyiinta iyadoo ujeedadda loo soo aruurinayo akhbaarta caynaa ahina ay tahay in la siiyo Maktabada Degmada Dakota (Dakota County Library).

Akhbaarta guud waxaa laga yaabaa in la siin karo oo lala wadaagi karo dadweynaha iyadoon marka hore ogolaansho laga helin waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga. Hadii waalidka ama qof ka mas'uulka ka ah ardaygu amaba ardayga laftiisu (waa hadii uu 18 sanno jiro ama uu ka weyn yahay) uusan horey qoraal diidmo ah oo ku saabsan bixinta akhbaarta caynkaa ah uusan u soo gudbin.

Waalidiinta, qofka ka mas'uulka ka ah ardayga, ardayda18 jirka ah waxa ay diidi karaan in la bixiyo akhbaartooda guud hadii ay soo buuxiyaan foomka la yiraa(release (Procedure 505.2.4.3P), ee Diidida Bixinta Akhbaarta Guud iyo Mida Buuga Sannad Dugsiyeedka (Denial of Release of Directory and Yearbook Information). Waalidka waxaa laga ayaabaa in aysan ka hor tagi karin bixinta akhbaarta ardayga sida magaca, ama ciwaanka emailka iskuulku siiyey ee fasalka ardaygu dhigto ama kaarka aqoonsiga ardayga (ID). Foomka waa in la soo buuxshaa laguna soo celiyaa ardaygaaga iskuulkiisa. Hadii aad soo xareysato foomka diidmada bixnta akhbaartaada ku saabsan diidmadaasi waxa ay sii jiri doontaa ilaa iyo inta wax laga bedelayo diidmadaa ama uu waalidka ama ardaygu uu ka noqonayo arintaa

Fatashaada waxa ku jira Diiwaanada

Waalidiinta ama qofka ka ah ardayga mas'uulka ama ardayga 18 jir ka ka weyn, waxa ay codsan karaan in ay eegaan oo muraajaco ku sameeyaan diiwaanka tacliinta ee ardayga marka laga reebo diiwaanada sharciga gobolka ama kan dowlada dhexe uu ka dhigay kuwa xafidan oo aan cidna loo ogolayn in ay aragto.

Gudoonku waa uu fulinayaa codsiyada soo gaara markiiba hadii ay suurto gal tahayna 10 barri gudahood ayuu gudoonku ku fulin doonaa codsiyada marka laga reebo Sabtiyada iyo Axadaha iyo maalmaha faystooyin ah.

Nuqulada qoraalada diiwaanka waa la heli karaa hadii codsi qoraal ah oo taa lagu codsanayo la soo gudbiyo. Khidmad sawir ka qaadida qoraalada iyo xaw-qal qalinka ah ayaa laga qaadi doonaa cidii qoraaladaa soo codsata. (Eeg Xeer Hoosaadka Maamulidaiyo Ilaalinta Xogta ku saabsan Diiwaanada Ardayga (Administrative Regulation 505.2AR, Protection and Privacy of Student Records).

Sugida iyo Saxida Akhbaarta Diiwaanada ku jirta

Waalidiinta ama ardayga ka weyn 18 sanno ee aaminsan in akhbaar khaas ah oo ku jirta diiwaanka tacliinta ee ardayga aysan sax ahayn, ama ay been tahay, ama aysan dhameystirnayn ama ay xad gudub ku tahay xafidida xogta ardayga ama xaquuq kale oo ardaygu leeyahay, waxa codsan karaan in gudoonku in uu wax ka bedelo oo saxo wixii khalad ah ee diiwankaa su'aashu ka jirto ku jira. Wixii dacwo ah ee aad qabto

waxaa ku soo hagaajin kartaa Agaasimaha Wax barashada adigoo soo xareysanaya Foomka la yiraa Dib u codsiga Sixida Diiwaanada Tacliinta. (Procedure 505.2.11P, Re- quest to Amend Educational Records, with the Director of Special Education.

Diiwaanada ku saabsan wax barashada gaarka ah

Markii uu ardaygu qalin jabiyo ama marka ardaygu uu ka baxo xaq u yeeladka barnaamijyada adeegyada waxbarashada gaarka ah, diiwaanada wax barashada looma baahna mar dambe si adeegyo wax barasho loo siiyo ilmahaa.
Codsiga burburinta diiwaanada wax barashada gaarka ah ku saabsan waxaa sameyn kara:

- Ardayga qalin jabiyey, ee da'diisu18 sanno ka weyn tahay, ama
- Arday aan qalin jabin laakiin 21 sanno jir ah ama ka weyn, ama
- Waalidka arday 17-sanno jir ah ama ka yar oo qalin jabiyey ama
- Qof loo xil saaray mas'uuliyada arday horey iskuulka u dhigan jiray ee ah naafo ahaa laakiin aan hada xaq u lahayn adeegyada wax barashada gaarka .

Diiwaanada wax barashada gaarka waxaa loo qeexaa wixii diiwaano ah ee lagu hayo ama lagu kaydiyo galka gudoonka akhbaaarta wax barashada ardayga oo ay ku jiraan foomka gubinta iyo wixii talaabo kale ee qiimeyn ah ee la qaaday, oo ay ku jiri karaan, macluumaad aan suganayn, qoraalada shaqaalahu ama kooxda kulanku ay sameeyso iyo qorshaha wax barida gaarka ah ee ardaygaa loo dejiyo ee loo soo gaabiyo (IEP) war bixinada hor u kaca ardaygu sameeyey ku saabsan iyo muraajaca sannadkii mar la sameeyo.

Ardayga horey ugu tirsanaan jirey gudoonka wax barashada ee District 196 (ama waalidka ama cida mas'uulka ah ardayga caynaa ah) ee doonaya in macluumaadka diiwaanka wax barashada gaarka ku jira in la bur buriyo waxa uu wici karaa telefoonka 651-423-7628 ama wuxuu warqad u qori karaa Agaasimaha Wax barashada gaarka si uu u codsado in macluumaadkaa la bur buriyo. Ardayda horey gudoonka uga tirsanaan jirtay ee aan hubin jiritaanka macluumaad wax barashadooda gaarka ah ku saaban oo lahayo amaba doonaya in ay helaan akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan arinta la xiriirta burburinta diiwaanadu waxa ay wici karaan telefoonka 651-423-7628.

U Gudbinta Diiwaanada Iskuulo kale

Gudoonka District 196 waxa u u diraa diiwaanada wax barashada (oo ay ku jiraan qoraalada ganaaxyada) ee ardayga iskuulada kale iyo gudoonada kale ee ardaygu doonayo, ama rabo in uu isi qoro hadii iskuulkaasi u usoo codsado taa. Waalid, cida mas'uulka ka ah ardga ama ardayga 18 sanno ka weyn waxa ay codsan karaan in nuqul laga siiyo diiwaanada loo gudbinayo iskuuulka kale waana ay ka muduci karaan hadii sharcigu ogol yahay sugnaanta iyo saxsanaanta diiwaanadaa. Si kastaba aha ahaatee gudoonku lama socod siiyo waalidiinta ama ardayda 18jira ama ka weyn gudbinta diiwaanadaa loo gudbinayo iskuulada kale ee soo codsaday.

(U sii gudub bogga xiga)

Ujoodooyinka iyo Noocyada Macluumaadka la aruurinayo

Barnaamijyada wax barashada ah ee uu gudoonka wax barashadu maamulo waxaa ku jira in ardayga laga rabo in u usoo gudbiyo wixii shaqo guri ah ee loo diro, war bixino, iyo in uu qaato imtixaano. Gudoonku waxaa kaloo laga yaabaa in uu u aruuriyo akhbaar ujeedooyin la xiriira qorida ardayga, maamulida mashaariic badan oo iskuulku leeyahay iyo sababo kale oo la xiriira amaanka iyo caafimaadka ardayga. Akhbaarta laga rabo in u ardaydu soo gudbiso ee la xiriira war bixinada iyo hawlaha caynkaa ah iyo imtixaanadu waa macmuul sir ah oo la xafido sida uu dhigayo qodobka sharciga ah ee Gobolka Minnesota ee u degsan xafidada xogta ee la yiraa (Minnesota Government Data Practices Act, Minnesota Statute 13.01, et. Seq). Akhbaarta caynkaa ah waxaa loo soo aruuriyaa loona adeegsadaa in ay qayb ka noqdaan nidaamka wax barida ardayga, si qayb ahaan loo ogaado waxa ardaygu baranayo iyo waxa ardaygu u baahan yahay in uu barto. Gudoonku waxaa kaloo laga yaabaa in uu ka soo aruuriyo ardayda akhbaar markii loo baahdo si loo ilaaliyo nidaamka iyo kala dambaynta iskuulka Mar marka qaarkood marka taa la sameynayo waxaa laga yaabaa in akhbaartaa la soo aruurinayo ay ku jiraan macluumaad sir ah oo u baahan in la xafido.

Sharciyan waajib kuma aha ardayga in u soo gudbiyo macluumaadka caynkaa ah, laakiin hadii uusan ardaygu taa sameynin waxa ay si toos ah saameyn ugu yeelanaysaa buundooyinkooda oo lagu cabiro qiimeynta akhbaarta caynkaa ah. Marka marka qaarkood, waxaa laga yaabaa in laga rabo in ardaygu uu la wadaago macluumaad cid kale si loo ilaaliyo nidaamka iyo kala dambaynta iskuulka. Hadii uu ardaygu bixin waayo akhbaarta caynkaa ah ee laga codsadayna ay keeni karto ganaax iyo ciqaab uu ardaygu mutaysan karo.

Mas'uuliyiinta iskuulka ee ka tiran gudoonkaan waxaa laga yaabaa in loo soo gudbiyo ayna isticmaalaan macluumaadka la soo aruuriyey marka ay wadaan dan wax barashada ku saabsan oo ardaygu leeyahay ama si ay u qiimeeyaan hor u kaca tacliinta ardayga ama si ay u ilaaliyaan nidaamka iyo kala dambaynta iskuulka. Akhbaarta caynkaa ah waxaa loo tix geliyaa in ay tahay akhbaar u baahan in la xafiyo oo la dhowro aanana lala cid kale oo sedexaad in sharciyan la ogol yahay ma ahane ama iyadoon ogolaansho laga helin waalidka ardayda yar yar ama ardayda 18 sanno jirka ama ka weyn.

Mas'uuliyiinta iskuulku waxay kaloo u isticmaali karaan macluumaadka ardayga ku saabsan cilmi baarisyda macluumaadkaas cilmi baarista loo adeegsanaya waxaa ka mid ah macluumaadka la soo aruuriyey ama la isku duway iyadoo ujeedada ka dambaysaana ay tahay qiimenta tacliinta ardayga . Cilmi baarsita waxaa laga yaabaa in ujeedadeedu ay tahay qaabeynta ama xaqiijinta ama maamulida imtixaanda saadaasha ah; si loo maamulo barnaamijyada gargaarka ardayga ama loo sii hagaajiyo qaabka wax barid. Macluumaadka ardayga ee loo soo aruuriyey ama la isugu duway in lagu qiimeeyo ardayga waxaa laga yabaa in loo adeegsado cilmi baarisyada ay ku jiraan daraasadaha caadeynta ah, daraasadaha isku aadinta ah ama kuwa muddada dheer socda iyo cilmi baarsiyada la xiriira korida. Waalidiinta ama ardayda roon roon waxa ay la soo xriiri karaan gudoonka hadii ay qabaan wax su'aalo ah oo la xiriira cilmi baarsiyada caynkaa ah, waxay kaloo diidi karaan in ay ka qayb galaan qaarka mid ah qiimeynta ardayga.

Gudoonku waxa uu ku hayaa akhbaarta kor lagu xusay diiwaanadiisa tacliinta.

Waxaa jira labo hab oo diiwaan galin ah oo ardaygu leeyahay:

- **Diiwaanada Jimciska ah** waxaa laga soo aruuriyaa dhamaan ardayda xiliga ay ku dhex jiraan mashaariicda caadiga ah ee wax barashda waxaana ku jiri kara, koox ahaan ardaydu waxa ay barteen iyo awooda cabirada heerka tacliinta, adeegyada la yiraa Title I, adeegyada Bartaha Afka Isgiriiska lasiiyo (English Language Learner services), adeegyada la siiyo ardayda fahmada iyo hibada gaarka ah leh, liiska wax yaabaha ardaygu xiiseeyo, wixii toosin ah ee ardayga lagu sameeyey, qoraalada iyo diiwaanada kale ee quman.
- **Diiwaanada tacliinta Ardayga** waxaa la soo aruriyaa kolka adeego toos ah ama kuwa naan toos ahayn oodadban loo siinayo ardayda kali kali. Waxaan aku jiri kara, imtixaanada ardayda kali kalida loo qaado ee lagu ogaado heerka tacliinta ee ardayga, baariraanada lagu sameeyo ardayga lixaadkiisa iyo itaalkiisa, iyo kan lagu cabiro ardayga garaadkiisa iyo diiwaano kale, sida qorshaha gaar wax barka ardauga, war bixinada qiimeynta qoraalada iyo diiwaanada kale ee quman.. Adeegyada iyo mashaariicda caynkaa ah waxaa ku jiri kara adeegyada siinta tacliintta gaarka ah iyo kuwa ku saabsan cilmu-nafsiga

Goobta lagu Kaydiyo Diiwaanada

Akhbaarta diiwaanada tacliinta ee laga soo aruuriyo ardayda waxaa lagu hayaa oo lagu xafidaa goobo amaan ah oo ku dhex yaal iskuulada gudoonka iyo Xafiiska xarunta Gudoonka.

- **Diiwaanada Jimciska ah** waxaa lagu hayaa iskuulka u ardaygu dhigto. Markii uu ardaygu uu qalin jabiyo ama iskuul kale loo bedelo oo laga bedelo gudoonka District 196, diiwaanadaa waxaa lagu sii hayaa iskuulkii ugu dambeeyey ee ardaygu dhigtay muddo hal sanno ah. Hal sanno ka dib diiwaanka waxaa waxaa loo wareejiyaa Xafiiska gudoonka ee weyn, ka dibna waxaa la geliyaa hab kumbuyuutar oo lagu xafido.
- **Diiwaanada War barashada ee Ardayga ee xiliga xaadirka ah** waxaa lagu kaydiyaa iskuulka uu radaygu kolkaa dhigto. Diiwaanada Wax barashada ee horey loo qoray sannadkiiba hal mar ayaa waxaa loo gudbiyaa Xafiiska Gudoonka ee weyn halkaa oo hab kumbuyuutar ah oo la galiyo lagu xafido. Diiwaanadaa waxaa la siin karaa hay'adaha ama shakhsiyaadka ka baxsan gudoonka hadii uu ogol yahay sharciga Xeer Maamulka ee la yiraa (Administrative Regulation 505.2AR, Protection and Privacy of Student Records). Waalidiinta ama ardayda ka waaweyn 18 ka sanno waxay codsan karaan in la tuso diiwaanada ama ay helaan oo laga siiyo nuqul diiwaanada iyadoo la tix raacayo Xeer Maamulka la yiraa (Administra- tive Regulation 505.2AR).

Akhbaar Dheeraad ah

Muraajaco ku sameyntan ku saabsan xaquuqda xafida macluumaadka ardayga ama waalidka ee diiwaanada wax barasho ee uu hayo gudoonka waxbarashada ee , District 196 Waxaa loogu tala galay in uu noqdo guud mar uun ku saabsan sharciga Xeer Maamulka ah ee la yiraa (Administrative Regulation 505.2AR), iyo wixii kale ee ...rciya ah ee quseeya arintan ee uu leedahay dowalda gobolka ama dowlada state.

Sharciyadaa arinta maamaula waxaa laga heli karaa shabakada gudoonka ee ah (website) www.district196.org. Codsiyada nuqulada xeerarka iyo wixii su'aalo ah ee jira waxaa lagu soo hagaajin karaa:

Student Information
Independent School District
196 3455 153rd St. West
Rosemount, MN 55068
651-423-7700

Su'aalaha ku saabsan diiwaanada lagu hayo ilmahaaga iskuulkiisa waxaa lagu soo

hagaajin karaa maamulaha iskuulka.

Su'aalaha ku saabsan diiwaanada tacliinta ilmahaaga ee lagu hayo ilmahaaga

iskuulkiisa waxaa lagu soo hagaajin karaa maamulaha iskuulka ama:

Director of Special Education
Independent School District
196 3455 153rd St. West
Rosemount, MN 55068
651-423-7628

Cabashooyinka ku saabsan fulin la'aanta codsiyada

Waalidiinta ama ardayda ka waaweyn 18 ka sanno waxa ay u soo gudbin karaan ashtako qoraal ah oo ku saabsan xad gudubka lagu sameeyey xaquuqdooda ku dhigan qodobka sharciga ah ee la yiraa 20 USC Section 1232(g) Xafiiska Fulinta Habraacyda, U.S. Dept. of Education, 400 Maryland Avenue, SW; Washington, DC 20202-5920.

Xoojinta Ilaalinta Xaquuqda Ardayga

Sharciga Ilaalinta Xaquuqda ardayga ee loo soo gaabiyo (PPRA) **iyo sharciya Minnesota** waxay siiyaan ardayga iyo waalidka xaquuq la xiriirta aftida ardayda iyo arimo kale ee soo socda:

Gudoonku waa ku khasab in uu sanad walba si toos ah ugu sheego ardayda iyo waalidiinta xaquuqdooda ku saabsan sharcigaa.

Gudoonku waa khasab in uu ogolaansho qoran ka helo waalidka ama ardayga ka hor inta aan la qaadin wax afti ah oo kharashkeeda ay bixinayso Wasaarada Wax barashada ee U.S. (U.S. Dept. of Education) (USDOE) Hadii aftida ay ku jiraan akhbaar "xafidan"oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah mawduucyadan "xafidan":

- Mawqif Siyaasadeed ama waxa ardayga ama waalidku rumeysan yahay;
- Wixii dhibaato ah ee miyirka ama xiska ah ee ardayga ama qoyskiisa qabo;
- Baxaaliga dhanka galmada ah iyo hab dhaqanka;
  Sharci darro, dhaqan xumo, hab dhaqan baxar is gelin ama yasid ;
- Wax ka sheegid ama dhaleecayn ay dad ka ay qaraabo isu yihiin ardayga;
- Waxyaabo xaquuq ah oo sharciyan la ogol yahay sida xiriirada qareenada dhaqaatiirta iyo culumada;
- Diinta la caabudo, ama waxa ardayga iyo waalidkii aaminsan yihiin,
- Dhaqliga (Aan ka ahayn midka sharcigu dhigayo in lagu xisaabtamo si loo go'aansado xaq u yeeladka ka qayb galka barnaamijka ama helida gargaar dhaqaale ee uu bixiyo barnaamijku).

Waalidku waxay "xaq u leeyihiin ogoysiis" la ogoysiiyo arinta iyo la siiyo fursad hadii ay rabaan ay "ku diidi karaan"kuwaan soo socda qaar ka mid ah:

- Aftida ardayda (ee uu qeexay xeerka Maamulka ee Administrative Regulation 801.9AR) oo aan lagu darin qaybta kor ku xusan;
- Arimo la xiriira aruurunta, bixinta iyo isticmaalka akhbaarta laga soo aruuriyey ardayga, oo loo isticmaalo ujeedooyin la xiriira ganacsi ama siinta akhbaarta la sheegay cid kale, ama
- Wixii baaritaano caafimaad ah ee la isaga rabo dhigashada ee uu maamulo ama uu balamiyo iskuulku ee aan muhiim ku ahayn dhowrida markaa ee amaanka ardayga ama ardayda kale marka laga reebo baaritaanada maqalka araga ama scoliosis, ama kuwa kale hadii u ogol yahay sharcigu gobolku.

Waalidiinta iyo ardayga qaarkood waxay ay xaq u leeyihiin in ay fatashaan oo eegaan qaar ka mid alaabta ka hor ka qayb qaadadka afti ardayga. Codsiga lagu codsanayo in la fatasho alaab waxaa loo soo gudbin karaa maamulaha dhismaha. Wax yaabaha in la fatasho u diyaarka ah waxaa ku jira:

- Aftiyada ardayda;
- Qoraalo iyo aalado loo adeegsado in lagu soo aruuriyo akhbaar shakhsiyan ah oo ardaydu leedahay hadii loo isticmaalayo suuq geyn ama ganacsi ama la siinayo cid kale akhbaartaa, iyo
- Qalab wax barasho oo loo adeegsado asagoo qayb ka ah manhajka ama aftida ardayda ee la qaaday ee hoos timaada qaybaha kor ku xusan.

  Iskuulku waxa uu siin waalidka ogaysiis iyo akhbaar ku saabsan aftiyada laga qaado ardayda iyagoo si buuxda loogu faah-faahiyo xeerka Maamulka ee (Administrative Regulation 801.9AR). Use of Student, Employees and/or District Data for Research).

Waalidiinta iyo ardayda qaarkood waxay ay xaq u leeyihiin in ay soo sheegaan wixii xad gudub ah ee lagu sameeyo sharciga la yiraa PPRA waxayna la soo xiriiri karaan oo arintaa u soo sheegi karaan Wasaaradda Wax barashada Mareykanka,Xafiiska Fulinta Habraacyda (U.S. Dept. of Education Policy Compliance Office, 400 Maryland Avenue SW, Washington, DC 20202-5920).

Aruurinta, ilaalinta iyo isticmaalka wixii macluumaad ah ee ardayda laga soo aruuriyo waxaa maamula habraaca 108 la yiraa ee Xiriirka Beesha iyo Gudoonka, Xeerka Maamulka 801.9AR (Policy 801, Administrative Regulation 801.9AR) iyo Diiwaanada Ardayda iyo xeerarka maamulka ee arintaa u taagan.

Gudoonka 196 waxa ganaax tacliineed ama si kale ah oo ay saaraysaa ma jiraan ardaygii diida inuu ka qayb galo aftiyada.

Muujinta Wadaninimada

Jeclaanta iyo fahamka ee ardaygu fahmayo wadanka United States ka, taariikhda America iyo nidaamka dimoqraadiga waxaa bila xafladaha iyo maalmaha kale ee la xuso.

Heesta Calanka waa in laga qaadaa iskuul walba maalin walba, iskuuladuna waa in ay si joogta ah ardayda ugu diraan hawlo iyo mashaariica la xiriira wadanimida si loo kordhiyo fahamka ardayga wadanka United States ka iyo taariikhdiisa.

Sharcigu wuxuu dhigayaa in cidii rabtaa ay diidi karto ka qayb galka qaadida Heesta Calanka, sabab kasta ha u diidee.

Amaanka iyo Nabad-gelyada

Iskuul kasta oo ka tirsan Gudoonka District 196 waxa uu leeyahay qorshe wax looga qabto wixii xaalad deg deg ee soo kordha qorshahaa sannadkiina mar ayaa muraajaco lagu sameeyaa waxna laga bedelaa hadii loo baahdo. Kaamarooyin fiidyowga leh ayaa iskuulada iyo basaskaba lagu rakibay si looga hor tago falalka dhaqan xumo ah ayna u gar-gaaraaan wixii baaritaan ah ee lagu sameeynayo wixii fal dhaqan xumo ah ee cidi gaysato. Ardayda waa loo qaban wixii khalad ah ee ay gaystaan waxaana laga yaabaa in loo gudbiyo hay'adha sharci ilaalinta wixii cajalad aha fiidyowga ay qabtaan ee ah falal dhaqan xummo ah. Intaa waxaa dheer, si loo sugo amaanka ardayda , shaqaalaha iyo booqdayaasha iskuulada, mas'uuliyiinta gudoonku waxa ay raacaan oo u hogaansamaan habraacyada u degsan sugida amaanka iyo xasiloonida iskuulada ee hoos ku qoran.

Iskuul walba

- Booqdeyaasha oo dhami waa in ay magacooda ka qoraan xafiiska ama miiska booqdaha marka ugu horeeysa ee ay yimaadaan xiliga iskuulka lagu jiro.
- Booqdayaasha oo dhami waa in la siiyaa kaar magacoodu ku qoran yahay oo xirtaan inta ay iskuulka joogaan xiliga iskuulka lagu jiro.
- Shaqaalaha waxaa laga rabaa in ay wareystaan cidii iskuulka ay ku dhex arkaan oo aysan garanayn ee aan xirdhnayn kaar magacoodu ku qoran yahay.
- Ardayda iyo shaqaalaha waxaa laga rabaa in ay markiiba u sheegaan macalin ama maamule wixii ay arkaan ee ay ka shakiyaan ama dareen siiya cabsi.
- Hal albaab ma ahee albaabada kale iskuulku waa ay wada xiran yihin inta iskuulka lagu jira.
- Dugsiyada sare, ardayda dhigata waxaa laga rabaa in ay sitaan mar walba kaarka aqoonsiga ee iskuuku bixiyo kolka ay joogaan iskuulka.
- Qaybaha dhismaha iskuulka ka midka ah ee aan loo baahnayn in la isticmaalo xiliga iskuulka lagu jiro waa la xiraa.
- Akhbaarta amaanka iyo nabed-gelyada waxaa ku jira maqaal qoraal ah iyo buug gacanta oo la siiyo shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta.

Gudoonka oo dhan

- Dhamaan shaqaalaha gudoonku waa in ay xirtaan kaarkooda aqoonsiga ah ee sawirka leh inta ay ku sugan yihiin iskuulada iyo xafiisyada gudoonka iyo marka ay gudanayaan waajibaayada la xiriira shaqooyinkooda.
- Booqdayaasha oo dhami waa in ay xirtaan kaarka aqoonsiga inta ay ku sugan yihiin dhismayaasha gudoonka xiliga iskuula algu jiro.
- Calaamado ayaa lagu dhajiyey albaabada aan xirnayn ee iskuulada oo dhan calaamadahaas oo ku soo dhaweeya booqdeyaasha iskuulada una sheega in ay tagaan xafiiska ama miiska booqdayaashu iska xaadiriyaan.
- Calaamado ayaa lagu dhajiyey albaabada xiran ee iskuulada oo calaamadahaas oo sharxaya in albaadada loo xiray sababo amaanka la xiriira awgood, calaamadaashi waxay kaloo u tilmaamaan dadka albaabada aan xirnayn.
- Akhbaar ku saabsan amaanka iyo nabed-gelyada waxaa lagu daray buuga gacanta ee la yiraa Guudka Xaquuqda iyo Waajibaadka Ardayda waxaa kaloo lagu daraa wixii kale ee buuga ah ee beesha ama shaqaalaha loo daabaco.
- Dhismayaasha iskuulka waa la kor meeraa marki iiskuulaka laga rawaxo.

Qodobka ah Minnesota Statute 123B.03 ayaa wuxuu faraa gudoonada wax barashada in cid walba oo shaqo laga siiynayo gudoonka la soo baaro taariikhdooda iyo in ay horey dambi u geysteen iyo in kale, oo ay ku jiraan tabarucayaasha cayaaraha. Gudoonku isaga ayaa go'aansada cidii taariikhda la soo baarayo iyo cidii kale wuxuunu tix galiyaa marka la soo baarayo qandaraasleyaasha madaxa banaan arimo ay ka mid yihiin inta waqti ee ruuxaasi uu la xiriir karo ardayga iyo inta uu la'eg yahay waqtiga ay ardayga wada joogayaan. Gudoonka ma soo baaro taariikhda shaqaalaha iyo tabarucayaasha ka tirsan ururada ka baxsan gudoonka ee u fidiya ardayda xarakaat dhalin yarada beesha, xarakaasaasi waa kuwa aan gudoonku abaabulin.

Ogoysiisyada la xiriira Caafimaadka iyo Amaanka

Gudoonka District 196 waxa hawl galiyaa xirfadleyaal sharciyeysan oo khibrad u leh la dagaalanka iyo xakameynta baranbarada, jiirka, kutaanta, jiirka, cayayaanka iyo wixii kale ee kutaan ama xasharaad ah ee ku dhasha dhsimayaasha gudoonka. Borogaraamadoodu waxa ay ka kooban yihiin fatashaad iyo la socod si loo ogaado in

kutaani ay ku jirto meel iyo in kale iyo in la buufiyo meeshaa in loo baahan yahay iyo in kale iyo talo soo jeedin la xiriirta ilaalinta nadaafada si loo baa'biyo kutaanta oo dhan iyadoon loo baahan adeegsiga waxyaabaha lagu dilo kutaanta ee aan kiimikada lahayn sida dabida, ama isticmaalka waxyaabaha lagu dilo kutaanta ee kale ee ka diiwaan gashan hay'ada la yiraa EPA-da

Sharciga gobolka ayaa dhigaya in waalidiinta lala socod siiyo sida mustaqbalka dheer ay u sameeyn doonaan caafimaadka ilmaha qaarka ka mid ah kiimakooyinka sunta ah ee uu gudoonku adeegsado iyo in aanu gudoonku hadda si buuxda u ogeyn saameynta suntaa. Qiyaastiina ay qaadanayso in looga fatasho gudaha kutaanta iyo wixii sun ah ee kolkaa ka dib lagu buufin doona dhismaha waxaa laga heli karaa iskuul walba xafiiskiisa maamulka iyo Xafiiska Caafimaadka iyo Amaanka qaabilsan. Waalidiintu waxa ay codsan karaan in la siiyo ogoysiis hore oo ku saabsan buufinta sunta kutaanta marka kasta oo la buufnayo. Intaa waxaa dheer, Waalidiintu waxa ay codsan karaan ogoysiis hore oo ku saabsan wixii sun ah ee kutaan lagu dilayo ee la buufnayo in la siiyo maalin ka duwan maalmaha jadwalka ku qoran ee suntaa in la buufiyo loogu tala galay. Wixii codsi ah waxaa lagu soo hagaajin karaa Hor joogaha Xafiiska Caafimaadka iyo Amaanka ee khadkiisa telefoonku yahay 651-423-7735

Lacagaha Cuntada iskuulka ee aan la bixin

Hadafyada Gudoonka 196 waa in uu siiyo cuntooyin nafaqo leh ardayda si ay u yeeshaan caadooyin cunto cunida ah oo saxa leh, ay u bilaan deegaanka waxbarashada iyo sidoo kale in la sugo xaalada dhaqaale ee mashruuca Qaranka ee Quraacda iyo Qadada Iskuulada (National Breakfast and Lunch) ilhaamida ilmaha aan awoodin in ay gartaan cuntada iskuulka Gudoonka Waxbarashada ee 196 habraaciisa buuxa ee ku saabsan cuntada iskuulka ee aan lacagteeda la bixin waxaa laga heli karaa qodobka xeerka ee 710.2.2A ee Gudoonka. Qoysasku waxa ay codsan karaan in ilmahooda la siiyo qado lacag jaban ah ama lacag la;aan ah markii ay damcaan xilliga iskuulku furan yahay. Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah dhamaan wixii cunto ah uu gato ilmahoodu hadii aysan xaq u lahayn in la siyo cunto lacag jaban ama lacag la'aan ah. Lacagta cuntooyinka waxaa laga bixin karaa khadka (on-line) ka adigoo lacag ugu ridaya koontada (accoount) cuntada ardayga ee Gudoonka waxbarashada 196 ama waxaa kaloo lacagta cuntooyinka loo soo dhiibi karaa ardayga si uu iskuulka u keeno. Waaxda Adeegyada Cuntooyinka iyo Nafaqada ee Iskuulka waxa ay la shaqan doontaa ardayda iyo waalidiinta si ay mar walba ula socodsiiso lacagta ardaygooda lagu leeyahay. Xasuusino ah lacagta ku dhiman ardayga koontadiisa cuntooyinka ee iskuulka ayaa la sameyn doonaa . Soo aruurinta wixii lacag cunto ah ee aan la bixin waxaa loo sameyn doonaa qaab aan ceebeyn ama ilhaamin ardaygii ka qayb galaya mashruuca cuntooyinka iskuulka. Ardayda lacagta lagu leeyahay cuntada looma diido doono, laakiin ardayga waxaa loo ogolaan in lagu qoro cuntadaa xisaabtiisa (ala carte items). Hadii aan lacagtaa cuntada aan la bixin ka dib kolkii si kasta oo lacagtaa lagu soo aruurin lahaa laga quustay, Gudoonka 196 kolkaa waxaa laga yaabaa in uu arrinta u gudbiyo hay'ada lacagta soo aruuriya (collection agency).

Caymiska & Dhumida Hantida

Gudoonka Waxbarashada ee 196 ma bixiyo wax caymis mag-dhow ah oo ku taxa luqa wixii dhaawac ah ee ku soo gaara ardayda iskuulka dhexdiisa ama xilliyada ay ku guda jiraan hawlo iskuulku leeyahay. Sidoo kale, gudoonku ma bixiyo wax caymis ah oo mag-dhaba wixii hantida ardayga kaga dhunta ama kaga jabta iskuulka dhexdiisa ama hawlo uu iskuuku leeyahay. Qoysaska doonaya in ay caymis is geliyaan ku saabsan wixii dhaawac ah ee soo gaara, wixii hanti ah ee ka dhunta waxaa lagula talinayaa in la xiriiraan shirkadooda caymiska.

Waajibaadka Ardayga Saaran

Waajibaadka ardayga waxaa ka mid ah in ay ku dadaalaan tacliintood iyo hawlaha wax barashadooda; xaq dhowraan xaquuqda ardayda kale, shaqaalaha iyo booqdeyaasha; iyo in ay adeecaan ayna oofiyaan sharuucda dowlada hoose, dowlada gobolka iyo dowlada dhexe iyo in ay u hogaansamaan habraacyda gudoonka iyo kuwa iskuulkaba kuwa gudoonkaba. Kuligeen, ardayda, ama maamulka iyo shaqalaaha waxaa na saaran mas'uuliyad ku saabsan abuurida iyo dhowrida deegaan wax barasho oo amaan iyo wax qabadba leh

Xaadir Ahaanta Ardayga

Mas'uuliyad weyn oo dhamaan ardayda fasalada kala duwan dhigata saaran waa in ay iskuulka si joogta ah maalin walba xaadir ugu ahaadaan. Daraaasado badan ayaa cadeeyey in ay isku xiran yihiin joogto xaadir uga ahaanta iskuulka iyo ku najixida tacliinta. joogto xaadir uga ahaanta iskuulka macnaheedu waa in habka wax barashada iyo tacliinta aan la kala go'yn oo la carqaladeyn, waqti ka yar waqtiga fasalka ayaa la galiyaa marka uu ardaygu sameynayo wixii dhaafay - ardaygu wuxuu kaloo ka faa'iidaa ka qayb galka iyo la macaamiltanka ardaygda kale ee fasalka. Sharci uu gobolku leeyahay ayaa dhigaya in ardayda da'doodu u dhaxayso todobada sanno ilaa iyo 17 ka sanno wax la barro. Ardayda in badan sabab la'aan iskuulka uga maqnaata waxaa loo tix galiyaa maqnaasho sharci darro ah.

Iska soo xaadirinta ardaygu uu maalin walba iskuulka iska soo xaadirayo waa wax wax barashadiisa iyo shaqadiisaba u fiican oo faa'iido u leh. Cilmi-baarisyo la sameeyey waxa ay cadeeyeen in marka ardaydu ay si joogta ah u dhigtaan iskuulka inay dareemaan inay ku xiran yihiin bulshadooda , ay sameystaan saaxiibtinimo muhiim ah ay xoojiyaal noloshooda ijtimaaciga ah ayn au badan inay ka qalin jabiyaan dugsiga sare.

Goorma ayey iskuul imaanshaha liidataa ay noqotaa dhibaato?

- Marka la soo gaaro fasalka 9aad, iskuulka imaanshaha fiicani waxa uu si fiican u saadaaliyaa qalin-jabinada ka sareeya kan fasalka 8aad
- Ma maqnaanta boqolkiiba 10 ama 18 cisho sannad-dugsiyeedka waxa ay si ba'an u saameeysaa guulka gaarida tacliinta ee ardayga.
- Ardaydu waxaa loo tix-gelin inay iskuulka in badan ka maqan yihiin xataa hadii ay ka maqnaadaan iskuulka maalin ama labo dhowrkii asbuucba.
- Imaanshaha iskuulku waxa muhiin u yahay xidfadaha nolosha ee ka caawin soona ardaygu inuu iskuulka ka qalin jabiyo shaqana helo.
- Maqnaanshau badani waxakeeni kartaa in ardayga laga eeryo iskuulka.

Xaadir ahaanta Ardayda dhigata Dugsiga Sare

Filitaanka – Maqnaashahu badani wuxuu keeni karaa maxsuul aan fiicnayn maadaama uusan ardaygu awoodeyn in uu la qabsado hawlaha iyo qiimeynta socda. Mar laga reebo maqnaashaha iskuulku ogolaaday oo ansaxiyey ee hoos ku qoran ardayda dugsiga sare waxaa laga rabaa in ay iskuuulka xaadir ku yihiin fasal walba maalin walba.

Xeerka ka degsan maqnaanshaha badan – Habka Ogoysiiska iyo Wax ka qabadka arintaa

- Arday walba buundooyinkiisa, maqnaanshihiisa iyo edbintiisaba waxaa la geliyaa kombuutraka waana ay ka eegi karaan waalidintu khadka – online ka.
- Mara uu ardaygu ka maqnaado iskuulka todobo cisho hal simistar gudihii (ama shan maqnaansho iskuulka ah qaabka rubuca ah) arintaa waxaa la ogoysiin waalidka ardayga. Ogoysiiskani wuxuu kaloo waalidka la socod siin hadii arintan aan wax laga qaban in ay cawaaqib xun keeni karto, oo ay ku jiraan kiridhit la'aan maadaama laga yaabo in ardaygu maqnaanshaha awgiis uusan awoodin in uu la qabsado oo la soco hawlaha wax barid ah sida shaqada guriga, qiimeynta iyo iwm.
- Markii tirada inta maalmood ee ardaygu uu iskuulka ka maqan yahay ay gaarto 10 simistarkiiba oo aysan ku jirin maalmama ardaygu uu sababaha ku maqnaa maamulaha iskuuku waxa uu dib u eegi doonaa uuna baaritaan ku sameyn doonaa sababaha kalifaya maqnaanshahaa badan wuxuuna ka dib go'aamin sababta iyo talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado talaabooyinkaa oo ay ka mid noqon karaan kuwaas soo socda: la kulmid waalidka; waalidka oo la kulma macalimiinta iyo la taliyeyaasha iskuulka, iyo/ama sameynta qorshe ku saabsan wax ka qabaynayo maqnaanshaha.

Noocyada maqnaashaha

Maqnaanshaha aan **lagu** tirin maqnaanshaha sabab la'aanta waxa ka mid noqon kara:

- Ku maqnaanshaha howlo iyo manhajyo wax barasho oo uu soo qaban qaabiyey
- Ku maqnaanta faystooyinka la yaqaan ee diiniga ah sida ciida oo kale;
-

Geerida qof qoyska ardayga ehel la ah (waalid, adeer/eedo, mas'uulka ilma, walaal, ayeeyo awoowe);

- Xaalad ama daruufo degdeg ah oo soo kordha oo la ogolaaday in lagu maqnaan karo (ama,hadii la haleeli koro horey uu u sii ogolaaday) maamulaha iskuulku;
- Xanuun joogta oo warqad dhaqtar soo qoray oo saxiixan lagu soo cadeeyey maamulaha iskuulkuna uu anxasiyey
- Balan la ogolaaday oo lala leeyahay shaqaale ka tirsan iskuulka;
- Xubin qoyska ka mid ah oo shaqo qaran uu ciidanku wadanku u u dirsaday.
- Iskuulka ka fariisin, dibada fasalka looga saaray si kaligii ilmahaa wax lo baro (fasalka dibada uga saarid hal xiisan ama in ka badan hal xiisad ah).

Maqnaanshaha sabab la'aanta ah lagu tirayo waxaa ka mid ah:

- La xaqiijiyey/la ogolaaday – maqnaanshaha uu waalidku xaqiijiyey oo uu yiri wuxuu ardaygu ku maqnan yahay sababo iskuulku uu aqbalay. Sababaha la aqbalo waxaa ku jira jirada ama balamaha dhaqtarada caafimaad ama kuwa ilkaha ee aan la sameyn karin xiliyada iskuulka laga soo rawaxo, oo ah maqnaansho horey loo sii ogolaaday ama loo qorsheeyey (arintan waa in horey loo sii qorsheeyaa hadii la haleeli karo hal asbuuc ka horba, sii loo xaqiijyo arintan lagu maqnaanayaa in ay tahay mid jirta iyo in kale).
- Maqnaanshaha gabi ahaanba sabab la'aanta ah – Maqnaanshaha sabab la'aanta ah wuxuu keeni karaa cawaaqib xumo waxaana loo tix gelinayaa in ay tahay arintaasi dhaqan xumo waxaa la hor geynayaa sharciga iyo xeerarka gudoonka. Maqnaanshaha sabab la'aanta ahi waa midka uu ardaygu uu iskuulku iskii uga maqnaado isagoon wax ogolaansho ah aan ka haysan. Ciqaabta ama maxsuulka uu ardaygu taa sameeyaa uu mutaysan karana waxaa ku jiri kara, xayiraad, fariisin. Ardayda sabab la'aan uga maqnaata hal xiisad ama in hal xiisad ee fasal todoba bari oo iskuuka la dhiganayo sanad dugsiyeedka waxaa loo arkayaa in ay yihiin arday ka saaqidaysa iskuulka waxaana lala tiigsanayaa xeerka maamulka ee la yiraa (Administra- tive Regulation 503.2.1AR, Truancy), si loogu hogaansamo sharci gobolka ee ku saabsan in ay khasab tahay wax barida ilmahu.
- Daahida – Daahida waxaa loo qeexaa ogolaansho la'aan ka soo daahida fasalka. Ciqaabaha sida xayiraad iskuulka ka fariisan ayaa laga yaabaa in uu mutaysto ardaygaa fasalka ka soo daahaa.

Ka Daba tagida wixii dhaafay ardayga maqan – Ka maqnaanta fasalku waxa ay dhalisaa in ardayga maqan laga rabo in uu ka daba tago wixii dhaafay, waxaasoo hadii aan lagu soo dhamayn waqtiga loogu tala galahy gudihiisa keeni karta in buundo aan buuxin la siiyo ardaygaa. Macalimiintu waa in ay u ogolaadaan ardayda in ay soo dhamaystiraan wixii hawl ah ee dhaaftay, sida shaqada guriga, hal xiraalaha, imtixaanada iyo iwm. Laakiin waa waajibaadka ardayga in uu kala hadlo macalinka in uu fasalka ka maqnaa uuna u baahan yahay in la siiyo wixii dhaafay.Ardayda inta badan maalin walba oo ay ku maqnaayeen maqnaansho la xaqiijyey/la ogolaaday waxaa loo siiyaa labo cisho oo ay ku soo dhameystiraan wixii dhaafay muddadii ay maqnaayeen..

Akhlaaqda iyo Edbinta Ardayga

Akhlaaqdu waa falka ardayga ee la xiriira:

- Sida uu ula dhaqmo dadka kale;
- U daryeelo alaabta;
- Mas'uul isaga saaro alaabtiisa, iyo
- Ogolaanshaha wixii khalad ah ee ka dhaca.

Ardayda waxaa laga rabaa in ay u dhaqmaan si waafaqsan sharciyada dowlada dhexe ama kuwa gobolka ama kuwa dowlada hoose; iyo wixii xeerar ama nidaamyo ah uu degsan gudoonka wax barashada, waxaa kaloo ardayga laga rabaa in uu u dhaqmo qaab xaq dhowra xaquuuqda iyo amaanka dadka kale. Shaqaalahu waxa ay qaadaan talaabo si ay u edbiyaan waxna uga bedelaan dhab dhaqanka ardayga kolka hab dhaqanka ardayga uusan waafaqsanayn habraacyada degsan.

.

Edebta:

- Dejiya hab dhaqano iyo habraacyo uusan ardaygu dhaafin karin si ay ugu hor seedo ardaygu in u noqdo mid majuur ah;
- Qaabeeya xaq dhowrid sharciyada, mas'uuliyiinta, hantida, iyo xaquuqda dadka ama tan bnaftiisa, iyo
- Qabeeya qof maskax ku filan leh oo awooda in u naftiisa xakameeyo ama hago. Edbintu waa in ay noqotaa mid lagu caano maalo, waana in ay ka mid yihiin garashada iyo gacan siinta hab dhaqanada quman. Arday iyo shaqaale walba oo ka tirsan gudoonka District 196 waxa uu xaq u leeyahay uu helo goob wax barasho ama shaqo oo amaan ah barto. Sidaa awgeed, gudoonku waxa uu mas'uul ka yahay in uu sameeyo nidaamyo caqli gal oo maamula hab dhaqanka iyo falalka ardayga, iyo edbinta hadii la jabiyo xeerarka. Si taa loo sugo, waa muhiim in uu ardayda gudoonku u abuuro uuna si cad ula socod siiyo ardayda waxa xun iyo waxa san, cidii wax xun sameysana in lala xisaabtami doono.

Qaar kale oo siyaado ah oo ku saabsan habraacyada iyo hab dhaqanka suuban ee ardayga laga rabo waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

Xanjafin – Isticmaalka xanjafinta (ilmo u gacan qaadka si asluub loogu yeelo ilmaha khaladka geyta) lama ogola.

Dhibanayaasha – Markii dhib dhaco oo ilmo ay ilmo kale wax yeelaan shaqaalaha gudoonku waa in uu ka taxadaraa baahida ah gargaar siinta dhibanayaasha iyo lala socod siinta waalidka dhacdadaa dhibka ah ee dhacday.

Xakameynta Ardayga – Mar marka qaarkood, waxaa laga yaabaa in laga maarmi waayo istcimaalida xakamenta ah si ay ardaydu u helaan goob amaan ah oo ay wax ku bartaan. Xoog maquunin oo macquul ah waa ay adeegsan karaan maamulaha ama macalimiinta iskuulku, marka ay muhiim noqoto daruufaha qaarkood si loo saxo, la qabto ama laga hor tago waxyeelo jireed ama geeri cid kale ku timaada. Shaqaalaha kale ee iskuulku sida karaan darawada, wakiilada gudoonka waxa ay iyana isticmaali karaan xoog macquul ah daruufaha qaarkood si loo qabto ama looga hor tago waxyeelo jireed ama geeri cid kale ku timaada. Si gaar ah ayaa looga taxa-darri ardayda naafada ah kolka la raacayo habraac kasta oo lagu xakameeyo ardayda kaa oo ay dhici in lagu qoro qorshaha gaar wax ubarida ah ee ardayga naafada ah (IEP) iyo in la raaco sharciga qorshaha gudoonka ee xakameynta ardayda.

Khidmadaha iyo Ganaaxyada Ardayda

Khidmad ku saabsan wixii ka baxsan tacliinta laga rabo ardayga ayaa la iska qaadi karaa, sida khidmada xaflada qalin jabinta ama wixi kale ee sharcigu ogol yahay.Iskuul waa in uu ku soo dalacaa ardayga wixii ku dhuma ama halaaba, sida buugaag, sahayda iyo qalabka ee gudoonku uu leeyahay, oo ay ku jiraan wixii khasaare ah ee loo geysto basaska iskuulka. Iskuulku waa uu ganaaxi karaa ardayga hadii uu meel khalad ah ka dhigto gaarigiisa baarkinka iskuulku leeyahay.

Ardayda ku timaada Iskuulka Gawaari aan ahayn kuwa iskuulka

Waa waajib saaran waalidiinta (ama ardayda 18 sanno jirta ama ka weyn) in ay helaan gaadiid u kala qaada ardayga laba iskuulku dhexdooda marka ardaygu uu u baahdo in uu hal iskuul ka tago oo u aado iskuul kale arin tacliin ah awgood xiliga maalintii ah. Sidoo kale Waa waajib saaran waalidiinta (ama ardayda 18 sanno jirta ama ka weyn) inay siiyaan ardayda gaadiid uiu kala raaco iskuulka dhexdiisa kolka aysan siin karin gaadiid Gudoonka 196 (District 196). Waalidiintu waxaa dhici karta inay u ogolaadaan ardaydooda inay iyagu iskood ugu socdaalan goobaha balamaha, laakiin, waxaa dhici karta in laga rabo inay saxiixaan saamixid ah inaan iskuulku mas'uul ka ahayn wixii xiligaa soo gaara iyaga. Gudoonku ma kor meero ardayda gawaarida u kala kaxaysata iskuulada, wixii shil ama dhaawac ah oodhacana mas'uul kama aha.

Xafidida Akhbaarta Imtixaanka eeArdayga

Imtixaanka akhbaartiisa in la xafido waa waajib saaran ardayga, waxaa kaloo ardayga ku waajib ah in uu u dhaqmo si daacad ah xiliga laga qaadayo imtixaanada gobolka sida kan la yiraa (Minnesota Comprehensive Assessments) (MCAs).

Wasaaradda Wax barashada ee Minnesota (MDE) waxa ay ka rabtaa in dhamaan ardaydu ay u hogaansamaan habraacyada gobolka iyo kuwa gudoonka ee ku saabsan qaadida imtixaanada waxaana lagu daray habraacyada xeerar cusub oo la rabo ardaydu in ay eegaan ka hor inta aan laga qaadin imtixaanada gobolka:

Imtixaankan, dadaal intii aad awoodo tusna waxaad taqaan ee aad sameyn karto.

- Ha aqbalin caawimaad ku saabsan helida jawaabaha su'aalaha imtixaanka.

(*U sii gudub bogga xiga)*

- Ha siin jawaabaha imtixaanka ardayda kale.
- Cid kale ha u sheegin waxa imtixaanka ku jira.
- Waxaa jiri kara in aad ciqaab mutaysato hadi aadan raacin timaamaha ama hadii aad u dhaqanto si daacad darro ah.

MDE hay'ada la yiraa si weyn ayey uga taxa dartaa amaanka imtxiaanada waxayna ku dhiiri galisaa cid kasta oo wax akhbaar a oo sugan ka haysa imtixaan dagan ama ka walaacsan suganaanta imtixaanka in ay la soo xiriiri karaan hay'ada la yiraa MDE, Barayaasha, waalidiinta, ardayda ama cid kale si ay u soo sheegaan wixii qishid ah ee ay ka shakiyaan ama wixii kale ee khalad ah ama anshax xummo ah ee la xiriira imtxiaanka gobolka oo dhan ardaydiisa laga qaado iyagoo isticmaalaya shabakada online ee ah https:// w1.education.state.mn.us/tip/, ama waxay email u soo diri karaan ciwaanka ah mde.testing@state.mn.us ama waxay soo wici karaan telefoonka 651-582-**8674** (hadii uu war bxinta u soo gudbiyey qof aan is magac dhabin, hay'ada MDE qoraal jawaab ah qof kaa uma celin doonto.) Iyadoo mar walba ku xiran nooca warbixinta la soo gudbiyaa ay tahay cadadka akbaarta la bixiyey, hay'ada MDE waxa ay dib u daba galaysaa iyadoo la xiriiraysa gudoonka si ay u baarto wax is daba mariskaa la soo sheegay. Hadii cidi ay walaac ka qabto sugnaanta amaanka iyo hab dhaqanka imtixaanka looqaadayo, waxaa dadkaa lagu dhiiri galinayaa in ay arintaa ay marka hore kala hadlaan Xiriiriyaha Gudoonka ee Imtixaanada caynkaa ah ama qareenada gudoonka ka hor inta aysan la soo xiriirin hay'ada MDE.

Hab dhaqanka ardayga laga rabo iyo ciwaaqibka imaan kara hadii uu dhaqan xumo la yimaado

Ciqaabta dhaqan xumada waxaa loogu tala galay in si xaq ah oo adag oo is waafaqsan loogu qaado dhamaan radayga gudoonka District 196. Ciqaabahaas waxa ay quseeyaan ardayda dhigata fasalka koowaad ilaa iyo kuwa 12 naad (k-12), wax barashada hore iyo wax barashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn (ABE) ardayda dhigata iskuul kasta oo gudoonku leeyahay ama ku sugan dhismayaasha gudoonka ama saaran gaadiid uu gudoonku leeyahay ama jooga meelaha basku laga raaco, ku sugan xaflad iyo hawlo uu iskuulku soo abaabulay ama barxadaha gaadiidka la dhigto ee iskuulka oo ay ku jiraan meelaha iskuulka dibada ka ah ee gaadiidka la soo dhigto ee inta badan ay ardaydu isticmaalaan. Ciwaaqabyada cayknaa ahi waxay kaloo quseeyaan wixii edeb darro ah ee la sameeyo iyadoo la adeegsanayo kombuyuutar. Ciwaaqabyada cayknaa ahi waxay kaloo quseeyn karaan wixii edeb darro ah ee ka dhaca meelo kale laakiin si toos ah u saameeya hawlada iyo barnaamijyada iskuulka.

Maadaama aysan suurto gal ahayn in la qoro dhamaan wixii dhaqan xumo ah ee dhici doona dhaqan xumada halkan aan lagu darin ee soo baxa waxaa wax ka qaban doona shaqaalaha. Wixii dhaqan xumo iska yar ah waxaa wax ka qaba doona wadaha baska, ilaaliyeyaasha, macalinka fasalka, la taliyaha, maamuleyaasha iyo shaqaalahaha kale ee gudoonka ee qaabilsan arimaha caynkaa ah.

Qishida, been sheegida, iyo min-guurinta qof kale wuxuu sameeyey iyo wixii kale ee dhaqan xummo ah ee la xiriira "tacliinta" waxaa wax looga qabanayaa fasalka dhexdiisa ama hawlaha manhajka ee wax loogama qaban doono shaxanka dhaqan xumada kale ku saabsan.

Ardayda ka qayb qaadanaysa manhajyada waxaa sidoo kale laga rabaa in ay adeecaan xeer hooseedyada u degsan Ururka Dugsiyada Sare ee Gobolka Minnesota Hadii uu hawsha markaa la qabanayo uu ururkaasi soo qaban qaabiyey iyo hadii kaleba.

Cawaaqibyada imaan kara ee buugan gacanta sida faahfaahsan loogu qoray waxaa dheer, iskuul ama Waaxda Gaadiidku waxaa laga yaabaa in ay wax uga qabtaan wixii dhaqan xumo ah ee arday la yimaado siyaabo badan oo kala duwan, oo ay ku jiri karaan in ardayga dhaqan xumada la yimid laga eryo iskuulka, fasalka dibada looga saaro, wixii hawlo ahaa ee manhajka la xiriiray ee uu qaban jirayna uu waayo, tas'hiilaadka iskuuku siin jiray uu waayo, ama in uu iskuulka dibadiisa yimaado loo diido maalintii xiliga iskuulka lagu jiro, lala socod siiyo xaaladiisa qolyaha borobeeshinka, wax bixin dambi ku oogid ah laga diyaariyo, adeegid beesha ah, ganaaxid gaari kaxayn ama siinta gaariga meesha uu dhigan lahaa uu waayo (ardayga heerka dugsiga sare ah), in mukhaadaraad laga soo baaro. Gudoonka 196 (Districct 196) waxay ku dadaashaa inay ka hor tagto in ardayda iskuulka laga eryo iyadoo adeegsanaysa waxaa la yiraa helida hore ee dhibaatooyinka aynka wax uga qabato hab-dhaqanada aan qumanayn qaab loogu tala-galay inuu ka hor tago hab-dhaqankaa aan qumeynayni uu dib u dhaco. Iskuul kasta ee u leeyahay Gudoonka 196 waxa uu ababiyaa qaab waxbarasho oo bulsha ahaan iyo caadifad ahaanba quman doonana inuu xiriiriyo ardayda, shaqaalaha iyo bulshadaba. Shaqaalaha gargaarka ardaydu (oo ay ku jiraan hadii loo baahdo la taliyeyaal, shaqaalaha adeegyada bulshada, taakuleeyeyaal dhaqanka qoyska ah, kiis maamuleyaal iyo saykolkjiistayaal iskuulka) waxaa dhici karta in la heli karo si ay u cawiyaan ardayda dhaqan-xummada la timaada.

Maamulayaasha waxaa laga yaabaa in ay arintiisa gaarsiiyaan hay'adaha sharci ilaalinta hadii loo baahdo . Hadii uu arday uu ku xad gudbo habraacyda iyo xeerarka gudoonka xad gudubkaasoo oo sidoo kale xad gudub ugu ah sharci kale ee wadanka ardaygaa arintiisa waxaa loo gudbin booliiska iskuulkuna wax buu ka qaban arintiisa. Sida uu qabo sharciga gobolku, maamuleyaashu waxa ay u gudbinayaan nidaamka cadaalada ee wadanka ardaygii si sharci daro ah wax hub ah ula yimaada sikuulka. Shaqaalaha iskuulka ma aha in ay fara gashadaan wixii go'aan ah ee hay'adaha ilaalinta sharciyadu ay gaaraan ee ku saabsan ka kaxayn arday iskuulka looga kaxaynayo arimo sharci ilaalinta la xiriira; laakiin, waa in lagu dadaalaa intii la awoodo in waalidka ama cidii kale ee ka mas'uul ah ardaygaa lala socod siiyo arinta ah in hay'ada sharci ilaalinta ay ardaygaa kaxaysteen. Mas'uuliyiinta ka socota hay'adaha sharci ilaalintu ma aha ay fara gashadaan wixii go'aan ah ee tacliinta la xiriira ee laga gaaro ardayga ee ciqaab ahaan looga eryo iskuulka.

Qalabka lagu Isticmaalo Mukhaadaraadka iyo Maandooriyeyaasha

Sida buuxda sida ugu faahfaahsan shaxanka, District 196 waa ay ka mumnuucdaa Ardaydu haysashada isticmaalka iyo qaybinta mukhaadaraadka iyo qalabka loo isticmaalo maandooreyaasha.' Buugan kolka aan niraahno 'mukhaadaraad'

macnaheedu waa maandooriyeyaasha ama walxaha sharciyan mamnuuca ah, shay'aasha la aaminsan yahay ama loo qaato in ay yihiin maandooriyeyaal ama walax mamnuuc ah, wixii laga soo dhiraandhiriyo ama laga dhaliyo walax mamnuuc ah si loogu isticmaalo maan doorin ama dawooyinka dhaqaatiirtu qorto ama kuwa aan u baahnayan warqad dhaqtar kolka la gadanayo oo loo adeegsado maandoorin ahaan.

Wixii daawo ah ee uu u baahdo ardaygu in uu qaato dhaqtar ha qoro ama yuusan qorini marka laga reebo dawooyinka sanka la isaga buufiyo, irbada la isku dhufto ee la yiraa EpiPens iyo dawada sonkorta ee la yiraa (Insulin) waa khasab in loo dhiibo ayna u maamusho kalkaalisada iskuuku sida uu qabo sharciga Maamulada Dawooyinka qodobkiisa 506.2.2. Hase yeeshee, xashiishada dawo ahaanta la isugu qoro laguma haysan karo laguma isticmaali karo iskuulka dhexdiisa ama gaadiidka iskuulku leeyahay. Ardayda dhigata fasalada 7-12 iskood waa isu siin karaan dawooyin caadiga ah ee xanuun baa'biyeyaasha ah hadii ay qoraal qoran oo in ay taas sameyn karaan ah ay ka haystaan waalidka. (Tixraac qodobka 506.2.1.2p, ee Akhbaarta degdeg ah- Ardayda Dugsiyada Sare Dhigata- si aad u hesho akhbaar dheeraad ah.)

Cawaaqibyada

Mid kasta oo ka mid ah dhaqan xumada lagu tilmaamay shaxanada, waxaa jira ciqaab u gaar ah oo la mariyo ardayga marka ugu horeeysa ee uu xad gudub la yimaado, marka labaad oo uu xad gudub la yimaado iyo marka sedexaad oo uu xad gudub la yimaado iyo marka afraad ee uu xad gudub la yimaado. Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in maamuleyaashu ay ciqaab culus ama mid fudud hadba kii haboon ay mariyaan ka dib kolka ay tix geliyaan ku tala galku waxa uu ahaa iyo wixii kale ee daruufa ah ee cudadaar ah. Qeexitaanada ciqaabahaas iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah ee jira waa sidaan soo socota:

"H"– la kulan ardayga iyo la socod siinta waalidka;waxaa ku jiri kara la kulanka waalidka qaan bixin, dhex-dhexaadin, eryid, fasal ka saarid iyo hal maalin iskuulka laga fariisiyo.

Reebid – Waxaa laga rabaa ardaygu in ku haro iskuulka ama uu iskuul dhigto waqti ka baxsan waqtiga caadiga ah ee iskuulada la dhigto.

Dirid – Waa ka dirida ardayga iskuulkalaga soo diro muddo ka yar hal maalin.

Eryida – Waa talaabo uu qaado Gudoonka Wax barashadu oo ka hor tagta in arday uu is qoro ama dib isu qoro muddo aan ka baxsanayn sanad dugsiyeedkaa

Eryid – Waa talaabo uu qaado Gudoonka wax barashada oo ka mamnuucda ardayga iskuulka muddo 12 bilood ah laga bilaabo maalinta ardayga la eryey.

Ka eryida baska – Waa go'aan u gaaro ma'uul ka tirsan Waaxda Gaadiidka ama maamule iskuul oo ka mamnuuca arday raacida basaska iskuulka ama gaadiid kale oo gudoonku leeyahay muddo 12 bilood ah laga bilaabo maalinta ardayga baska laga eryey.

Ganaaxa – Ganaax dhaqaale ah oo uu iskuulku dul saaro ardayga.

Dhex-dhexaadin – Dhex-dhexaadinta waxaa loogo tala galay:

In dhaqa xumo yari aysan sii balaaran oo aysan gaarin heer ay u baahato in taalo iqaab ah la qaado.. (Tusaale ahaan, foorjada, cayda, xanta, iwm., waa la dhex-dhexaadin karaa hadii labada qolo ee is maagayaa ay diyaar u yihiin in ay ka qayb qaataan .)

Xalinta wixii colaad ah ee labo qof u dhaxeysa waxaa laga yaabaa in ay ayana u baahato talaabo ciqaab ah in la qaado. (Tusaale ahaan, hadii arday lagu ciqaabo dagaal awgiis ardaygaa waxaa loo soo bandhigi karaa dhex-dhexaadin la dhexdhexaadiyo isaga iyo qofka kale si looga hor tago in dhibkaasi uusan sii kordhin mustaqbalka.)

Ogoysiinta waalidiinta ama qofka ardayga mas'uulka ah – Wada hadal (mid isagoo aad wada joogtaan aad qof wada yeelataan ama mid telefoonka lagu yeesho) iyo/ama ku wada xiriir qoraal ahaan u dhex mara shaqaalaha iskuulka (inta badan macalin, shaqaalaha gargaarka ardayda ama maamule) iyo waalidka ama qofka ka mas'uulka ah ardayga .

Ogoysiinta Booliiska – Kula xiriir telefoon lagula xiriiro maamule ama qof ka ka socda Waaxda gaadiidku ay kula xiriiraan booliiska deegaankaa si ay ula socod siiyaan wuxuun dhaqan xumo oo sharci darro ah oo uu arday sameeyey.

Kulanada Waalidiinta – Kulan la qabto oo dhex mara shaqaale iskuulka ka tirsan iyo waalidka ama qofka ka mas'uulka ah ardayga.

(U sii gudub bogga xiga)

Fasal ka saarida – Fal talaabo ah oo uu qaado macalin, maamule ama shaqaale kale oo gudoonka ka tirsan si looga mamnuuco arday in uu ka qayb galo xiisadaha fasalka ama waxyaabo kale oo la qabanyo ilaa iyo shan cisho. Ardayga ka dhex geysta fal dagaal ama gacan qaad ah fasalka dhexdiisa waa in markiiba fasalka laga saaraa waxaana dhici karta in la mariyo ciqaabo kale. Fasalka waa in laga saaraa muddo uu maamulahu uu arko in ay tahay munaasib isagoo la tashanaya macallinka.

Qaanta – Mag dhow ama adeeg khasab ah oo laga rabo in uu sameeyo ardayga alaab iskuulku ama shakhsi leeyahay haleeyey, qaaatay ama jajabiyey.

Ka fariisin baaska – fal talaabo ah oo ay qaadaan mas'uul iyiin ka socda Waaxda Gaadiidka ama maamule si looga mamnuuco arday in uu raaco bas iskuulku leeyahay ama gaari uu gudoonku leeyahay maalmo cayiman marki wax dhacaan.

Fasal ka fariisin – Fal talaabo ah oo uu qaado macalin, maamule ama shaqaale kale oo gudoonka ka tirsan si looga mamnuuco arday in uu ka qayb galo in ka badan hal fasalka ama waxyaabo kale oo la qabanayo muddo aan ka badanayn shan cisho. Iskuulada qaarkood waxaa dhici karta in ay leeyihiin barnaamijyo dhaqan celin ah oo loo fidiyo ardayda fasalka laga fariisiyo muddada ay fadhigaa ku jiraan.

Iskuul ka fariisin – – Fal talaabo ah maamule gudoonka ka tirsan si looga mamnuuco arday in uu ka qayb galo in ka badan hal fasalka iyo/ama waxyaabo kale oo la qabanayo muddo aan ka badanayn 10 cisho. Hadii mudada ardayga iskuulka laga fariisiyey ay ka badan tahay shan cisho, maamulaha ardayga iskuulka ka fariisinayaa waa in uu aaryowgiisa ama dhigiisa la socod siiyaa sababta kaliftay fariisinta ardayga . Ardayga iskuulka laga fariisiyaa ma imaan karo iskuulka ama deegaanada gudoonku leeyahay kamana qayb gali karo wax hawl ah oo uu gudoonku ama iskuulku wato muddada iskuulka laga fariisiyey. Hadii maalmaha ardayga iskuulka laga saaray ay wadartoodu ka badan tahay 10 cisho sanad dugsiyeedka oo dhan , gudoonku waa in uu intii awoodiisa ah ku dadaalaa isku dayaa in uu qabto shir ay ka qayb galaan waalidka iyo ardayguba ka hor inta aan ardayga iskuulka laga saarin, hadii u uwaalidku ogolaadana la raadiyaa sidii dhaqtar miyirka qaabilsani uu u soo baari lahaa ardayga. (Gudoonka ma uu bixinayo wixii kharash ah ee ku baxa baaritaankaas hadii uusan baaritaankaasi uusan qayb ka yahay qiimeynta ardayga loo qiiimeynayo ujeedooyin la xiriira wax barashada gaarka ah). Ujeedada kulanku waa in ay noqotaa isku day ku saabsan in lagu ogaado baahida ardayga ee ah in uu qiimeynta ama adeegyo kale u baahan yahay iyo hadii waalidku uu doonayo in uu ardayga soo baarto isagu si loo ogaado in ardaygu u baahan yahay in uu helo daryeel caafimaad *oodhanka miyirka ah* .

Dhaqanka Xumada Ardayga ee Gacanta Qaadida ah (VSB) – Ardayga loo arko in uu sameeyey dagaalka gacan qaadida ah ee la yiraa"VSB" (violent student behavior) shaxanka ciqaanta waxaa loo gelinayaa in u yahay arday dagaal Badan oo taariikh u leh dagaalamid.

Ciqaabo si kale ah/dheeraad ah– Waxaa jiri kara oo la heli karaa kala doorasho ciqaabaha iyo fara-gelin ah marka ay jiraan duruufo gaar ahi

Daba-socodka waalidka (dugsiyada hoose) – Maamulahu waxaa laga yaabaa in uu ku taliyo "daba-socod" waalid in ciqaab ahaan loo isticmaalo (oo waalidka ama qofka mas'uulka ah ardaygu uu dabo-socdo ardayga maalin barkeed inta ardaygu uu joogo iskuulka) ardayga arintaa lagu sameynayo dabo-socodka ahi waa arday dugsiga hoose dhigta oo dhaqan xumo la yimid dhaqan xumadaas oo dhalisay in hal maalin iskuulka laga fariisiyo, marka laga reebo hub haysashada, ama haysashada wax hub u eg, dagaal ama gacan qaadid. Waalidku kolkaa wuxu dooran karaa in uu aqbalo ama uusan aqbalin ciqaabtaa ah waalid ka ardayga la daba dhigayo. Waalidka ardayga daba-soconaya waxaa laga rabaa in uu adeeco habraacyada la yiraa Administrative Regulation 806AR, Visitors to Schools, iyo in uu soo dhameystiro ciqaabtaa daba-socodka ah shan maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta dhacdadu dhacday.

Daba-socodka waalidka (dugsiyada dhexe) – Maamulahu waxaa laga yaabaa in uu ku taliyo "daba-socod" waalid in ciqaab ahaan loo isticmaalo (oo waalidka ama qofka mas'uulka ah ardaygu uu dabo-soconayo ardayga maalin barkeed inta ardaygu uu joogo iskuulka) ardayga arintaa lagu sameynayo dabo-socodka ahi waa arday dugsiga dhexe dhigta oo dhaqan xumo la yimid dhaqan xumadaas oo dhalisay * maxsuul ciqaabid ah.. Waalidku kolkaa wuxuu dooran karaa in uu aqbalo ama uusan aqbalin ciqaabtaa ah waalid ka ardayga la daba dhigayo ah.. Waalidka ardayga daba-soconaya waxaa laga rabaa in uu adeeco habraacyada la yiraa Administrative Regulation 806AR, Visitors to Schools, iyo in uu soo dhameystiro ciqaabtaa daba-socodka ah shan maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta dhacdadu dhacday.

Mukhaadaraad ka baarid (Dugsiyada dhexe iyo kuwa hoose) – ardayda dhigata dugsiyada sare ee ku xad gudubta xeerar ku saabsan isticmaalka mukhaadaraadka ama cabida khamriga waxay dooraan karaan nidaam ciqaabta looga yareynayo waa hadii ardaygu uu ogolaado in mukhaadaraadkaas laga soo baaro uuna ogolaado in uu raaco wixii qolada baaritaanku ay kula taliso in uu yeelo. Baaritaankaas wixii kharash ee ku baxa waxaa bixinaya waalidka ama cida ka mas'uulka ah ardayga (ama ardayda qaan gaarka ah waa hadii ardaygu ka weyn yahay 18 sanno). Foomka saamixida waa in ay saxiixaan waalidka ardaygu si wixii akhbaar ee munaasib ah loola wadaago iskuulka.

U Gudbinta Dhaqaatiirta Dhanka Maskaxda qaabilsan – Ardayda waxaa loo gudbin karaa hadii ay munaasib tahay dhaqaatiirta maskaxda qaabilsan. Baaritaankaas wixii kharash ee ku baxa waxaa bixinaya waalidka ama cida ka mas'uulka ah ardayga ama ardayda qaan gaarka ah waa hadii ardaygu ka weyn yahay 18 sanno.

Barnaamiyada Dhaqan celinta ah – Iskuulada qaarkood waxaa dhici karta in ay leeyihiin barnaamijyo dhaqan celin ah si ay wax uga qabtaan amuuraha la xiriira edbinta ardayga.

Qiimeynaha khataraha – markuu ay jiraan duruufo ku habooni, iskuulku waxaa dhici karta inuu abaabulo koox qaybo kala duwan ka kooban oo qiimeysa khatarta si ay u sameeyaan khatar qiimeyn iyadoo ujeedaddu tahay sugida amaanka arydaga iyo shaqaalaha.

Telefoonada gacanta iyo Aaladaha Shakhsiyanka ah

Ardaygii la yimaada telefoonada gacanta ama aaladaha kale ee shakhsiyanka ah iskuulka iyaga ayaa ka mas'uul ah wixii ku dhaca aaladahaa. Gudoonka Waxbarashada 196 mas'uul kama aha hadii la xado ama uu dhumo ama wax gaaraan wixii telefoon ah ama qalabka kale ee korontada ku shaqeeya ah ee iskuulka la keeno, sidoo kale mas'uul kama nihin baarida dhumida iyo xatooyada alaabta caynkaa ah. Hadii iskuulka lala yimaado telefoono/aalado inta badan waa in lagu hayaa meel aan laga arki karin, waxaana roon in lookar lagu qufulo. Shaqaalaha Gudoonka 196 waxaa dhici karta in ay ka qaadaan telefoonada gacanta iyo aaladaha kale ee korontada ku shaqeeya ardaydii si khalad ah u isticmaasha ama la soo baxda markii laga rabay in ay qariyaan. Mamarka qaarkood, waxaa dhici karta in ardayga laga xayuubiyo asxaanka loo sameeyey ee ah in uu telefoon gacanta ama aaladaha kale ee korontada ku shaqeeya u iskuulka la imaan karo. Waalidiinta waxaa la waydiistaa in ay yareeyaan soo wicida/taxsi u dirida ilmahooda xilliga ay joogaan iskuulka maadaama ay wicitaanadaasi ku noqon karaan carqalad waxbarashada. Ardayda iyo qoysasku waa in dib u eegaan xeerarka iskuuladooda ee ku taxa luqa isticmaalka telefoonada gacanta iyo aaladaha korontada ku shaqeeya.

Ogoysiinta Shaqaalaha Ardayga Dagaalka iyo Gacan Qaadka badan (VSB)

Sida uu qabi sharciga Minnesota ee 121A.64, a (Minnesota ee 121A.64, a) Macalinka fasalku xaq ayuu u leeyahay in uu ogaado arday fasalkiisa la fariisiyey hadii uu horey u lahaa taariikh dagaal badan iyo gacan qaadid. Macalimiinta waa khasab in lala socod siiyo xaalada ardayda caynkaa ah ka hor inta aan la fariisin fasalka macalinka. Ardayga loo aqaansaday in uu leeyahay taariikh dheer oo sannada socoday oo dagaal iyo gacan qaad waxaa loo baahan yahay in macalinkiisa lala socod siiyo taa.

Cadeynta Ardayda taariikhda u leh dagaalka iyo gacan qaadka – Ardayda la timaada hab dhaqanka la yiraa"VSB" (violent student behavior) shaxanka cawaaqibka
waxaa loo geliyaa in ay yihiin arday dagaal iyo dhib badan taariikh u leh.

Ogoysiinta Shaqaalaha iyo Macalimiinta –Ogoysiinta macalinku waxa ay dhici iyadoo la tix raacayo sharciga la yiraa (Procedure 503.3.5P, Staff Notification of Violent Behavior by Students), sharcigaa oo koobi ka mid ah la geliyo diiwaanka ardayga loona hayo si waafaqsan jadwalka u degsan gudoonka wax barashada ee haynta diiwaanada. Ogoysiis qoran waa in la siiyaa ardaygaa macalimiintiisa oo dhan. Maamuleyaasha iskuulka ayaa xor u ah in ay siiyaan ogoysiiskaa dhamaan shaqaalaha kale ee iyana la macaamiltama ardaygaa iyo in kale. Hadii ay suurto gal tahay. ogoysiiska qoraalka ee macalimiinta la siinayo ee ku saabsan waa ardayga caynkaa ah waa in uu dhacaa ka hor inta aan ardaygaa la fariisin fasalka macalinka.

Marba hadii arday loo aqoonsado in uu yahay arday taariikh u leh dagaal iyo gacan qaad ogoysiintaa waa in la sameeyaa dhamaan waqtiga ka harsan sannad dugsiyaad kaa markaa lagu jiro iyo waliba sannad dugsiyeedka xiga. Xiliga ogoysiintaasu sii socon doonto waa la kordhin doonaa iyadoo la eegayo hadba wixii dhib ah ee cusub ee dhaca ee ku saabsan dagaal iyo gacan qaadid.

Ogoysiinta Waalidka Ardayga loo Aqoonsaday in uu Taariikh u leeyahay Dagaal iyo gacan qaadid– Ogoysiinta waalidka ee ardayga dagaalka iyo dhibka badan waxa ay waafaqsanaan doontaa hab raaca ogoysiinta ee ku qoran buugan gacanta iyo xeer hooseeyada la yiraa (Administrative Regulation 503.3AR,) Asluubta Laga Filayo Ardaygu in uu la Yimaado iyo Ciqaabta u Mutaysan karo Hadii uu Falfal xumo la yimaado.

Ogoysiinta Gudoonada Kale ee Wax barashada – Ogoysiiskani waa ka mid ah diiwaanda tacliinta waxaana loo gudbin doonaa gudoonka wax barashada ee uu ardayga lehi rabo in uu iska qoro.

Tababarada– Sida waafaqsan sharciga la yiraa (Statute 121A.64), wakiilo ka socda gudoonka wax barashada iyo wakiilo ka socda macalimiinta ayaa wada falan qeyn baahida ardayda iyo shaqaalaha. Qolyahaasi waxaa laga yaabaa in ay ka wada hadlaan wixii tabarid ee ah loo baahdo oo ay ku jiri karaan waan waan raadin.

(U sii gudub bogga xiga)

Barida ardayga hab dhaqanka wanaagsan iyo hadii ay suurto gal tahay in adeegyo kale oo ka qabta dhaqan xumida sida baaritaan ardayga miyirkiisa iyo maxkaxdiisa lagu sameeyo loo gudbiyo

Siinta Ogoysiiska Qoraalka ah Hay'adaha Ilaalinta Sharciyada – Iskuulka ka hela hay'adaha ilaalinta sharciyada ama maxkamad ogoysiin codsi ah oo qoran oo ku saabsan ardaygu wixii dhibaato ah ee ummada dhexkeeda ka geystay waa in codsigaa ogoysiiska ah uu oofiyaa sharciga Gobolka ee la yiraa Minnesota Statute 121A.75. Taa waxaa ku jiri kara ogoysiinta arintaa shaqalaaha qaarkood waa hadii ay ogoysiintaas laga maarmi waayo si looga dhowro cid kale dhib aan loo baahnayni in ay soo gaaro iyo in ay u ogolaato in shaqaalahu ay ardayga ula shaqeeyaan si quman.

Ogoysiintu waa in ay waafaqsan tahay sharciga gobolka mana aha in ogoysiiskaa uu maamulo habraacyada gudoonka u degsan kolka la ogaysiinayo shaqaalaha xaalada ardayga taariikha u leh dagaalka iyo gacan qaadka. Haynta iyo xafidida diiwaanada la helo iyadoo la tix raacayo qodobka sharciga ah ee la yiraa Minnesota Statute 121A.75 waa in loo hayaa loona xafidaa sida u dhigayo qodobka sharciga ah ee la yiraa Minnesota Statute 120A.22, subd. 7. Ogoysiiska Diiwaanada – Maamulku waa khasab in uu ka hayo nuqul qodobka sharci ah ee la yiraa Procedure 503.3.5P, Shaqaalaha la ogoysiiyey Ardayga Taariikhda u leh Dagaalka iyo Gacan qaadka isna waa nuqul laga hayaa galka la galiyo si loo hayo wuxuun qoraal oo muujinaya shaqaalaha ogoysiinta la siiyey.

Dhaqan xummadu Cawaaqibka iyo Ciqaabta ay keeni karto.

Ardayga waxaa laga rabaa in aysan sameyn falalkan soo socda. Ciqaabta mar walba waa la marsiin hadii falalkaa dhaqan xumada ahi ay ka dhaceen sikulka dhexdiisa, gaadiidka iskuulka ama basaska iskuulka ama goobaha basaska soo istaagaan. Wxii dhaqan xummo ah ee ardaygu sameeyo isagoo adeegsanaya kumbuyuutar iyana ardayga waa lagala xisaabtami. Ardaygu waxaa lagaa yaabaa sidoo kale in uu ciqaab mutaysto hadii uu dhaqan xumo sameeyo asagoo jooga meel kale oo ka baxsan iskuulka laakiin waa hadii ay dhaqan xumadaasi si toos ah u saameyso mashaariicda iyo hawlaha iskuulka. Iskuuku wuxu ku dadaalayaa in wixii ciqaabid ah ee cidi mutaysato si sinaan ah ardayda oo dhan loo wada marinayo laakiin waxaa laga yaabaa in maamulehu inuu ku taliyo muddo gaaban ama muddo dheer oo iskuulka ka fariisin ah, gaadiidka isticmaalkiisa loo diido, ama edbino kale, ama fara galino kale sida u dirida ardayga dhaqaatiirta madaxa ama miyirka. Waxaa laga yaabaa in ay ku jiri karto ciqaab culus oo la mariyo ardayga dhaqan xumada badan oo kala jaad jaad ah geysta ama marka hal dambi oo uu ardaygu geystay uu yahay mid aad u ba'an . Maamuleyaasha waxaa laga yaabaa in ay ardayga ciqaab ladifan mariyaan ka dib marka ay arkaan ayna tix geliyaan ku tala galka iyo wixii kale ee daruufa ah ee jiri kara.

DHAQAN XUMADA	Dembiga 1 aad	Dembiga 2aad	Dembiga 3 aad	Dembiga 4 aad
1. **Xad gudub: Afka, Qoraal ama si kale loo muujiyey–** dareen gelinta dadka marka la isticmaalo hadal dad kala soocid ah, af la gaado ah ah gees gelin ah, hanjabaad ama fisqi ah oo ku jiraan kuwa marka la geysanayo la adeegsado qalabka korontada ah.				
Ku saabsan arday ama shaqaale (fasalada k-5)	*	*	1-Maalin ka fariisin ama daba-gal waalid	3-cisho iskuulka fariisin.
Ku saabsan arday (fasalada 6-12)	*	1-cisho fariisin.	3-cisho fariisin.	5-cisho fariisin.iyo •VSB
Ku saabsan wax is yeelid (fasalada 6-12)	U gudbin baarida caafimaadka miyirka			
Ku saabsan shaqaale (fasalada 6-8)	1-cisho fariisin.	3-cisho fariisin.	5-cisho fariisin.iyo •VSB	eryid iyo •VSB
Ku saabsan shaqaale (fasalada 9-12)	3-cisho fariisin.	5-cisho fariisin.iyo •VSB	Eryid iyo •VSB	
2. **Alaarmiga bilaash uga dhawaajin** –, – si kas ah u siin war bixin been ah 911 ka alaarmi dabka ka dhawaajin, oo ay ku jiraan isticmaalida aalad koronto ku shaqeeysa ama kharibaada aaladaa				
(fasalada k-5)	*	1-Maalin ka fariisin ama daba-gal waalid	3-cisho iskuulka fariisin	3-cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	5-cisho fariisin.	eryid		

DHAQAN XUMADA (sii socda)	Dembiga 1 aad	Dembiga 2aad	Dembiga 3 aad	Dembiga 4 aad
3. **Khamriga*, Gadid, Bixin ama Wadaagid–** Gadida bixinta, ama wadaagida waa mamnuuc waxaa mamnuuca sharciyada Minnesota ama kuwa dowlada dhexe * Buuga gacantu khamri wuxuu ka wadaa wixii khamri ah oo dhan,—qaab kastaba ha noqdeene (sida dareere, buddo ee dhalin kara in lagu sarkhaamo oo ay ka mid yihiin wixii khamri ah ee aan loo ogoleyn cidii ka yar 21 sanno in ay haysato ama isticmaalsho. .				
(fasalada 6-12)	5-cisho fariisin. mukhaadaraad ka baarid leh ama 10-cisho fariisin.	eryid		
4. **Khamri, Haysasho ama Isticmaalid** – Haysashada, uu saameyey isticmaalku ama isticmaalka khamriga.				
(fasalada k-5)	*	1-Maalin fariisin. Ama waalid dab-gal	3-cisho fariisin	5-cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	5-cisho fariisin. mukhaadaraad ka baarid wata ama 10-cisho fariisin.	10- cisho fariisin. mukhaadaraad ka baarid wata iyo heshiis ah in la raaci wixii lagu taliyo **ama** eryid		
5. **Haysashada Rasaasta,**– Haysashada xabadaha, iyo wixii kale ee la rido ee loogu tala galay in hub ahaan loo adeegsado si ay xanuun iyo dhaawac u keenaan.				
(fasalada k-5)	*	3-cish fariisin.	5-cisho fariisan iyo •VSB	Eryid iyo •VSB
(fasalada 6-8)	3-cisho fariisin.	5-cisho fariisan iyo •VSB	Eryid iyo •VSB	
(fasalada 9-12)	5- cisho fariisin iyo •VSB	Eryid iyo •VSB		
6. **Dab kicin** – Kas u baa'bin ama wax uyeelid iskuul ama dhismayaal uu leeyahay gudoonku iyadoo dab la adeegsanayo.				
(fasalada k-12)	Eryid, qaan dhow iyo •VSB			
7. **Gacan qaadid: Jaa'ifo ah**– U gacan qaadid qof kale iyadoo la adeegsanayo hub ama aalad kale oo hub u dhiganta, taasoo dhaawac weyn oo jireed **u geysto qof kale,** dhaawacaa oo ah **mid culus sda uu qeexayo xeerka ciqaabta ee Minnesota.**				
(fasalada k-12)	Eryid iyo •VSB			

DHAQAN XUMADA (sii socota)	Dambiga 1 aad	Dembiga 2aad	Dembiga 3aad	Dambiga 4aad
8. **Gacan qaad: Jireed** – Waa falka loogu tala galo in uu qof dareensiiyo cabsi ah in naftiisu ay khatar u tahay dhaawac ama dhimasho in ay soo gaarto, ama si kas ah qof geeska loogu geliyo la isku dayo ama loogu geysto qof.				
Arday (fasallada k-5)	*	1-cishi fariisin.	3-cisho fariisin iyo •VSB	5- cisho fariisin iyo •VSB
Xubnaha shaqaalaha ah , oo ay ku jiraan wakiilada, tabarucayaasha Askarta Ilaalida Iskuulka (fasalada k-5)	*iyo VSB	1-cishi fariisin iyo VSB	3-cisho fariisin iyo •VSB	5- cisho fariisin iyo •VSB
Arday dhigta (fasalada 6-12)	5-10 cisho fariisin iyo	Eryid iyo •VSB		
Xubnaha shaqaalaha ah , oo ay ku jiraan wakiilada, tabarucayaasha Askarta Ilaalada Iskuulka (fasalada 6-12)	Eryid iyo •VSB			
Diidida amar ku saabsan in la joojiyo gacanqaadka ama garaaca ama weerarida arday kale iyadoo ujeedadu tahay in ardaygaa waxyeelo jireed loo geysto.	10-cisho fariisin iyo •VSB	Eryid iyo •VSB		
9. **Xad gudub: Af, Qoraal ama si kale oo muujiyey** – oo ah maagida arday ama shaqaale ama wixii kale ee falal ah ee cid lagu daan daan sado, ama lagu bajiyo, ama loogu hanjabo in waxyeelo jireed loo geysanayn doono iyadoo la adeegsanayo aaladaha qalabka korontada ah ku shaqeeya.				
Arday ama xubin shaqaalah ka mid ah (fasalada k-5)	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin iyo•VSB
Ardayga dhigta (fasalada 6-8)	1-cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin iyo•VSB	Eryid iyo •VSB
Ardayga dhigta (fasalada 9-12)	3- cisho fariisin..	5-cisho fariisin iyo•VSB	Eryid iyo •VSB	
Xubin shaqaalaha ka mid ah (fasalada 6-12)	5- cisho fariisin iyo•VSB	Eryid iyo •VSB		
10. **Dhaawac jireed, Waxyeelo** – sameynta falal aad halis u ah ama dayac kuwaas oo keena dhaawac cid soo gaaro .				
(fasalada k-5)	*	1-cisho fariisan ama waalid daba -socod	3- cisho fariisin..	5- cisho fariisin..
(fasalada 6-12)	* 1-cisho fariisin.	3- maalin fariisan	5- cisho fariisin.	eryid
11. **Gees galinta –** Gees gelinta cidii sameysa waa la ciqaabi iyadoo ciqaabahaas ay ku jiraan noocyada ciqaabaha hoos yimaada dambiyada, tacadi, dagaal, hagar daameyn iyo kumbuutar ku maagid, iyadoo la adeegsanayo aaladaha korontada ku shaqeeya. Eeg Xeerar maamulka ee 503.8AR, ee Mamnuuca Gees gelinta.				

DHAQAN XUMADA (sii socota)	Dambiga 1aad	Dambiga 2aad	Dambiga 3aad	Dambiga 4aad
12. **Guri Jabsiga** – Soo galida dhisme ama qayb gaar ah oo dhisme ka mid ah iyadoon ogolaansho la haysan iyadoo ujeedadu tahay in dambiga la gaysto				
(fasalada k-5)	3-cish fariisin iyo qaan d how	Eryid iyo qaan dhow		
(fasalada 6-12)	Eryid iyo qaan dhow			
13. **Maan dhooriyeyaasha: Gadid, Bixin ama Wadaag –** Beecinta ama bixinta ama wadaagida maan dooriyeyaasha ama qalabka loo adeegsado isticmaalka daroogada, ama raba ama beeciya,, bixiya daroogo ama qalabka loo adeegsado isticmaalida daroogada oo ay ku jiraan isticmaalida iyadoo la adeegsanayo aaladaha korontada ku shaqeeya. (Ka eeg qeexida maandooyiyeyaasha iyo qalabka lo adeegsado "qaadashada mukhaadaraadka" bogga 24 naad.)				
(fasalada 6-12)	eryid			

DHAQAN XUMADA (sii socota)	Dambiga 1aad	Dambiga 1aad	Dambiga 1aad				
14. **Maan dooriyeyaasha: haysashada, Sarkhaan ahaanta, Isku dayga in la haysto iyo isticmaalka –** Haysashada, ama sarkhaan ahaanta, isku dayga in la haysto ama isticmaalka wixii maan dooriye ah ama isticmaalka ama haysashada waxyaabaha daroogada lagu isticmaalo oo ay ku jiraan aaladaha korontada ku shaqeeya. (Ka eeg qeexida maandooyiyeyaasha iyo qalabka lo adeegsado "qaadashada mukhaadaraadka" bogga 24 naad.) 15. Maagida – Khalad u isticmaalida kumbuyuutar ama aaladaha kale ee lagu wada xariiro oo ay ku jiraan gudbinta calaamad, baaq, qoraal, muuqaal, sharqan ama taariikh oo ay ku jiraan soo gelin akhbaar baraha bulshada, baraha internetka (website) ama madal la gudbiyo iyadoo la isticmaalayo kombuyuutar, telefoonada gacanta ama aaladaha kale ee korontada ku shaqeeya si cid kale maago. Maagida kombuutar cid lagu maagaa waa ka mamnuuc iskuulka xilliga lagu jiro hawlaha iskuulka ama la saaran yahay gaadiid iskuulka ama la isticmaalayo kumbuyuutar iskuulku leeyahay ama iyadoo la joogo meel ka baxsan iskuulka hadii isticmaalka caynaa ahi uu si weyn u carqaladeeynayo waxbarashada iskuulka ama deegaanka iskuulka. Ardayda waa la ciqaabi iyadoo la adeegsanayo dukumiintigan.							
(fasalada k-5)	*	1-cisho fariisan ama waalid daba -socod	3- cisho fariisan	5- cisho fariisan ama.			
(fasalada 6-12) – Daroogooyin aan ku jirin kuwa kor lagu xusay waxa ay keeni doonaan ciqaabahan soo socda.	5 cisho fariisin. mukhaadaraad ka baarid wata ama 10 cisho fariisin.	10- cisho fariisin. mukhaadaraad ka baarid wata iyo heshiis ah in la raaci wixii lagu taliyo	eryid				
(fasalada 6-12) – Qaar ka mid ah daroogooyin khatarta ah , gaar ahaan cocaine, ecstasy (MDMA), heroin, nonmedical methamphetamine (meth) iyo psilocybin (magic mushroom), waxay keeni karaan iskuul ka eryid.	eryid						

DHAQAN XUMADA (sii socota))	Dambiga 1aad	Dambiga 1aad	Dambiga 1aad	
16. **Waxyeelid ama kharabid hanti (Kharibaad)** – kas u jajabinta ama u kharibid hanti uu leeyahay gudoonku ama arday kale, ama shaqaale ama cid kale. *(Ogow: Waxyeelida ama kharibida qalabka amaanka suga [sida dab damiyaha ka la yiraa {AEDs}, kaamaradaha, wiisha dabka sheega, biyaha dabka damiya] markiiba waxa ay hor seedi karaan ciqaabla mutaysto laga bilaabo dambiga heerka 2 aad ah .)*				
(fasalada k-5)	*iyo qaan dhow	1-cisho fariisin, iyo qaan dhow **ama** waalid daba socod	3- cisho fariisin, iyo qaan dhow	5- cisho fariisin, iyo qaan dhow iyo •VSB
(fasalada 6-8)	* 1- cisho fariisin, iyo qaan dhow	3-cishofariisin, qaan dhow	5- cisho fariisin, iyo qaan dhow iyo•VSB	Eryid, qaan dhow iyo •VSB
(fasalada 9-12)	3cisho ,fadhi iyo qaan dhow	5- cisho fariisin, iyo qaan dhow iyo •VSB	Eryid, qaan dhow iyo •VSB	
Waxyeeelada loo geysto hantida (Kharibida) – Ee ka badan $500 (fasalada 9-12)	5- cisho fariisin, iyo	eryid, •VSB iyo qaan dhow		
Waxyeeelada loo geysto hantida (Kharibida) – Ee ka badan $1,000 (fasalada 9-12)	10- cisho fadhi iyo qaan dhow	eryid, •VSB iyo qaan dhow		
17. **Dharka**- Dharka kuma jiraan erayo ama muuqaalo ah wax *fasqi ama *fasahaad ah,*carqalada,*af la gaado ah *ama dad kala sooc ah* ama xayeysiinaya mukhaadaraad, khamri ama tubaako ah. Dhar xirashada ama labiska carqalada ku ah fasalka ama deegaanka wax barashada lama ogola. Kabo waa in la xirtaa mar walba oo iskuulka la joogo si amaanka iyo caafimaadka loo sugo. Ardayda dugsiyada sare dhigataa ma xiran karaan maaskaraha wajiga, dhar, ama wixi kale ee ka hor tagi kara in ardayga wajigiisa la arko oo markiiba la aqoonsan. Cidii taa laga dhaafayana waxaa go'aansan doonta maamuleyaasha iskuulka.				
(fasalada k-5)	*	*	1-cisho fariisin.	3- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.

Fisqiga ama fasahaada waxaa loo qeexaa sidan soo socota: 1) Wixii dhar ah ee cidi xirato ee qofka caadiga ahi u arki karo in dhalin yarada da'da yar lagu fasahaadinayo: Dhar u muujiya ama u tilmaama falal fisqi ah oo si iska cad oo ay dhibsadaan dadka waaweyn dhib sigaas oo la xiriira u soo bandhigida fisqiga caynaa ah dhalin yarada da'da yar) dharka caynkaa ahi in uusan lahayn wax macne ah oo weyn oo loo xiranayo oo la xiriira suugaanta, siyaasada, farshaxanka ama sayniska.

***Carqalada** waxaa loo qeexaa wixii maquul ah oo la sii saadaalin karo ee si weyn u fara gashan kara asluubta iyo akhlaaqda la iska rabo inta hawalaha iskuuladu socdaan ama qiil qiil galiya xaquuqda ardayda kale.

* **Af la gaado** waxaa loo qeexaa wixii cay, yasid, ama meel uga dhicid cid kale ah.

* **Dad kala sooc:** waxaa loo qeexaa wixii midab takoor ah ee lagu sameeyo koox ama shakhsi sida ku qeexan gudoonka xeerarkiisa ku saabsan la dagaalanka dad kala soocida.

DHAQAN XUMMADA (sii socota)	Dambiga 1 aad	Dambiga 2 aad	Dambiga 3 aad	Dambiga aad
18. **U Wadid Gaari si taxa dar la'aanta** – Waa u wada gaariga si aan taxa dar lahayn loogu dhex wado iskuulka khatarna ku ah ardayda.				
(fasalada 9-12)	*; Waxaa ka mid ah in baarkinka loo diido	3-cisho fariisin.; Waxaa ka mid ah in baarkinka loo diido	5- cisho fariisin.; Waxaa ka mid ah in baarkinka loo diido	eryid
19. **Dagaalida** – Gacan qaadka dagaalka ah (ee ka duwan, mudida, riixida, tuurida ama is dhug dhufasho) kaasoo hal ama labo qof dhex mara iyadoo marka hore is af dhaaf jiro ka dibna uu is af dhaaf kaasi gaacan qaad isu rogo.				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin iyo •VSB
(fasalada 6-8)	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.iyo •VSB	eryid iyo •VSB
(fasalada 9-12)	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin iyo •VSB	eryid iyo •VSB	
20. **Dagaalka, Dagaal bilaabid/keenid –** Gacan ka geysiga dagaal af iyo adinba oo ay ku jirto gacan ka geysi dagaal gacan laga geysto iyadoo la adeegsnayo qalab koronto ku shaqeeya.				
(fasalada 6-8)	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin iyo •VSB	5-day susp. and •VSB
(fasalada 9-12)	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin iyo •VSB	expulsion and •VSB
21. **Dab Damiyaha Aan la ogolaan in la isticmaalo** –Dab damiyeyaasha ama dareemaha aan la ogoleyn in la isticmaalo.				
(fasalada k-5)	*	1- cisho fariisin **ama** waalid daba gal	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	5- cisho fariisin	eryid		
22. **Bula larta, ama Haysasho Walxaaha Qarxa** – Haysashada ama beecinta walax ama walxo la isku dar daray oo ujeedadoodu tahay in nal bul layr ah iyo dayaan bixiyaan markii la qarxiyo.				
(fasalada k-5)	*	1- cisho fariisin. ama **ama** waalid daba gal	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin
(fasalka 6-12)	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin	Eryid	
23. **Bula larta, Isticmaaalida Walxaha Qarxa** – Isticmaalka walax ama walxo la isku dar daray oo ujeedadoodu tahay in nal bul layr ah iyo dayaan bixiyaan markii la qarxiyo.				
(fasalada k-5)	*	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	eryid
(fasalada 6-8)	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin	eryid	
(fsalada 9-12)	5- cisho fariisin	eryid		

DHAQAN XUMMADA (sii socota)	Dambiga 1 aad	Dambiga 1 aad	Dambiga 1 aad	
24. **Khamaarka** – Khamaarka: Ciyaarida khamaar ama turubka				
(fasalada k-5)	*	*	*	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal
(fasalada 6-8)	*	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.
(fasalada 9-12)	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
25. **Khashkhashaada** - Ka qayb galida ama shirqool la maleegida cid kale si loo sameeyo falal waxyeela, geeska galiya, xaqira, u caga jugleeya ama sharaf dhac u geysta shakhsiyaad kale oo ay ku jiraan is qaawin, tusid sawirada dad qaaqaawan, erayo caga jugleyn ah ama falalka kale oo si xun u saameeya shakhsi ama koox iyadoo sababtu tahay dhaqankooda oo ay ku jiri karaan isticmaalka aaladaha korontada ku shaqeeya. Khashkhashaada ku salaynsan jinsiyada koox ama shakhsi jinsiyad, midab, qaaruunta qof u dhashay,guur, da'da, cida qof la galmoodo qaadashada c**ayr**, akhbaar ku saabsan hiddaha ama waa in la mariyaa sharciga la yiraa (503.4AR, Harassment, Discrimination, Violence ama Hazing.)				
(fasalada k-3)	*	*	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin
(fasalada 4-5)	*	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin
(fasalada 6-8)	*	1- cisho fariisin	5- cisho fariisin	eryid
(fasalada 9-12)	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin	eryid
26. **Jirabida –** Fal loo geysto arday ama lagu khasbo arday in uu geysto falkaas oo keeni kara khatar weyn ama hal arday gaar ugu jees jeesid si ardagaa saa lagu sameeyaa uu ugu biiro urur ardayi leedahay, ama koox, taas oo ay ku jiri karto isticmaalka qalabka korontada ku shaqeeya. Jirabaad cidii geysata waa in la mariyaa sida uu dhigayo sharciga la yiraa (503.4AR, Harassment, Discrimination, Violence or Hazing by a Student).				
(fasalada 6-8)	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin	eryid
(fasalada 9-12)	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin iyo •VSB	eryid iyo •VSB	
27. **Walxaha Qarxa** - Haysashada aan la ogolayn ama shidida taraqa, jintisiigarka, iyo aaladaha kale ee shlin kara holaca. (Fasalada k-5)	H	1-maalin iskuul ka fariisin ama waalid daba gal	3-cisho iskuul ka fariisn	5-cisho iskuul ka fasiinin
(fasalada 6-12)	1 maalin fariisin	3-cisho iskuul ka fasiinin	5-cisho iskuul ka fasiinin	Eryid

DHAQAN XUMMADA (sii socota)	**Dambiga 1 aad**	**Dambiga 2 aad**	**Dambiga 3 aad**	
28. **Fara gashi, Carqalad ama is Hor taagid –** Wixii fal ee la qaado ee ah isku day ah in laga hor istaago arday ama qof shaqaale ah in fuliyaan hawsha loo xil saaray oo ay ku jiri karaan qaylo, kor u hadal ama adeegsiga qalabka korontada ku shaqeeya				
(fasalada k-5)	*	*		1- cisho fariisin
(fasalada 6-8)	*		1- cisho fariisin..	3- cisho fariisin..
(fasalada 9-12)	*	1- cisho fariisin..	3- cisho fariisin..	5- cisho fariisin..
29. **Fasahaadka** – Waa wixii fal ah ee la xiriira galmada ee loo tix geliyo inay tahay *fasahaad ama wixii kale ee ceeh ah ee ku ku jiraan dibad ku kaadin. Hab dhaqanka fasahaadka ahi ee ka dhaca baska iskuulka dhexdiisa wuxuu kaloo keeni doonaa 5-cisho bas ka fariisin marka ugu* horeeysa iyo ka eryid baska marka labaad ee ardayda dhigata fasalada 9-12 ka.				
(fasalada k-3)	H	H	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.
(fasalada 4-5)	H	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.	5 cisho fariisin.
(fasalada 6-8)	H	1- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	eryid
(fasalada 9-12)	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	eryid
30. **Hayshada sunta ama basbaaska indhaha la isaga buufiyo –** haysashada sunta ama basbaaska indhaha la isaga buufiyo ama wixii kale ee walax ah ee la mid ah oo loogu tala galay xanuun keenid.				
((fasalada k-5)	H	3- cisho fariisin	3- cisho fariisin	Eryid iyo VSB
(fasalada 6-8)	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin iyo VSB	Eryid iyo VSB	
(fasalada 9-12)	5- cisho fariisin iyo VSB	Eryid iyo VSB		
31. **Luraha iyo/ama Aaladaha cajalada ah**– Lurida la xiriirta shayaasha dhaliya sii jeedinta sida, MP3 players (iPods), raadyaha, dhaga gashiga , iyo telefoonada gacanta, qalabka wax lagu hago, iwm. Kuwaa oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn lurida Keenida lur iyadoo la adegsanayo kaamaro aan manhajka wax barashada ka mid ahayn, telefoonada gacanta sawirda, cajaladaha, fiidyowga, ama rikoor iyo/ama wadaagida wax fasalka laga duubay la wadaago iyadoon shaqaalahu ogolaan. Ardayda sharcigaa ku xad gudubta waa laga mumnuuci karaa inay ku haystaan aaladahaa iskuulka dhexdiisa muddo 45 cisha ah iyagoo waliba mutaysan karta ciqaabaha hoos ku qoran.				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho fariisin. ama **ama** waalid daba gal	3- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	* 1- cisho fariisin	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	10- cisho fariisin.
Shaqaalahu uu ku jiro (fasalada 6-12)	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	10- cisho fariisin.	

32. **Taabashada – Shaqaalaha –** Taabashada qofka shaqaalaha ka mid ah la taabto iyadoon uusan ogolaan iyadoo markaana la sameynayo fal amar diido ah oo kas ah. (fasalada k-5 (fasalada 6-12)	H	H	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.
	5- cisho fariisin iyo VSB	10- cisho fariisin iyo VSB	Eryid iyo VSB	
33. **Sawirada Dadka Qaa-qaawan – Haysashada**, eSameynta wixii sawiro galmada la xiriira ah oo fasaq ah oo ay ku jiro waxa combuyutarka lagu diro ee sexting.				
(fasalada k-5)	*	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 6-8)	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 9-12)	*	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
34.**Sawirada Dadka qaa-qaawan Wadaagida** – Wadaagida, oo ay ku jiraan u isticmaalida qalabka korontada ku shaqeeya sida texting ka.new Pornography here				
(fasalada k-5)	*	1- cisho fariisin. ama waalid daba gal	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 6-8)	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	
(fasalada 9-12)	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	
35. **Yare balaqida, wax ka bedelida kharibida ama khalad u isticmaalka Albaabada** – wixii ficil ah ee albaab lagu sii furo si uu u balaqnaado si ha dhow tartiib loogu soo galo ama isticmaalka aan la ogolayn ee albaabada emerginsiga.				
(fasalada k-8)	*			
(fasalada 9-12)	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	
36. **Been Abuurka ku saabsan Diiwaanada iyo Aqoonsiyada** – Been abuurka saxiixyada, macluumaadka, iyo qoraalada kale ee iskuulka ama diidida tusida aqoonsiga shaqaalaha ama siinta akhbaar been ah cid ka tirsan shaqaalaha.				
(fasalada 5)	*	*	1- cisho fariisin. ama ama waalid daba gal	3- cisho fariisin
(fasalada 6-8)	*	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin
(fasalada 9-12)	*	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin	5- cisho fariisin

37. **B o o b ama Baad–** Ka qaadid hanti qof leeyahay iyadoo qofkaa xoog ama dhaar loo dhaartay u hantidaa u dhiibay, oo ay ku jirto dhaarta qofka aaladahaha korontada ku shaqeeya fariin dhaar ah loogi soo diro.				
(fasalada k-5)	* iyo qaan dhow	1- cisho fariisin iyo qaan dhow ama waalid daba gal iyo qaandhow	3- cisho fariisin iyo qaan dhow	5- cisho fariisin iyo qaan dhow iyo •VSB
(fasalada 6-8)	3- cisho fariisin iyo	5- cisho fariisin iyo qaan dhow iyo •VSB	eryid, qaan dhow iyo •VSB	
(fasalada 9-12)	eryid, qaan dhow iyo •VSB			
38. **Fara xumeynta** – waa fal aan la ogolaan oo taabasho ku tala gal ah oo la taabto cid kale cawradeed dharka ka hooseeysa AMA taabasho ku tala gal ah oo la taabto cid kale cawradeeda iyagoo dharka qaba iyadoo ogolaanshaha dhibanahu aysan difaac noqon karin sida uu qabo xeerka ciqaabta ee Minnesota**.** (Wixii akhbaar ah ee arintaa ku saabsan kala soco qodobka sharciga ah ee la yiraa 503.4AR, Harassment, Discrimination, Violence or Hazing by a Student.)				
(fasalada 6-8)	5- cisho fariisin. iyo•VSB	Eryid iyo •VSB		
(fasalada 9-12)	Eryid iyo •VSB			

DHAQAN XUMMADA (sii socota)	Dambiga 1 aad	Dambiga 2 aad	Dambiga 3 aad	Dambiga 4aad
39. **La Xiriira Isticmaalka Kombuutarka**				
Gelida aan la ogolaan ee qaynaga amaanka ee kumbuyuurada ama Xiriirada (seero goynta) (fasalada k-5)	H	H	1-cisho fariisin ama waalid daba gal.	3- cisho fariisin.
Gelida aan la ogolaan ee qaynaga amaanka ee kumbuyuurada ama Xiriirada iyadoo la isticmaalayo qalab koronto ku shaqeeya ama Aalado (seero goynta) (fasalada 6-12)	3-cisho fariisin	5-cisho fariisin	Eryid	
Isticmaalada kumbuyuutarada aan iskuulku lahayn (fasalada 6-12)	H	H	1- cisho fariisin,	3- cisho fariisin.
Wax ku darid ama wax ka bedelid kumbuyuutar iskuulka leeyahay oo aan la ogolaan (hanto wax yeelid (fasalada 6-12)	3- cisho fariisin.	5- cish fariisin iyo qaandhow	eryid iyo qaandhow	
Wixii kale ee xad gudub ah ee la xiriira sharciga 503.7AR, ee la Xiriir isticmaalada Kumbuyuutarada ee la ogol yahay – Ardayda (fasalada 6-12)	H	H	1- cisho fariisin.	
(fasalada k-5)	*	*	*	1- cisho fariisin.
(fasalada 6-8)	*	*	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin
(Fasalada 9-12)	*	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin
40. **Ku hanjabid Qarax gaysi ama bumbo** ama Dagaal – Iyadoo ujeedadu tahay argagax gelin cid iyadoon la kala jeclayn in falkaasi cid argagax galinayo iyo in kale. Si toos ah ama si maldahan ugu hanjabid qarax ama fal kale oo dagaal oo lala beegsado iskuulka ama cid oo ay ku jiraan la adeegssiga qalabka korontada ku shaqeeya.				
(fasalada k-5)	H	1- cisho fariisin	3- cisho fariisin iyo •VSB	5- cisho fariisin iyo •VSB
(fasalada 6-8)	5- cisho fariisin iyo •VSB	Eryid iyo •VSB		
(fasalada 9-12)	Eryid iyo •VSB			

DHAQAN XUMADA (sii socota)	Dambiga 1 aad	Dambiga 2 aad	Damniga 3 aad	Dambiga 4 aad
41. **Xatooyo ama adigoo og hayshada hanti la soo xaday.** – Qaadashada hanti qof kale leeyaha adigoon laguu ogaolaan in aad qaadato . (Wixii akhbaar ah ee ku saabsan xatooyo la xiriirta akhbaarta kombuyuutar ku jirta, ka eeg xeerka la yiraa 503.7AR, Acceptable Use of Information Technology - Students.)				
(fasalada k-5)	* iyo qaan dhow	* iyo qaan dhow	1- cisho fariisin iyo qaan dhow ama waalid daba socod	3- cisho fariisin. iyo qaan dhow
(fasalada 6-12)	1- cisho fariisin iyo qaan dhow	3- cisho fariisin iyo qaan dhow	5- cisho fariisin iyo qaan dhow	Eryid iyo qaan dhow
Xatooyo ama adigoo og hayshada hanti la soo xaday – hantidaa oo qiimaheedu ka badan yahay $50 (fasalada 6-12)	3- cisho fariisin iyo qaan dhow	5- cisho fariisin iyo qaan dhow	Eryid iyo qaan dhow	
Xatooyo ama adigoo og hayshada hanti la soo xaday – hantidaa oo qiimaheedu ka badan yahay $500 fasalada 6-12)	5- cisho fariisin iyo qaan dhow	Eryid iyo qaan dhow		
Xatooyo ama adigoo og hayshada hanti la soo xaday – hantidaa oo qiimaheedu ka badan yahay $1000(fasalada 6-12)	Eryid iyo qaan dhow			
42. **Tubaakada iyo Haysiga E-Sigaarka (E-cigarattes)**– ku haysashada, **ama** isticmaalka, tubaacada ama e-sigaarka (ay ku jiraan dareeraha ana e-sigaarka korontada ah, qalinka qaaca ah iyo aalada sida e-cigar ka ama shiishada) dhismayaasha iskuulka, ama gaadiidka iskuulka ama xafladaha iskuulka waxay xad-gudub ku tahay qobodka sharciga ah ee 406.5AR, ee goobaha ka Caagan Tubaakada (Tobacco-Free Environment). Ku isticmaalida fasalka dhexdiisa ama basaska iskuulku waxa ay keeni kartaa cawaaqibyo ka bilaabmaya darajada labaad ee dambiyada. Ardayda dhigita K-5 waxa ay la siin baas ka eryid hadii ay ku isticmaalaad mar 3aad baaska. dhismayaasha iskuulka, ama gaadiidka iskuulka ama xafladaha iskuulka waxay xad-gudub ku tahay qobodka sharciga ah ee 406.5AR, ee goobaha ka Caagan Tubaakada (Tobacco-Free Environment).				
(fasalada k-5)	H	1- cisho fariisin.ama waalid daba scoda	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	H	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin
43. **Tubaakada iyo E-Sigaarka (E-cigarattes).** Ku tala-galka ku gadida. Siinta ama Wadaagida – siinta ama wdaagida tubaakada ama e-sigaarka (ay ku jiraan dareeraha ana e-sigaarka korontada ah, qalinka qaaca ah iyo aalada sida e-cigar ka ama shiishada).				

dhismayaasha iskuulka, ama gaadiidka iskuulka ama xafladaha iskuulka waxay xad-gudub ku tahay qobodka sharciga ah ee 406.5AR, ee goobaha ka Caagan Tubaakada (Tobacco-Free Environment).				
(fasalada k-5)	H	1- cisho fariisin.**ama** waalid daba scoda	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	5- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	10- cisho fariisin.	Eryid
44. **Seero goyntu** – Waa joogida goob uu gudoonku leeyahay marka dad weynaha ay ka xiran tahay oo aan loo ogoleyn ama marka ardaygu uusan haysan ogolaansho uu meeshaa ku joogi karo ama ku dhex jiro gaadiid uu iskuul leeyahay oo aan loo ogolaan.				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho fariisin.**ama** waalid daba scoda	3- cisho fariisin.
(fasalada 6-8)		1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.
(fasalada 9-12)	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin.	eryid	
45. **Gaari, Aan isticmaalkiisa la ogolaan** – ku jirida ama isticmaalka gawaarida xiliga iskuulka lagu jiro iyadoon iskuulka ogolaansho laga haysan. (fasalada 9-12)	1- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka	3- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka	5- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka	5- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka
Diidida u hogaansan ka sharciyada baarkinka. (fasalada 9-12)	*	1- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka	3- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka	5- cisho fariisin.; waxaa ku jiri kala noqosho ogolaanshaha baarkinka

DHAQAN XUMMADA (sii socda)	Dambiga 1 aad	Dambiga 2 aad	Dambiga 3 aad	Dambiga 4 aad
46. **Haysahaada hub ama wax hub u eg** – haysashada wixii qori ah oo dhan ama xabadi ha ku jirto ama yeysan ku jirine, ama wixii aalad ah oo loogu tala galay in ay qori u ekaato; wixii mindi ah; wixii aalad ah ama qalab ah oo qaab hubeed loo sameeyey awoodana in ay u geysato dhaawac halis ah jirka ama loogu tala galay in ay u ekaato aalad hub ah awoodana in ay u geysato dhaawac halis ah jirka; ama wixii kale ee qalab ah ama walax ah oo qaabka loo isticmaalaa ama loogu tala galay in loo isticmaalo, uu awoodo in uu u geysato dhaawac halis ah jirka ama loo ekaysiiyey walax u geysan karta dhaawac halis ah jirka.				
Haysashada wax hub u eg (fasalada k-5)	*	1-cisho fariisin	3- cisho fariisin	5- cisho fariisin.iyo •VSB
Haysashada hub (fasalada k-5)*(OGOW: Sharci gobolka ayaa qaba eryid hadii hubku u yahay qori.*)	* eryid iyo •VSB			
Haysashada wax hub u eg (fasalada 6-12)	eryid iyo •VSB			

Gaadiidka Ardayda Qaada: Hab Dhaqanka laga Filayo Ardayga

Raacida basaka iskuulku waa axsaan-fal ee ma aha xaquuq qof walbaa leeyahay. Darawalka baaska ayaa mas'uul la ah iklaalinta akhlaaqda ardayda baska saaran waxaana loo ogol yahay inuu ardayda fariisyo kursiga uu asagu rabo. Si loo sugo amaanka ardayda, shaqaalaha gaadiidka iyo darawada waxaa laga rabaa ardaydu in ay adeecaan dhamaan xeerarka iyo habraacyada gudoonka wax barashada ee lagu guud maray xeerarka iskuulada gudoonka dibna loogu eegay buugan gacanta ee kore iyo xeerarka kale ee amaanka gaadiidka ee iyana lagu guur mari doono shaxankan soo scoda. Darawalku waxa uu u soo sheegi doonaa ardayda ku xad-gudubta nidaamka maamulaha iskuulka ardaygu dhigto ama qofka u qaabilsan arimaha ardayda Waaxda Gaadiidka Gaadiidka. Gafafka waaweyn ee lagu qeexay liiska kore ee gafafku hadii ay ka dhacaan baska iskuulka korkiisa waxa ay keeni karaan in loo diido ardayda adeegyada gadiidka ah., intaa waxaa dheer in iskuulku waxa uu marin karaa ardayda ciqaabta kor ku xusan. Hadii arday loo diido adeegyada qaaditaanka ah iyadoo sababtu tahay erdeb-darro ardaygu la yimid kolkaa waalidka ama weliga ardayga ayaa mas'uul ka noqonaya u qaadida iyo ka soo qaadida ardayga iskuulka. Ardaygii laga mamnuuco iskuulka inuu yimaado wuxuu dhumin qaaditaankii laga soo qaadi jiray iskuulka. Nidaamka hab-dhaqanka ardayga laga rabo waxaa dhici karta in wax laga bedelo – sida ay qabaan sharciyada dowlada dhexe, gobolka iyo xeer hooseeyada kale – hadii ardaygu uu helo adeegyada gaar wax u barida ah [EIP]. Fiidow kaamara ah ayaa lagu rakibay qaarka mid ah basaska iskuulada, waxaana laga yaabaa in falalka iyo sheekaysiga ardayda ay duubto cajalada fiidyowgaa maqalka iyo muuqaalka ah. Isticmaalka fiidyowyada kaamarada ah waxaa loogu tala galay in ay yareeyaan edeb darrada si hawl galada basaska u noqdaan kuwa amaan u ah ardayda, darawada iyo gaadiidka kale ee wadada maraya.

In kastoo marka la saaran yahay gaari uu iskuulku leeyahay, sida uu qaba sharciga gobolku, aan ardayda loo ogoleyn in ay wataan shidaal, xayawaan ama wax kale oo khatar ah ama wax aan la ogolaan karin, marka laga reebo xayawaanka sida gaar ah loogu tababaray in ay caawiyaan dadka indha la' ama sida kale naafada u ah. Ardayda waa loo ogol yahay in ay wadan karaan marka ay baska raacayaan shayaal si amaan ah loogu hayn karo dhabta ama kursiga ardayga oo aan wax dhibaato ah ku hayn ardayda kale ee basaska saaran. Shayaasha sida giraan giraha, ulaha banooniga, iwm. waa la ogol yahay in basaska lala raaco marka ay si fiican ugu xafidan yihin boorso,/weel si looga dhowro in ay wax yeelo u geystaan dadka kale ee baska saaran. Shayaasha ka dheer 39 inji (dherar la mid ah dherarka kursiga baska ee gadaale) waa ka mamnuuc in lala raaco basaska iyadoon marka hore ogolaansho laga helin Waaxda Gaadiidka..

Si loo sugo waqtiga basku imaanayo iskuulka, ardayda waxaa laga rabaa in ay xaadir ku ahaadaan meesha baska laga raaco shan daqiiqo ka hor waqtiga la qaadayo.. Kolkii ilmahu ay baska fuulaan waa in ay ku sugnaadaan baska gudihiisa ilaa iyo inta ay ka gaarayaan iskuulka ama meesha loo wado. Wadahu waa uu u soo sheegi maamulaha ama Waaxda Gaadiidka ardaygii ku xad guduba xeerarka u degsan gaadiidka iskuulka.

DHAQAN XUMMADA GAWAARIDA ISKUULKA	Dambiga 1aad	Dambiga 2 aad	Dambiga 3 aad	Dambiga 4aad
47. **Wax ku cunida/iyo wax ku cabida basaka –** Maadaama ay khatari ka imaan karto cuno ku istaagida iyo xajiinta, cunto cunida iyo cabida looma ogola basas dhexdooda				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho fariisin.	3- cisho fariisin.
(fasalada 6-12)	*	1-cisho fariisin.	3- cisho fariisin.	5- cisho fariisin..

DHAQAN XUMMADA GAWAARIDA ISKUULKA (sii socota)	Dambiga 1aad	Dambiga 2 aad	Dambiga 3 aad	Dambiga 4aad
48. **Si khalad ah u fuulid ama uga dagid bas** – U Fuulida ama uga dagida baska qaab u keeni kara dhaawac ardayga ama cid kale				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin
(fasalada 6-12)	*	1- cisho baas ka fariisin.	3- cisho baas ka fariisin	5- cisho baas ka fariisin
49. **Aan fadhiisanayn marka baaasku uu socdo** marka basku socdo (sida uu qabo sharciga Minnesota Statute 169.447), oo ay ku jirto kala baxa madaxa ama gacmaha ama lugaha baska.				
(fasalada k-5)	*	*	1- cisho basa ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin
(fasalada 6-12)	*	H	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin
50. **I s r i i x riixida, Tuurida ama fara ka ciyaarida**				
(fasalada k-3)	*	*	*	1- cisho baas ka fariisin.
(fasalada 4-5)	*	*	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin.
(fasalada 6-12)	*	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin	5- cisho baas ka fariisin
51. **Kharibida Ama Haleynta Qalabka Amaanka Suga** – Taabashada aan la ogoleyn ee lagu sameeyo qalabka amaanka ee baaska ku rakiban, oo ay ku jiraan aaladaha gargaarka degdega ah, dab daminta, **kaamarada, raadyaha la iskula hadlo** alaabada iyo daaqadaha la baxo hadii **wax dhacaan ama meelaha calan waduhu istaago/wadada laga gooy**o.				
(fasalada k-5)	H iyo qaan dhow	1- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	3- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	5- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow
(fasalada 6-8)	1- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	3- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	5- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	Baas ka ka eryid iyo qaandhow
(Fasalada 9-12)	3- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	5- cisho baas ka fariisin iyo qaandhow	Baas ka ka eryid iyo qaandhow	
52. **Tuurida, toogashada ama ku buufinta shayaal**– Ku tuurida wax alaab ah baaska dhexdiisa , ama dibada uga soo tuurida gudaha baska lagu tuuro buufinta waxa la buufiyo sida barafuunka, rinjiga inta baska la saaran				
(fasalada k-5)	*	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin	5- cisho baas ka fariisin
(fasalada 6-12)	*	3- cisho baas ka fariisin	5- Baas ka ka eryid	Baas ka ka eryid
53. **Ku isticmaalida aaladaha Lur ka keena baska dhexdiisa** – u isticmaalida aaladaha sida raadayaha,dhaga gashiga , iyo telefoonada gacanta, kaamarooyinka ama qalabka korontada ku shaqeeya, loogu dhex isticmaalo basaska qaab carqalad ku ah si amaan ah u qaadida ardayda ama shaqaalaha iskuulka				
(fasalada k-5)	*	* cisho baas ka fariisin	1- cisho baas ka fariisin	3 - cisho baas ka fariisin

(fasalada 6-12)	1- cisho baas ka fariisin	3- cisho baas ka fariisin	5- Baas ka ka eryid	10 - Baas ka ka eryid

Qodobka Minnesota Statute 121A.59 wuxuu dhigayaa: "Raacida Baska iskuulka in uu yahay iska samafal ee uusan ahayn wax qof walbaa xaq u leeyahy. Xaq u yeeladka uu arday xaq u yeesho in lagu qaado iskuul baas waa laga ceshan karaa hadii ardaygu ku xad gudbo sharciyada u degsan amaanka basaska iskuulka, sida uu qabo habraac qoran ee u degsan iskuulka ee debinta ardayga. U diidida ardayga loo diido in uu raaco baaska iskuulka macnaheedu ma aha eryid iskuulka laga eryey ama laga fariisinayo ardayga muddo, sida ku qeexan sharciga la yiraa tPupil Fair Dismissal Act. Hanaanka la raaco marka arday naafo ah loo diidayo raacida basaska iskuulku waa habraacyadan iyo qodoban sharciga ah ee soo socda. Individuals with Disabilities Education Act, United States Code, title 20, section 1400 et seq., section 504 of the Rehabilitation Act of 1973, United States Code, title 29, section 794, and the Americans with Disabilities Act, Public Law Number 101-336, Qodobadaa iyaga ah ayaa maamula u diidida ardayga naafadu u qoran tahay loo diidayo raacida baasaska iskuulka."

Ardayda Wax barshada Gaarka ah Hesha: Ciqaabta edeb darrada ay la yimaadaan

Inta guud, dhamaan ardayda oo dhan waxaa laga rabaa in ay u hogaansamaan habraacyada, xeerarka iyo sharciyada iskuulka. Hase yeeshee, ardayga wax barashada gaarka ah hesha waxaa laga yaaba in habraacyada, xeerarka wax laga bedelo marka iyaga lala dhaqmayo sida ay qabaan sharciyada dowlada dhexe iyo kuwa gobolkuba, iyo sida uu qabo qorshaha gaar wax u barida aedayga ee (IEP).

Mar kasta oo ay suurto gal tahay, shaqaalahu waxa ay qaabayn doonaan hab wacan oo wax qabasho ah si loo maareeyo hab dhaqanka ardayda wax barashada gaarka ah la siiyo intii ciqaab uun la marin lahaa marka ay khalad geystaan

Fasal dibad uga saarida la yiraa (ISS)

Ardayda wax barashada gaarka ah heshaa waxaa laga yaabaa in la siiyo ISS si ay ugu sii socoto ka faa'iidaysiga wax barashada

Iskuulka ka Fariisinta la yiraa (OSS)

Ardayda adeegyada wax barashada gaarka ah hesha waa in la siiyo wax barasho si kale ah hadii iskuul laga fariisinayo (OSS) muddo aan ka badnayn shan cisho oo is xigta. Ardayda hesha wax barashada gaarka ah ee iskuulka laga fariisin karo muddo ka badan 10 cisho marka laga reebo kolka ay ogolaadaan sharciga arintan quseeya ee hoos lagu qeexay.

Kolka arday la siiyo wax barasho gaar ah iskuulka laga fariisiyo lix cisho oo is xigta ama isku dar 10 cisho hal sannad dugsiyeed oo dhan, ka fariisintaasina aysan ku lug lahayn talo iskuul ka eryid ama ka saarid ama isbedelo kale ah oo la xiriira meeleynta sida uu qabo sharciga dowlada dhexe ee ku taxa luqa xubnaha kooxda barnaamijka gaar wax u barida ardayga oo ay ku jiraan ugu yaraan mid ka mid ah macalimiinta ardayga waa inay kulmaan ayna u ogaadaan heerka adeegyada ardaygu u baahan yahay si uu u sii wado in uu ka qayb qaato manhajka tacliinta guud, in kastoo meel kale ay tahay iyo in la higsado hadafyada barnaamijka gaar wax u barida ardayga. Kulankaasi waa in uu dhacaa sida si ugu dhaqsaha badan, laakiin waa in uusan ka dambayn maalinta tobnaad ama maalinta lixaad ee maalmaha is xiga ee iskuulka laga fariisiyey ama maalinta kow iyo tobnaad ee tirada guud ee iskuulka laga fariisiyey.

Iskuul ka fariisintii 10 cisho oo isku-xig-xigta ka badan waa khasab in lagu sameeyo eegid gaar ah. Eegid gaar ah waa in iyana lagu sameeyaa dhamaan ganaaxyada iskuul ka eryida ah oo dhan kolka ardaygu iskuulka laga fariisiyo muddo 10 cisho ka badan sanad dugsiyeedka oo dhan iyo kolka ka eryida iskuulka ee kolkaa ay tahay mid ka mid ah kuwa badan oo taxanae ahaa oo iskuul ka erydi ahaa oo kalifta bedelid meeleynta. Kolka eegidaa la sameeyo ogaysiis qoran oo ku saabsan kulanka kooxda IEP da iyo Ogaysiiska Iskuul ka fariisinta waa khasab in loo diro waalidka ardayga ama cidii ka mas'uul ah. Kooxda IEP du waa ay kulmi waxa ayna diiwaan gelin in edeb darrada ardaygu ay la xiriirto naafanimadiisa iyo in kale. Hadii kooxdu ay go'aansato in waxa dhacay ay yihiin astaan muujinaysa naafanimada ardayga, iskuulka ka saaridu waxaa laga yaabaa in ay wali dhacdo ama bedelid wax laga bedelayo meesha ardayga lagu meeleeyey ay wali dhacdo hadii waalidka ardaygu uu taa ogolaado ama sharcigu uu ogol yahay. Kooxda IEPdu waa in ay sameeysaa baaritaan la xiriira hab dhaqanka ayna diyaarisaa qorshe wax looga qabanayo edeb darrada jirta ama hadii ay quseeyso dib u eegid kooxdu waa inay sameysaa waxna ka bedeshaa qorshaha jirra. Hadii falka ardaygu sameeyey uu yahay mid toos ula xiriira dhaqan gelin la'aanta qorshaha EIP da kolkaa kooxdu waa in ay qaado talaabooyin degdeg ah oo ay ku saxayso dhaqan-gelin la'aantaa. Hadii kooxdu EIP du ay go'aansato in dhacada dhacday aysan ahayn astaan muujinaysa naafanimada ardayga, talaabo ayaa la qaadi waafaqsan xeerarka degsan. Hase yeeshee kooxda IEP du waa khasab in ay go'aamiso heerka adeegyada loo baahan yahay ay gaarsiisan yihiin si loo awoodsiiyo ardayga in u sii wado in uu ka qayb qaato manhajka tacliinta guud uuna higsadana hadafyada IEP da. Waa khasab in la sameeyo baaritaan ku saabsan wax qabsiga hadii ay go'aamiyaan kooxda IEP du in ay quman tahay in la sameeyo baaritaankaa.

Hadii kooxdu mar ay noqotaba ay mar go'aansato in ardaygu uusan la socon karin ama raaci karin hab raacyada iyo xeerarka u degsan gudoonka ee la xiriira hab karin ama raaci karin hab raacyada iyo xeerarka u degsan gudoonka ee la xiriira hab dhaqanka suuban sababtoo ah naafanimadiisa awgeed in hanaan kale oo gacan ku ah loo dejiyo ardayga waa waxaan laga maar mayn, qiimeyn ayaa la sameyn doonaa taasoo laga yaabo in ay keeno in la qoro Qorshe Wax ka Qabad Dhaqan Xumada Ardayga ah oo lagu darro qorshaha kale ee Wax barida Gaarka ah ee ardayga ah ee la yiraa IEP.

(U sii gudub boggaxiga)

Eryida/Ka Saarid

Ka hor inta aan lagu dhaqaaqin eryid ama ka saarid iskuulku waa khasab in uu u sameeyo muraajaco dib u eegid ah sida ay ugu qeexan tahay kor. Hadii kooxda ay go'aamiso in dhacdada dhacday ay tahay astaan muujinaysa naafanimada ardayga, kolkaa iskuul ka eryid ama ka saaridi laga yaabee inysan dhicin. Hase yeeshee, gudoonku waxaa dhici karta in uu isticmaalo oo maro dow kale si uu u soo jeediyo is bedel lagu sameeyo ardayga IEP giisa iyo meeleyntiisa. Intaa waxaa dheer, xataa hadii la go'aamiyo in dhacdada dhacday ay tahay astaan muujinaysa naafanimada ardayga, gudoonku waxaa laga yaabaa in ugu meeleeyo ardayga si ku meel gaar ah goob wax barasho oo kale ilaa muddo gaaraysa 45 cisho hadii ay jiraan daruufaha lagu xusay qaybtan hoose.

Hadii kooxdu IEP du ay go'aansato in dhacada dhacday aysan ahayn astaan muujinaysa naafanimada ardayga, iskuulka waxaa laga yaabaa in uu ku dhaqaaqo qaadida talaabo munaasab ah si uu uga eryo ama uga saaro ardayga iskuulka si waafaqsan sharciga iyo xeerka gudoonka. Kooxda IEP du waa khasab in ay go'aamiso adeegyada la bixinayo xiliga eryida. Qiimeyn ku saabsan karaanka ardayga waxaa dhici karta in la sameeyo hadii ay la quman tahay kooxda IEP da.

(IEP)si dib loogu eego xiriirka ka dhaxeeya naafanimada ardayga iyo dhaqan xummada lagu arkay ee kalifay in talaabo edbin ah la qaado, soo ogow in dhaqan xummada dhalisay eryida lagu taliyey in ardaygaa la eryo ama iskuulka laga saaro ay tahay astaan muujinaysa naafanimada ardayga, U kuur gal haboonaanta qorshaha wax barashada gaarka ah ee ardayga Ogoysiis qoran oo ku saabsan kulanka iskuulka ka fariisinta ah ayaa loo diri doonaa waalidka ardayga. Kooxda IEP du waxa ay :

- Go'aamin doontaa in edeb darrada ardaygu uu sameeyey ay tahay mid astaan u ah muujinaysana naafanimada ardayga iyo in kale
- Muraajaco ku sameeyn doonaan wixii baaritaano ah ee la sameeyey ka dibna waxa ay go'aansan doonaan in loo baahan yahay baaritaano kale oo dheeraad ah iyo in kale
- Muraajaco ku sameyn doonaan qorshaha wax barida ee IEP da waxna ka bedel hadafyada iyo ujeedooyinka ama qaabee qorshe kale oo IEP

Ka Reebidaha

Sida uu qabo sharciga dowlada dhexe ee la yiraa Individuals with Disabilities Education Act (IDEA), ardayda wax barashada gaar ka ah ee la yiraa IEP la siiyo gudoonku waxaa laga yaabaa in ugu meeleeyo si ku meel gaar ah goob wax barasho oo kale muddo 45 cisho ah hadii ardaygu uu ku dhex sameeyo falalkaan soo socda iskuulka dhexdiisa:

Haysta hub khatar ah sida ku qeexan (sharciga dowlada dhexe) isagoo iskuulka ku sugan, ama iskuulka ka ag dhow ama hawl iskuulku leeyahay ku jira.

Ogaal u haysta, u isticmaala, u gada daroogo sharci darro ah mukhaadaraad sharci darro ah ama gada ama qaban qaabiya gadida walxo mamnuuca ah inta uu iskuulka joogo, ama iskuulka ka ag dhow ama hawl iskuulku leeyahay ku jira.

Cid kale u geysta dhaawac culus oo jireed, (sida ku qeexan sharciga dowlada dhexe) iyagoo iskuulka ku sugan, ama iskuulka ka ag dhow ama hawl iskuulku leeyahay ku jira.

Maamulka iskuulka ayaa iska leh awooda ku meeleynta ardayga meel kale mudo 45 cisho ah: laakiin kooxda IEP du waa khasab inay go'aamiso meel wax barasho oo ku meel gaar ah in ay u soo hesho ardayga, goobtaa waalidku waa uu diidi karaa oo racfaan waa ka qaadan karaa go'aanka sida uu qabo sharciga dowlada dhexe. Hadii falka la geystay uusan ka soo bixin sharuudaha kor ku xusan. Gudoonku waxa uu codsan karaa dhageysi dacwo dow raacid ah oo hoose in la qabto si uu u raadiyo helida amar lagu bedelayo goobta tacliineed ee hadda mudadda 45 cisho ah ardayga lagu meeleeyey hadii gudoonklu uu rumeysan yahay ku haynta ardayga goobta tacliineed ee hada lagu meeleeyey inay si weyn ugu badan tahay in ay keeni karto waxyeelo soo gaarta ardayga ama cid kale iyo/ama in gudoonku uu soo jeedin karo bedel lagu sameeyo meeleynta ardayga taasoo hadba ku xiran xaquuqda waalidka ama mas'uulka ee ah in la maro dowga sharciga ah.

Ku lug yeelid Mas'uuliyiinta hay'adaha sharci ilaalinta iyo kooxaha gurmadka degdeg ah

Mas'uuliyiinta hay'adaha sharci ilaalinta looma adeegsan karo in ay qabtaan wax hawl ah oo la xiriirta wax barida, ha noqoto wax qabad deg deg ah ama waxa ku qoran qorshaha gaar wax u barida ah ee layiraa IEP. Mas'uuliyiinta hay'adaha sharci ilaalintu in ay soo fara gashadaan ma aha go'aamada la xiriira wax barashada ee ku saabsan ka eryida ardayga iskuulka looga eryo edeb ddarro uu la yimid awgeed.

Shaqaalaha iskuulku waa ay u sheegi karaan wixii dambi ah ee ka shakiyaan in uu geystay arday naafo ahi hay'adaha sharci ilaalinta, kolkaa ka dibna hay'adaha sharci ilaalinta waxaa loo ogolaan doonaa in ay waajibkooda gutaan oo wax ka qabtaan war bixinadaa soo gaaray ee la xiriira dambi geysi wax qabadkaas oo uu ku jiri karo in ardayga iskuulka dibada looga saaro hadii laga maari waayo. Shaqaalaha iskuulku in ay codsadaaan ama fara gashadaan ma aha go'aanka hay'adaha ilaalinta sharciyada ee ku saabsan in ardayga looga kaxeeyo iskuulka arimo sharci ilaalinta la xiriira; hase yeeshee waxaa lagu dadaali intii la awoodo in waaldika ama cida mas'uulka ah ardayga lala socod siiyo in ardayga hay'adaha sharci ilaalintu la hadleen.

Hadii arday qaata IEP ay qabtaan ama ay ka saaraan fasalka ama iskuulka oo dhan hay'adaha sharci ilaalintu iyadoo arrintaana ay codsadeen shaqaalaha iskuulku xilliga iskuulka lagu jiro maalintii labo goor arrintaasi oo kale ay dhacday 30 cisho gudahood, kolkaa kooxda IEP da ee ardaygu waa khasab in ay kulanto si ay u go'aansato in IEP gu uu ku filan yahay baahida ardayga iyo in kale ama in loo baahan yahay qiimeyno kale oo dheeraad ah iyo in kale.

Xalinta wixii walaac ah ee jira

Ardayda ka walaacsan fal gaar ah oo ciqaabid ah oo iyaga lagu qaaday waxa ay kala tashan karaan arintaa waalidiintooda, macalimiintooda iyo/ama shaqaalaha u adeegida ardayda (la taliyeyaasha, psychologists, iwm.) si ay xal ugu helaan walaacaa. Hadii walaacaa aan qolyahaasi xalin karin, ardayda iyo waaldiintu waxa ay walaacooda u gudbin karaan qolyahan hoose ku qoran iyagoo raacaya habraaca hoos la isku tusay. (Ardayda iyo Waalidiinta waxaa laga rabaa in aywalaacooda u gudbiyaan sida kala horeynta ah ee falaaraha hoose muujinayaan).

Dhamaan shaqaalaha iskuulka waxaa laga rabaa in ay ardayda ula dhaqmaan si daacad ah oo cad oo munaasib ah, iyo in ay sidoo ula dhaqmaan ardayga si xaq dhowr ah ayna aqoonsadaan faraqa kala duwaanta ah ee shakhsiyan ah ee u dhaxeeya ardayda

Habka Racfaanka (Fasaladak-5)

Maamulaha

↓

Agaasimaha TacliintaDhexe

↓

Aaryowga ama dhigii

↓

Gudoonka Waxbarashada

Habka Racfaanka (Fasaladak-5)

Waaxda Gaadiidkaqofka u qaabilsan ardayda &
(Wixii ka dhex dhaca gaadiika iskuulka)

↓

Kalkaaliyaha Maamulaha

↓

Agaasimaha Tacliinta Sare

↓

Aaryowga ama dhigii

↓

Gudoonka wax barashada

Baarida iyo qabashada alaabt mamnuuca ah

Hadii maamulka iskuulku ay aaminsan yihiin in fal sharci darro ah ama xad gudub lagu sameeyey nidaamka iskuulka ama kol dhow la sameyn doono, waa loo ogol yahay in ay baaraan ardaygaa iyo alaabtiisa, oo ay ku jiraan telefoonaka gacanta iyo gaariga ayna qabtaan wixii alaab ah ee uu ardaygu haysto ee sharcigu ama habraacyada iskuulku uu mamnuucay. Baaritaanku waxa uu ku koobnaan doonaa oogada guud ee laga shakisan yahay in baaritaanka lagu heli doono cadeymo muujinaya in waxaa laga shakiyey ee khaladka ahi ay jiraan. Xadka iyo heerka baaritaanka waa khasab in uu ku xirnaado ujeedooyinka baaritaanka.

Hadii la haleeli karo,ardaygu xaadir ayuu ahaan kolka alaabtiisa la baarayo

Inta badan baaritaanka alaabta iskuulka waxaa ku jiri kara, lookarada, kombuyuutarka-ama miisaska, wixii alaab ah oo iskuulku leeyahay waxaa laga yaabaa in la qabto. (Hoos ka eeg akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan lookarada.) Iskuuku waxaa laga yaabaa in uu adeegsado eyo si gaar ah loo tababaray. Si ay u helaan ayna u tusaan mas'uuliyiinta walxaha mamnuuca ah ee ku jiri kara. Lookarada iyo meelaha kale iyo baarkinada. Hadii uu ey walax mamnuuca ka dhex helo lookar ama gaari, mas'uuliyiintu meeshaa oo dhan waa ay baari.

Wixii walxo ah oo la qabtadana waxaa loo dhibii doonaa mas'uuliyiinta ku shaqada leh. Ama waxaa loo celin mulkiilihii lahaa.

Si loo ilaaliyo amaanka ey ayaa lagu fasaxi iskuulka oodhan (fasaxidaa inta badan waxaa loo yaqaan ey ursiin) waxaana eygu baaraa lookarada, miisaska, gawaarida la dhigto iskuulka. Mar marka qaarkood mar mar ayaa eyga lagu fasaxaa oo uu baaraa iskuulada Gudoonka District 196 oo dhan. Intaa waxaa dheer,, baaritaanada eyadu sameeyaan ayaa la adeegsan doonaa kolka maamuluhu uu ka shakiyo in alaab koontara baan ah iskuulka la keenay. Koontara baanka eygu uu baaro waxaa ku jiri kara mukhaadaraadka, bumbooyinka iyo qoryaha.

Lookarada Iskuulka – Lookarada iskuuku waa hanti iskuulku leeyahay. Mar ay noqotana ma jiorto mar u iskuuku faraha ka qaado oo ka tanaasulo gacan ku haynta iskuulka ee lookarada ardayda loo siiyey in ay ku intifaacaan uun.

Fatashaada gudaha lookarada waxaa sameyn kara maamulaha iskuulka markii uu rabo iyadoo wax ogoysiis ah la bixin, ardayguna uusan ogolaan iyo iyadoo warqad maxkamadeed oo baarid ah aan la wadan.

Wixii ardaygu leeyahay ee ku dhex jirta lookarada iyana waxa la baari karaa uun kolka mas'uuliyiintu ay aaminsan yihiin in baaridaas lagu heli doono cadeymo muujinayaa in sharciga wadanka ama habraacyada iskuulka lagu xad gudbay.

Sida ugu dhaqsaha badan ayuu maamulka iskuulku ugu sheegi doonaa ardayga lookarkiisa la baaray hadii aysan u sheegidaasi aysan carqalad ku ahayn baaritaano iskuulku ama booliisku wado.

Nidaamyada Ardayda looga Eryo iskuulada: Ka saarida, Ka fariisinta, Ka Reebida iyo Ka Eryida Fasalka

Sababaha Ardayga loo fariisin karo, ama loo eryi karo

Sida waafaqsan sharciga la yiraa Minnesota Statute 121A.45, Ardayga waxaa iskuulka looga fariisin karaa ama looga eryi karaa sababan soo socda midkood:

- Kas ugu xad gudbida sharciga iskuulka, sharcigaa lagu xad gudbayaa waa in uu noqdo mid cad oo qeexan si uu u siiyo ardayda ogoysiis ah in laga rabo in ay sharcigaa adeecaan.
- Fal kas ah oo si weyn u carqaladeeya xaqqa dad kale ay u leeyihiin in ay wax barasho helaan ama shaqaalaha gudanaya shaqadooda uu iskuulku u xil saaray ee la xiriirta tacliinta iyo manhajyada.
- Fal kas ah oo si weyn khatar u geliya shaqaalaha iskuulka, ardayga ama ardayda kale ee iskuulka joogta.

Ka saarida Fasalka/Fasalka ka fariisin (ISS)

"Fasal ka saarida" iyo"saarida" waxaa loo qeexaa wixii fal ah ee uu qaado macalin ama maamule ama shaqaalaha kale ee iskuulka si looga mamnuuco arday in uu galo hal fasal ama hal xiisad muddo aan ka badnayn shan cisho.

"Iskuulka ka fariisinta ah" (ISS) waxaa loo qeexaa wixii fal ah ee uu qaado macalin, maalule ama shaqaale si looga mamnuuco arday in uu galo hal fasal ama hal xiisad muddo aan ka badnayn shan cisho.

"Xiisada fasalka" ama "hawlaha xiisada" waxaa loo qeexaa waqti cayiman oo loo qoondeeyey hal maado ama hal hawl ah oo gaar ah.

Ardayga waa laga saari karaa fasalka ama xiisad, hadii uu macalin ku kala tashado arinta uuna ka helo ogolaansho maamulaha ama dhigii.

- Go'aanka ardayga iskuulka looga saarayo waxaa gaara maamulaha ama dhigii. Ardaygana afka ayaa looga sheegi arinta. Waalidiinta telefoon ama warqad boostada [U.S. mail] loo dhigo ayaa lagu la socod siin arinta.
- Ardayga fasalka waa laga saari iyadoon arintiisa laga shirin hadii ardayga lagu arko falal xun xun oo ku tala gal ah oo si weyn carqalad u geliya xaquuqda ardayda kale ay u leeyihiin wax barasho ama fal ku tala gal ah oo khatar galinaya shaqaalaha iskuulka, ardayga laftisa iyo ardayda kaleba ama hantida iskuulku leeyahay.
- Xilliga ardayga fasalka laga saarayo [ISS] ardayga waxa uu ku jiri doonaa gacanta iskuulka, maamulaha ama dhigii ayaa ka mas'uulka ah haynta ardayga fasalka laga saaray ama laga fariisiyey.
- Ardayga waxa uu fasalka ku so noqon doonaa markii u dhameysto muddadi fasalka laga eryey ama laga fariisiyey
- Kolka ardayga fasalka laga saaro in ka badan 10 goor hal sanad dugsiyeed gudihii, iskuulku waa in uu la socod siiyaa lana kulmaa waalidka si loo falan qeeyo dhibaatada dhalinaysa in ardayga mudadaa badan laga saaro fasalka.

Ka Fariisinta Ardayga laga Fariisianayo Iskuulka (OSS)

Maamulku waa uu ka fariisin karaa ardayga iskuulka hadii loo baahdo. Ka hor inta wax fariisin ahi aysan bilaabmin, maamulka iskuulku waxa uu la xiriiraa Waalidka ardayga la fariisinayo.

Iskuulka ka fariisinta halka maalin ah – Marka arday iskuulka laga fariisiyo hal maalin, ardayga iyo waalidkiiba waa in lala socod siiyo arintaa ka hor inta aysan fariisintu bilaaban aan ka ahayn hadii laga cabsi qabo in ardaygu hadii ardayga loo sheego taa in uu markiiba uu khatar weyn galinayo naftiisa ama cidii kale ee ka ag dhow isaga ama hanti iskuulku leeyahay.

Ka fariisinta iskuulka ee ka badan halka maalin – "Fariisin" macnaheedu waa fal talaabo ah oo uu qaado maamule iskuul oo waafaqsan kuna xusan xeerarka gudoonka wax barashada, ee ka mamnuuca in arday u dhigto iskuul mudo aan ka badnayn 10 cisho. (Qeexidani ma quseeyso ka eryida ardaga laga eryo iskuulka muddo hal maalin ah ama ka yar..)

Ka hor inta aan iskuul kafariisintu bilaabin maamulka iskuuku waa in uu isku dayaa in uu u helaa ardayga qaab kale oo wax loo baro oo aan khatar galinayn shaqaalaha iskuulka, ardayga laftisa iyo ardayda kaleba ama hantida iskuulka.

Markii arday iskuulka laga fariisiyo muddo hal maalin ka badan, waa in ardaygaa arintiisa shir yarlaga yeesho ka hor inta aan la fariisin hadii aysan taasi u ekeyn in ay khatar galinayso shaqaalaha iskuulka, ardayga ama ardayda kaleba ama hantida iskuulka. Hadii aytaasi jirto waa in la qabtaa marka ugu horeeysa ee la haleeli karo ka dib ka fariisainta ardayga ee iskuulka.

Xiliga shirka yar ama ka horba , maamulaha iskuulku waa in uu la socod siiyaa ardayga sababta iskuulka looga fariisinayo waana in uu siiyaa sharaxaad ku saabsan cadeymaha ka dhanka ah ee ay mas'uuliyiintu hayaan ardayguna waxaa u soo ban dhigaa karaa kolkaa sida uu is kleeyahay dhankiisa wax waa u dhaceen.

Oraaladan soo socda waa in ay ardayga la siiyaa ka hor ama xiliga iskuul ka fariisintu ay bilaabmayso, waalidiinta adaygana waa in qoraaladan boostada loo dhigaa [U.S. mail] 48 sidaad saacadood gudhood xiligan kulanku dhacay.

- Ogoysiis qoraal ah oo ka hadlaya sababaha ardayga sikuulka looga fariisiyey;
- Oraah gaaban ooka hadlaysa xaqa'iqada jira;
- A description of the testimony;
- Qorshaha dib ugu soo celinta;
- Nuqul ku saabsan qodobka la yiraa Minnesota Statutes 121A.40 to 121A.56,
- Iyo adeegayada wax barida ee kale (kolka fariisintu ay ka badan 5 cisho). (Adeegyada wax barida kale ah waxaa ku jiri kara: gaar wax ugu dhigid, Manhaj la bedelay, wax barida la bedelay, iyo qorsheyaal kale, wax ku barasho qalabka korontada ku shaqeeya, adeegyo wax barid gaar ah oo ku xiran hadba sida laga arko qiimeynta ardayga, guri wax ku bar, shaqo guri ku kor meerid, ama ka qorida ardayga gudoon kale ama rug kale oo wax barasho oo loo xushay ogolaanshaha ay ardayga ogolaanayso in uu hor u kac sameeyo ku wajahan qalin jabin.)

Hadii tirda guud ee ardayga laga saaray iskuulku ay ka badan tahay 10 cisho sanad dugsiyeedka oo dhan kolkaa waa in iskuuku uu isku dayaa oo ku dadaalaa in uu la kulmo waalidka ardayga ka hor inta aan ardayga laga saarin iskuulka.

(U sii gudub boggaxiga)

Hadii waalidka laga helo ardayga waxaa loo raadin karaa meel caafimaadkiisa madaxa lagu soo baaro (iskuulku ma bixiyo kharashka ku baxa baaritaankaa caafimaadka ee madaxa hadii uusan qayb ka ahayn wax barashada gaarka ah.) Ujeedadada kulanku waa isku dayid la isku dayayo in la ogaado baahida ardaygu u baahan yahay baaritaan iyo adeegyo kale ama hadii waaldika uu isagu ardayga soo baarayo si loo ogaado in ardaygu u baahan yahay daryeel caafimaad oo loo siiyo xagga miyirka.

Isuulku waa in uu ku dadaalaa in uu telefoonka ku ogoysiiyo waalidka iskuulka ka fariiisanta ardayga sida si ugu dhaqso badan.

Lacala hadii ay dhacdo in ardayga iskuulka laga fariisyo iyadoon shirka gaaban la qaban waayo ardayga hadii loo sheego taa waxa uu markiiba khatar weyn galinayaa naftiisa ama cidii kale ee ka ag dhow isaga ama hanti iskuulku leeyahay. Ogoysiis qoran waa in loo geeyaa ardayga iyo waalidkiiba iyadoo loo dhigayo boostada [U.S. mail] 48 saacadood gudahood xiliga kulanka la qabtay.Warqadaha mar hadii boostada la dhigay. Maamulahuna koobi ayuu kala hari doonaa waraaqda

Iskuulka ka fariisinta taxan –ardayga si is xig xigta iskuulka loogama fariisin karo isla hal khalad oo uu u geystay ama hal dhacdo ah awgeed marka laga reebo daruufahan soo socda:

- Marka ardaygu uu gelin karo khatar weyn oo dag deg ah shaqaalaha iskuulka, ardayga naftiisa ama ardayda kaleba ama hantida iskuulka.
- Marka iskuulku uu rabo in uu bilaabo nidaam eryid ah, markaas oo uu maamulku uu u dheerayn karo mudada fariisinta ah ilaa iyo 15 cisho.

Mudo walba oo iskuul ka fasiisin ahi waxa ay u baahan tahay kulan u gaar ah .

Ogoysiinta Xaquuqda dib u soo celinta ah – Mar kasta oo arday ku soo noqon waayo iskuulka10 cisho gudahood ka dib markii mudadii la eryey ay u dhamaatay maamulaha iskuulku waa in uu la socod siiyaa ardayga iyo waalidkii isagoo warqad ugu diraya boostada[U.S] xaquuqda ardayga ee ah in uu iskuulka ku soo noqon karo.

Ka reebida iyo ka saarida

"Reebida" macnaheedu waa talaabo uu qaado Gudoonka Wax barashadu si uu uga hor tago is qorida arday uu is qorayo muddo aan ka badnayn hal sanad dugsiyeed.

"Eryid" macnaheedu waa talaabo uu qaado Gudoonka Wax barashadu oo ka mamnuuca arday iskuulka dhigtaa in u sii wato dhigashadaa iskuulka muddo ilaa iyo 12 bilood ah laga bilaabo maalinta ardayga la eryey.

Gudoonka wax barashada weeye cida arday ka reebi karta ama ka eryi karta iskuulka. Wax eryid ama ka reebid ahi ma jiri doonaan dacwad la'aan, aan ka ahayn in ardayga ama waalidkii in ay sameeyaan qoraal tanaasul ah.

- Ogoysiiska Falka la damacsan yahay iyo dhageysiga dacwada waxa u aaryooga iskuulku u qaadi doonaa sidan soo socota:
  - In waraaqaha ogoysiiska ah ardayga iyo waalidkii gacanta loogu geeyo ama loogu diro boostada [U.S. mail];
  - In waraaqahaasi ay ku qoran yihiin waxa dacwadu tahay oo dhameystiran, liiska makhraatiyaasha iyo tilmaam ah waxa ay makhraatiga ka yihiin;
  - Sheegid taariikhda, waqtiga iyo meesha dacwada lagu dhageysanayo;
  - In ay la socoto koobi ka hadlaya Minnesota Statutes 121A.40-121A.56;
  - Tilmaamid ku saaban adeegyo kale oo wax barid ah o o loo fidiyo ardayga si la isagu dayo in laga fursado eryida ardayga , iyo
  - In lagu war geliyo ardayga iyo waalidka xaquuqda ay leeyihiin ee ah:
    … in ardaygu uu keensan karo cid ka wakiil ah oo isagu doortay, oo uu ku jiri karo qareen xiliga dhageysiga dacwada. (iskuulku waa in uu la socod siiyaa ardayga iyo waalidkaba in qareeno lacag jaban ama bilaash loo heli karo iyo in liis ay ku qoran yihiin gargaaro la xiriira sharuucda laga heli karo Wasaarrada Wax barashada ee Minnesota);
    … Eegida diiwaanada tacliinta ee ardayga ka hor dhagesyiga dacwada;
    … Soo bandhigid cadeymo, iyo
    … In la hor keeno ayna imtixaamaan makhaartiyaasha ka dhan ah ardayga.

Dhageysiga – Dhageysiga waa in la qabtaa 10 cisho gudahood laga bilaab xiliga ogaysiiska la bixiyey hadii uusan codsan Gudoonka Wax barashadu, ardaygu ama waalidku in muddada loo dheeraayo dheereeyntaa oo aan ka badnayn shan cisho.

- Gudoonka waxa uu u magacaabi karaa mas'uul uga noqda wakiil gudoonka dhageysiga dacwooyinka ardayda iskuulka looga eryayo ama looga reebayo.
- Aaryowgu waa in qabtaa goobta dacwada lagu dhageysanayo. Karaani caawinaya dhageysiga dacwada iyo xaw-qal qalinkana waxaa bixin Gudoonka
- Dacwada goobta lagu qabanayo iyo waqtiga la qabanayaa waa in ay noqdaan waqti munaasib ah oo aan lug gooyo ku ahayn waalidka iyo ardayga.
- Dacwada dhageysigeedu waa in uu ahaandaa mid xiran oo cidna loo ogolayn aan ka ahan in waalidka ama ardaygu codsado in dacwadu furnaato.
- Ardaygu waa in uu xaq u yeeshaa in uu doorto cida matalaysa maslaxadiisa oo ay ku jiri karo qareen sharci yaqaan ah.
- Dhageysiga dacwada waa in lagu hor qaadaa mas'uul madax banaan, xubin ka socota Gudoonka Wax barashada, gudi hooseed ka tirsan gudoonka ama gudoonka oo dhan sida hadba uu go'aansado Gudoonka Wax barashadu.
- Dacwada waa in loo qaadaa si dhex-dhexaad ah oo aan eex lahayn
- Gudoonka waa in uu cajalad ka duubaa dhageysiga dacwada qolada kale waa ay codsan karaan in la siiyo cajaladaa laakiin waa inay kharaskeeda bixiyaan.
- Makhraatiyaasha waa in la dhaariyaa. Mas'uulka dacwada qaadaya waa in awood loo siiyaa uu cidii uu rabo ku amri karo in ay dacwada hor yimaadaan.
- Dacwada ka hor hadii ay macquul tahay, ardayga ama waalidka ama cidii kale ee ka wakiil ah iyaga waa in la siiyaa dhamaan wixii qoraalo ah ee iskuulku uu ardayga ka hayo ee ku taxa luqa ardayga, oo ay ku jiraan warbixinada imtixaanada iyo wixii loo soo jeediyey waxa laga yaabo in lagu saleeyey.
- Ardayga waalidka ama wakiilkoodu waxa ay xaq u leeyihiin in ay ku khasbi karaan in ay dacwada ka qayb galaan cidii shaqaalaha iskuulka ka tirsan ama shaqaale dowladeed ah ama cidii kale ee haysa cadeymo falalka lagu taliyey in la yeelo ay ku salaysnaan karaan iyo in la hor keeno lagu imtixaamo cidii makhraati u ah iskuulka waxa ay makhraatiga ka yihiin.
- Ardayga waalidka ama wakiiladoodu waxa uu xaq u leeyihiin in ay soo ban dhigaan cadaymo iyo makhraati fur ay mahraati u yihiin iyaga khibredleyaal .
- Ardayga laguma khasbi karo in uu makhraati ka furo dacwada iskuulka eryida.
- Koobi qoraal ah oo dacwada wixii laga duubay ah ayaa loo diyaarin ardayga, waalidka iyo cidii kale ee iyaga wakiil ka ah iyadoo siinta qoraalka uu gudoonku go'aankeeda leeyahay. Wax kharash ahna la iskama rabo hadii Gudoonku go'aansado in uu ardayga siiyo qoraalka dacwada laga sameeyey.

(U sii gudub boggaxiga)

- Wixii talooyin ah ee uu soo jeediyo mas'uulka dacwada dhageysanaya, xubinta gudoonka ka socota ama gudiguba waa in ay ku salaysnaadaan uun cadeymaha lagu soo ban dhigay dacwada waana in talooyinkaa loo gudbiyaa gudoonka qolyaha kalena lagula socod siiyo talada labo maalmood gudahood
- Gudoonku Wax barashadu waa in uu ku saleeyaa go'aankiisa talooyinka uu soo jeediyey mas'uulka dacwada dhagaystay ama xubinta gudoonka ka socota ama gudiguba waana in ay go'aankooda ku cadeeyaan kulan gaar oo ah in la qabto shan cisho gudahooda ka dib marka talada la soo jeediyey ay soo gaarto.
- Gudoonka waa uu siin karaa qolyaha kale fursad ay wax uga yiraahdaan waxa uu ku taliyey mas'uulka dacwada dhagaystay laakiin waa in aan labada qolo midna soo ban dhigay wax cusub oo aan markii hore looga hadlin dacwada
- Go'aanka Gudoonka Wax barashadu waa in uu ku salaysnaadaa diiwaanka, waa in uu qoraal ahaado waana in uu si faah faahsan u sheego xaqaa'iqda uu ku salaysan yahay go'aanka la gaaray si taasi ay kolkaa si wacan ugu war galiso go'aan gaarka qolyaha is haysta iyo Wasiirka Waxbarashada Minnesota

Racfaanka – Qolada lagu xukumay eryidu waxa ay ka qaadan kartaa racfaan go'aankaa iyagoo cuskanaya qodobka Minnesota Statutes 121A.40 ilaa 121A.56 oo oronaya cidii iskuulka laga eryaa waxa ay racfaan u diri kartaa Wasiirka Wax barashada 21 cisho gudahood laga bilaabo maalinta Gudoonku go'aanka gaaray.

- Marka loo keeno ogoysiiska racfaanka, iskuulku waa in uu ku siiyaa shan cisho gudahood wasiirka iyo waalidka koobi buuxa qoraalka laga sameeyey wixii lagu wada hadlay kolkii dacwada la dhageysanyey.
- Dhamaan wixii qoraalo ah ee qolada racfaanka qaadatay ay soo gudbinayso waa in lagu soo gudbiyaa looguna geeyaa qolada kale 10 cisho gudahood.
- Dhamaan wixii qoraalo ah ee qolada racfaanka laga qaatay ay soo gudbinayso waa in lagu soo gudbiyaa looguna geeyaa qolada kale 10 cisho gudahood.
- Sida uu qabo sharciga gobolku, go'aanka Gudoonka Wax barashada waa la sii dhaqan gelin inta racfaanka Wasiirka hawshiisu socoto.
- Racfaanada qaybtan soo hoos gala, wasiirku waa uu ayidi karaa go'aanka hay'adu gaartay, go'aanku dib ayuu u dhigi karaa inta cadeymo kale laga helayo, ama waxaa laga yaabaa in uu ka noqdo ama wax ka bedela hadii xaquuqda racfaan qaataha si weyn loogu tuntay sababtoo ah go'aanka la qaatay ayaa ah go'aan:
  - Xad gudub ku ah xaquuqda dastuuriga ah ee qofka;
  - Waa ay ka baxsan yahay awooda sharcigan iskuulku uu leeyahay;
  - Go'aanka marka la gaarayey waxaa lagu raacay hanaan sharci darro ah , oo ka baxsan qodobka Minnesota Statute 121A.48:

Dib u eegida Go'aanka – Go'aanka Wasiirka Waxbarashada ee Minnesota uu gaaray isagoo cuskanayo qodobka Minnesota Statutes 121A.40 to 121A.56 dib in loo eego weeye sida uu qabo qodobka Minnesota Statutes 14.63 to 14.69. Go'aanka wasiirku waa uu sii dhaqan galin doonaa inta racfaanku hawshiisu socoto.

War gelinta hay'adaha adeega – Gudoonka Wax barashadu waa in uu u soo sheegaa wixii talaabo fal ah ee la qaado sida uu qabo qodobada Minnesota Statutes 121A.40 iyo 121A.56 hay'adaha dowlada ee ku shaqada leh arinta, marka ardayga ay gacanta ku hayso hay'ad caynkaa ahi.

War gelinta Wasiirka Wax barashada – Gudoonka Wax barashada waa in iyaguna ugu soo sheegtaa eryida ama reebida caynkaa ah 30 cisho gudahooda Wasiirka Wax barashada laga bilaabo maalinta falku dhacay iyagoo adeegsanaya qalabka korontada ku shaqeeya ee wax bixinada caynkaa ah lagu gudbiyo.

- War bixinta waa in ay ku jirtaa oraah ka hadlaysa adeegyo kale oo wax barasho oo ardayga la siiyey hadii ay jiraan iyo hadii ikale iyo sababta loo siieyey, maalinta ay bilaabmayso eriyadu iyo muddada ay soconayso. War bixinta sidoo kale waa in ay ku jiraan da'da, fasalka, jinsiyada iyo qaaruunta ardayga iyo in wax barasho gaar ah ardayga la siiyo iyo in kale.

- Gudoonka Wax barashadu waa khasab in uu ku daro lambarka aqoonsiga ah ee ardayda gobolku siiyo dhamaan wixii warbixinada iskuul ka eryida ah ee ay u baahato Wasaarada Wax barashadu.

Ogoysiiska Xaqqa u yeelad dib ugu celinta Iskuulka – Mar kasta oo arday uu iskuulka ku soo noqon waayo 10 cisho gudahood ka dib markii eryidii u dhamaatay, maamulehu waa in uu waraaq ugu diraa boostada [US mail] waalidka iyo ardayga waraaqdaas oo labadaba la socod siinaysa xaqqa ay u leeyihiin in ardaygu dhigan karo dibna loogu soo celin karo dugsiyda dowlada.

Qorshada u ogolaanta ama dib ugu ogolaanta – Maamuleyaasha iskuulku waa in ay u diyaar garoobaan ayna adkeeyaan qosrhaha u ogolaanshada ama dib ugu ogolaanshaha ah ee arday kasta ee hadda ka hor laga eryey ama laga reebay iskuul. Qorshaha waxaa ku jiri kara tallaabooyin lagu hagaajinayo akhlaaqda ardayga oo ay ku jiraan qaadashada mashruuca hagaajinta akhaaqda ah sida waafaqsan qodobka Minnesota Statute 120B.232, subd. 1, oo dhigaya in loo baahan yahay ku lug yeeladka waalidka hawlaha dib loogu ogolaanayo iskuulka ardayda iyo la soco siinta ciqaabaha u mutaysan karo ardaygu hadii uusan wax ka badelin dabeecadiisa.

- Waxaa saameyey khaladaad kale oo dhan sharciga ah oo la sameeyey;
- Wax weyn oo cadeyn ah oo daliil ah looma hayo marka la eego dhamaan qoraalada la soo gudbiyey, ama
- Wuxuu ahaa mid la aliftay oo hadba sii la rabo laga dhigayey.

Wasiirka ama wakiilkiisu waa in ay gaaraan go'aankooda kama dambaysta ah iyagoo ku salaynaya cadeymha iyo qoraalada la daliilsaday. Wasiirku waa in uu ku soo saaraa go'aankiisa 30 gudahood laga bilaabo maalinta dhamaan qoraalada racfaanka qaadashada ah ee qolyahada is haystaa ay soo gaaraan. Go'aanka wasiirku waa ka dambayn qolyaha oo dhan waa uu qabanayaa marka uudhaco waqtiga.Minnesota 121A.50

Gudoonka Waxbarashada

Jackie Magnuson, Gudoomiye
Joel Albright, Gudoomiye ku xigeen
Sachin Isaacs, Karaani
Art Coulsen, Khasnaji
Craig Angrimson, Agaasime
Mike Roseen, Agaasime
Bob Schutte, Agaasime

Mary Kreger, Aaryowga ku meel gaarka ah

Independent School District 196
455 153rd St. West
Rosemount, MN 55068-4946
651-423-7700

U adeegga dhamaan ama qaybo ka mid ah magaalooyinka Apple Valley, Burnsville, Coates, Eagan, Inver Grove Heights, Lakeville, Rosemount, and Empire amd Vermillion Townships

Non-Profit Org.
U.S. Postage
PAID
Rosemount, MN
Permit No. 1

DISTRICT196
One District. Infinite Possibilities.

rdSt.West

Rosemount,MN55068-4946
3455153

AKHBAAR
MUHIIM AH

OO
ARDAYGA
KU
SAABSAN

Hagaha Waalidka/masuulka iyo diidmada ka qayb qaadashada ardeeyga ee imtixaanka gobalada

Warqadaan waxay ka caawineesaa waalidiinta/masuuliyiinta inay qaataan go'aano aay ka dharagsan yihiin kaas oo caawinaya caruurtooda, dugsiyadooda iyo bulshooyinkooda.

Maxaa loo qaadaa imtixaanaya gobalada oo dhan?

Minnesota waxay qiimaysaa nidaamka wax barashadeeda iyo xirfada barayaasheda. Barayaasha Minnesota waxay abuureen heerka tacliinta kasoo ah mid adag oo u diyaarinaya ardadeena mustaqbal iyo jaamacad.

Imtixaanka golada oo dhan waxay kusaleesan tahay qaabka gobal kasta u cabiro manhajka iyo tilmaamaha joogtada ah ee dugsiyadeena waxay waafaqsan yihiin heerarka tacliinta, hubinta in ardayda oo dhan helaan wax barasho siman. Natiijooyinka imtixaanka gobalada oo dhan waa hal qalab oo lagu kormeerayo marka in aan siinayno ardayda waxbarashada tasoo u hubinaysa shaqaale xoog leh iyo muwaadiniin tacliin leh.

Ka qaybgalka muxuu muhiim u yahay?

Imtixaanka gobalada oo dhan waa hal cabbir oo lagu cabiro guulaha ardaygaada, lakiin ka qaybgalka ardaygaada wuxuu muhiim u yahay in la fahmo sida wax ku ool u tahay waxbarashada dugsiga ardaygaada inay waafaqsan tahay heerarka tacliinta.

- Hirgalinta sharciga federaalka ee Ardeey Walbo inuu Guulesto ee Minnesota, ardaygu ma heli doono dhibco iyo ujeedooyinka xisaabinta xisaabtanka dugsiga iyo xisaabinada, iyada oo aay kujirto fursadooyinka taageerida iyo aqoonsashada, looma tixgelinayo "aqoon wanaagsan"
- Ardayda ka helaan MCA-g dugsiga sare buundada jaamacada lagu galo logama baahna inaay ka qaataan casharada muraajacada aan laxisaabin jaamacada Minnesota ee ku saabsan maadooyinka u dhigma qeebahooda, si loo badbaadiyo waqtiga iyo lacagtaba ardayga.
- Barayaasha iyo sharci dajiyaasha waxay isticmalaan xogta Imtixaanka si ay u garaan go'aano kusaabsan khayraadka iyo bixinta taagerada.
- Waalidiinta iyo qaybaha dadwaynaha waxay isticmaalan qiimeenta xogta si ay iskugu barbar dhigaan dugsiyaasha iyo inay garaan go'aano kusaabsan mesha guri laga gadan karo ama ay kasoo diwaan gashadaan caruurtooda.
- Natiijooyinka wax qabadka dugsiga ee sida cad loo soo daayo aayna isticmaalaan qoysaska iyo bulshooyinka, sixun ayaay usameeyneeysa hadii ardayda aanan ka qayb galin Imtixaanka.
- Ardayda Ingiriiska ma qaadaneyso ACCESS ama ACCESS Kale oo ELLs ma helayaan buundada lagu buuxinayo sharuuda jirtay ee barnaamijka ardayga Ingiriiska.

Heerarka tacliinta iyo Imtixaanka

Waa maxay heerka tacliinta?

Heerarka Waxbarashada Minnesota K–12 waa filashda gobalada oo dhan ee guulooyinka tacliinta ardayga. Waxay soo saaran aqoonta iyo xirfada ardayda oo dhan ay kuqasban yihiin inay kuguulaystaan qaybta tacliinta ah waxaana loo abaabulay qaabka heerka fasalka. Dugsiga dagmada wuxu go'aamiya qaabka ardaydu u garayaan heerarka ayagoo sameenay casharo iyo manhaj wafajsan heerarka tacliinta.

Waa maxay xiriirka udhaxeeya Imtixaanka tacliinta gobalada iyo heerarka tacliinta?

Imtixaanka gobalada ee xisaabta, aqriska iyo sayniska waxa loo isticmaala in lagu cabbiro haddi ardayda, dugsigooda iyo dagmoodinkooda ay hiigsanayaan heerarka tacliinta. Qiimeenta gobalada waxa lagu cabbira qaabka wanaagsan ee ardayga usameenayo tacliinta taas oo qayb ka ah waxbarashadooda joogtada ah. Sidoo kale waxa lagu cabbira qaabka wanaagsan ee dugsiyaasha iyo dagmooyinka ay u simayaan manhajkooda iyo baridda heerarkooda.

Qiimeynada Dhamaystiran ee Minnesota (MCA) iyo Imtixaanka Xirfadaha Tacliinta ee Minnesota (MTAS)

- Iyada oo Kusaleesnaan heerarka tacliinta Minnesota; ee sanad kasta lasiiyo fasalada 3-8 iyo dugsiga sare ee aqrinta iyo xisaabaadka; sanad kasta lasiiyo fasalada 5, 8 iyo dugsiga sare ee sayniska.
- Ardayda badankood waxay sameeyaan MCA
- MTAS waxaay dookh u tahay ardayda leh naafanimada garashada muhiimka ugu badan leh.

ACCESS iyo ACCESS-ka dhinaca kale ee bartayaasha ingiriiska

- Iyada oo kusaleesnaanta heerka hormarinta luuqada ingiriiska WIDA.
- Ee laga siiyo sanadkasta bartayaasha luuqada ingiriiska heerka k-12 aqriska, qorida, dhageesiga iyo ku hadalka.
- Inta ugu badan bartayaasha luuqada ingiriiska waxay sameeyaan ACCESS ee ELLS.
- ACCESS-ka dhinaca kale ee ELLS-ka waxay dookh u tahay ardayda leh naafanimada garashada muhiimka ugu badan leh.

Sababtee qiimeentaas ay utahay wax ku ool?

Minnesota waxay aa minsan tahayin in si wax ku ool ah loo cabbiro waxa ardayda ay baranayaan,imtixaanka waxa uu ubahan yahay wax kabadan jawaabo ladooranayo.

- Si looga jawaabo suaalaha, ardayda wa inay qoraan jawaabo, aay jiidaan ama ay dhigaan sawirada iyo xarfaha, ama ay xukumaan garaaf ama xog.
- Aqrinta iyo Xisaabadka MCS da waa lala qabsadaa, taaso la micna ah jawaabta ardayga uu bixinayo waxay ku xiran tahay jawaabta uu bixin doono.
- Sayniska MCA da waa wax lagu daro oo qubano ah, tasoo u bahan in ardayga uu sameeyo si uu oga jawaabo suaalaha.

Intaas oo dhan waxa loo siiyay ardayga si uu ugu fakaro sababta loogu bahan yahay inuu kugulaysto jaamacada iyo xirfadaha iyo inay tusaan waxa ay sameen karaan oo ay awoodaan. .

Xadidaad miyuu leeyahay imtixaanka gudaha?

Sida lagu sheegay xeerarka Minnesota, qaybta 120B.301, ardayda heerka 1-6, wadar ahan waqtiga guud inuu qaato gudaha, waxay ka kama badanayso tahay dagmooyinka ama dugsiyaasha imtixaankooda kama kabadanayo 10 saac dugsi kasta sanadkii. Ardayda heerka 7-12, wadar ahaan waqtiga guud inuu qaato gudaha, waxay ka kama badan tahay dagmooyinka ama dugsiyaasha imtixaanka kama badanayso 11 saac dugsi kasta sanadkii. Xadidaaddahan qayb kama aha imtixaanka guud ee gobolada.

Dadaalka aan ku dhiiri galinayno qaab hufan, dagmada qaynuun keeda, warqadaha dugsiga, ka hor maalinta sanadka kowaad, waa in lagu soo bandhigo websideka si buuxda iyo waqtiga heerka imtixaanka la diiwan galinayo sida dagmada ama dugsiyaasha sanadkaas gudihiisa. Calenderka waa inuu muujinayo diiwan galinta imtixaan kasta iyo waa inuu muujinayo haddii imtixaanka uu yahay kan gudaha ama loo bahan yahay sharciga gobalka.

Waa sidee hadii aan doorto in aan kaqayb galin ardaydeeyda?

Waalidka/masuuliyiinta waxay awoodan inay doortaan inaysan kaqayb galin ardaydooda imtixaanka gobalka. Qaynuunka Minnesota waxay u bahan tahay inay latuso xog ku saabsan imtixaanka gobalada si waalidiinta/masuuliyiinta iyo inay kudaran warqado buuxa hadii aydiidan inay ardaydooda kaqaybgalaan. Warqadaan waxay fududaynaysaa in baalka xiga iyo uu lahaado qayb lagu qoro sababta ay udiiden inay kaqayb galaan. Ardaydaada dagmada waxay u bahan karaanxog dheraad ah.

Dugsiga ama dagmada waxay haysan karaan sharci dheraad ah marka laga tago kuwaan aan warqadan ku cadeenay ee ah ardayda aan ka qayb galeen imtixanaadka gobalka. Waxa kaloo dhici kara hashiis sharci kale hadii aysan ka qayb galin imtixaanka loo doortay iyo diiwan galinta heerka gudaha. Fadlan la xariir dugsigaga saad u heshid xog dheraad ah.

Goorma ayay ardayda qaataan imtixaanka?

Dugsi kasta wuxuu leeyahay waqti imtixaan oo ah isla waqtiga imtixaanaadka. Laxariirida dugsigaga xogtiisa ee maalmaha qaaska ah ee imtixaanlka.

- MCA da iyo MTAS ta imtixaankooda wuxuu biloowda bisha sedexaad iyo dhamaada bisha shanaad.
- ACCESS iyo ACCESS-ka dhinaca kale ee ELLs imtixaanka wuxu biloowda dhamaadka bisha kowaad iyo dhamaada bisha sedexaad.

Goorma ayaa helayaa natiijada ardaydayda

Xagaa kasta, macluumad arday ayaa loo diraa dugsiga dagmooyinka iyo inyar kabacdina waxa shir loo qabtaa qoysaska. Xogta waxa loo isticmaali karaa cunuga hor u socodkiisa iyo si mustaqbalka loo duwo.

Waqti imisa ah ayay qadanaysaa imtixaanka?

imtixaanaadka gobalada waxa la qata sanadkii hal mar; badanaa ardayda waxay tijaabiyaan onlineka. Kala bar, waqtiga ay qaadato imtixaanka gobalada waain ka ayarin ka yar 1 **marka la barbar dhigo waqtiga loo qabtay** sanaadkas dugsiga. Imtixaanadka waqti u goan majiro iyo ardayda waxay wadi karan shaqo inta ay u bahan yihiin.

Maxaa waaye sababta ay ardaydayda ugu muuqdaan kuwa qaadanaya imtixaan saaid ah?

Imtixaanka gobalada waxa laga xadiday kuwa aan warqadaan aan ku xusnay, Dagmooyin badan waxay qataan go'aamo inay aqbalaan imtixaan saaid ah kasoo gobalka aan u baahnayn. La xariir dagmadada saad u heshid xog dheraad ah.

Halkee kaheli karaa xog dheraad ah?

Ardayda iyo qoysaska waxay kaheli karaan wax dheeraad ah Bogga Imtixaanka Gobolka oo dhan (education.state.us > Ardayda iyo Waalidiinta> Barnaamijyada iyo Ujeedooyin> imtixaanka gobalada).

Qaynuunka minnesota, qaybta 120B.31,hoosaadka 4a, wuu u bahan yahay godoomiyaha inuu abuuro iyo inuu daabaco warqado waalidiinta iyo masuuliyiinta si ay u dhameestiraan hadii ay diidaan inay ardaydooda kaqayb galaan imtixaanaadka gobalka. Ardaydaada dagmada waxay u bahan karaan cadeemo dheraad ah. Dugsiga gobalka waa inuu soogaliyo warqadaan saddexda bog ah dagmada websidekeeda iyo kuna daraa ardayda dagmada buugaagtooda gacanta.

Waalidiinta/masuuliyiinta diidmadooda inay ardayda kaqayb galaan imtixaanka gobalada.

Si ay oga gaabsadaan imtixaanka gobolada waalidiinta/masuuliyiinta waa inay buuxiyaan warqadaan kuna sooceliyaan dugsiga ardayda.

*Si aad u taageertid qorsheenta dugsiga dagmada, fadlan usoo gudbi warqadaan ardayda dugsigooda kahor bisha kowaad 15keeda ee waqtiga ee waqtiga sanadka. Ardayda laqoro kabacdi imtixaanka gobalada bilowga furitaanka, fadlan soo gudbi warqada mudo labo isbuuc ah inta qoritaanka socdo. Warqada cusub ee diidmadab yaa loobahan yahay **sanad kasta** Waalidiinta/masuuliyiinta raba inay kabixiyaan ardaydooda qiimeenta gobalada.*

Waqtiga_____(Warqadaan waa **kaliya** lagu socodsankaraa to Sanadka dugsiga.)

Magaca sharciyan ugu horeeya ardayga_____ Sharciyan magaca dhexe ee ardayga_____

Magaca sharciyan ugu danbeeya ardayga_____ Waqtiga ardayga dhalashadiisa_____

Dagmada ardayda/dugsiga_____heerka_____

Fadlan kumuuji marka hore inaad heshay iyo oo aad kusameesay muraajaco xogta kusaabsan imtixaanka gobalada.

_____ Waxan helay xog kusaabsan qiimeenta gobalada iyo oo aan doorto inaa ardayda kasaaro. MDE waxay ku qaybisaa hagaha *waalidka/masuulka iyo diidmada ka qayb qaadashada ardeeyga ee imtixaanka gobalka* barteeda wabsaydka ee MDE websiteka (Ardayda iyo Waalidiinta> Barnaamijyada iyo Ujeedooyin> imtixaanka gobalada).

Sababta diidmada:

Fadlan kumuuji qimeenta gobalada(s) waxad tusinaysaa ardayda heerka dugsiga sanadkan:

_____ MCA/MTAS aqrinaya _____ MCA/MTAS sayniska

_____ MCA/MTAS Xisaabta _____ ACCESS/ACCESS-ka dhinaca kale ee ELLs

La xariir dugsigaga ama dagmadada si aad u aragtid warqada qiimeenta gudaha.

Waxan fahan sanahay saxiiixida warqadaan, dugsigeyga iyo aniga waxaa lumin karnaa warbixin muhiim ah eek u saabsan sida wanaagsan ee ardaygeyga ugu hormarayo aqoon ahaan. Sida ay sababtay, ardaygeyga ma helayo buundada shaqsiga. Diidmada looga qeybqaadanayo qiimeynada gobolka oo dhan waxay saameyn kartaa dugsiga, degmada, iyo dadaalada gobolka ee sinnaanta qeybinta illaha oo taageero waxbarashada ardayga; wixii ujeedada dugsiga iyo xisaabinada la xisaabtanka degmada, ardaygeyga looma tixgelinayo "aqoon wanaagsan."

Haddii ardaygeyga dugsi sare ku jiro, waan fahamsannahay in saxiixida foomkaan ardaygeyga uusan yeelaneyn MCA buundada si la filayo u illaalin karto waqti iyo lacag oo ah ka qaadasha la'aanta daawada, koorsooyoinka aan buundada laheyn ee kulliyada ama jaamacada Gobolka Minnesota.

(Dabacaada) magaca waalidka/masuulka _____

Saxiixa waalidka/masuulka _____

Waa inuu dhameeyo dugsiga ama shaqaalaha dagmada kaliya. Aqoonsiga ardayga am MARSS lambarka _____